
# SHEEKOOYIN SOOMAALIYEED

## WIILWAAL, MATAAN-CIIDEED, INA-GALAYDH IYO QAAR KALE



AXMED F. CALI "IDAAJAA"

To: Prof. Annarita Puglielli
In recognition of your positive role in the development of written Somali —
A. F. Idaajaa - Author
20/3/2009

# SHEEKOOYIN SOOMAALIYEED

# WIILWAAL, MATAAN-CIIDEED, INA-GALAYDH IYO QAAR KALE

AXMED F. CALI "IDAAJAA"

To: Prof. Annarita Puglielli
In recognition of your positive
[illegible] the development of
written Somali


**Copyright 2007**

Buuggaan, dhammaantiis iyo qayb ahaan toona, cidina ma daabcan karto, ma masawiran karto oo ma minguursan karto, habab kalena (electronical & mechanical) uma adeegsan karto, haddii aan faafiyaha; Axmed F. Cali "Idaajaa" laga helin oggolaansho qoraal ah.



Printed by Graphic Lineups Ltd.
P.O. Box 49912 - 00100 Nairobi, Kenya




# TUSMADA


Mahadnaq.......................................... iv

Gogoldhig.......................................... vii

**SHEEKOOYINKA:**

- Wiilwaal.......................................... 1
- Mataan-Ciideed.......................................... 47
- Aadan Galaydh.......................................... 87
- Shire Jaamac-Gaar.......................................... 105
- Tuurgadaal.......................................... 117

# Mahadnaq

Akhristaha iyo buuggan gacantiisa ku jira inta aanan isaga dhex-bixin, xil i saaran waxa aan u arkay in aan halkan ku xuso qaar ka mid ah odaydii aan wax ka bawsadey xilliyadii aan ururinta sheekooyinkaan ku hawllanaa. Odayadaas oo haddaba qaar nool yahay, qaarna ay iisheeni waxay isugu jiraan abwaanno, maansoyahanno, sheeko-xanbaarro, gabay-xanbaarro iyo qaar, si gaar ah, suugaanta Soomaalida u jecel, taariikhdeedana u daneeya. Runtii, mahadnaq iyo xusid ayay iga mudan yihiin, maxaa yeelay waxay igu biiriyeen warar, haddii aanan ka heleen, ay bilicda buuggani kala dhantaallaan lahayd.

Aan u horraysiiyo oo aan halkan uga duceeyo, ugana mahad-naqo, Allaha u naxariistee, abwaan Maxamad Xaaji Xuseen oo 'Sheekoxariir ku magac dheeraa ((Sheekhaash, Reer-Aw-Quddub), muddona aannu ka wada tirsanayn Guddigii Afsoomaaliga ee 1972kii fartii afka lagu qoray isagu u soo habeeyey. Sheekoxariir (1893-1991) wuxuu ahaa macallimiintayda afka iyo suugaanta Soomaaliyeed kuwii iigu waxtarka roonaa midkood. Dhinaca kale, wuxuu ahaa nin ku dhashay, ku barbaaray, kuna dhaqday dhulka Ciid loo yaqaan ee Galbeedka degaammada Soomaaliyeed ka midka ah. Inteeda badan, Isaga ayaan sheekada layaabka leh ee Mataan-Ciideed ka weriyey.



Waxa aan haddana halkan uga ducaynayaa, Allaha u naxariistee, saaxiibkay Sheekh Caaqib Cabdullaahi (Bartire, Reer-Garaad) oo isna ka tirsanaa odayadii Guddiga Afsoomaaliga, ina baray wax badan oo ku saabsaan waayihii Garaad Wiilwaal iyo sheekooyinkiisa amankaagga miiran ah.

Sidoo kale, isna Allaha u naxariistee, ma illoobi karo saaxiibkay Cabdi-Daahir Faarax-Gaas (Ogaadeen, Reer-Dalal) oo aannu muddo dheer sheeko-wadaag ahayn, warar door ahna igu kordhiyey markii sheekada Mataan-Ciideed aan xogaheeda ka toyanaayey.

Mahadnaq cuddoon waxaa isaguna iga mudan odayga gabay-xanbaarka iyo sheeko-xanbaarkaba ah ee sanadaha doorka ah aannu isu badnayn, fadhi-wadaaggana aannu ahayn. Waa Maxamed Aw-Nuur Cali-Qaal 'Farascadde' (Marreexaan, Reer-Diini) oo, Mataan-Ciideed ka sokow, isagu iigu horreeyey sheekada Shire Jaamac-Gaar ee gobolka Gedo ka dhacday.

Waxa aan isagana lib iyo gallad u hayaa gabyaaga aannu wadeyga nahay ee lagu magacaabo Cabdullaahi Xaashi Warsame 'Waranle' (Marreexaan, Reer-Diini) oo ii sheegay dhawr geeraar iyo dhacdooyin muhiim ah oo ku saabsan sheekada Aadan Galaydh iyo dagaalladii qabaalka.

Marka xigana, waxa aanan isagana illoobi karayn walaalkay Tr. ( Dr ) Cabdi Faarax Cali oo ah hawlahayga suugaaneed nin had iyo jeer u dhuun-daloola, igalana taliya. Taas ka sokow, waxaan abaal ugu hayaa kaalintii weyneyd ee uu ka galay soo-bixidda buuggaan, gaar ahaan xagga kharashka daabacaadda.

Sida raggaas hore, waxaa isaguna abaal iigu leh saaxiibkay Raphael Wittwer oo u dhashay dalka Switzerland, ahna nin Soomaalida iyo dhaqankeedaba ay wax badani uga bilaaban yihiin. Waa inan aad u dhallin yar, hase ahaatee la oran karo, 'afsoomaaliga wuu daadiyey!'. Waxa aan ugu abaal-hayaa qaab-dhismeedka uu buuggaani ku soo baxay oo uu isagu toddobaadyo ku hawshooday iyo, weliba, talooyin uu iga siiyey dhinaca bilic-u-yeelidda qaybaha ay sheekooyinku ka kooban yihiin.

Axmed F. Cali "Idaajaa"
Neyroobi, Keenya
Abriil 2007



## GOGOLDHIG

Baalasha uu buuggani ka kooban yahay waxaa dhexdooda ku urursan dhawr sheeko oo isugu jira qaar caan ah oo degaannada Soomaalida aad looga yaqaan iyo qaar aan sidaas loo aqoon, ha yeeshee aan ka xiiso yarayn.

Dhammaantood waa sheekooyin, dhab ahaan, u dhacay. Midina kuma salaysna curis male`awaal suugaaneed ka soo maaxdey. Sidaas oo ay tahay, haddana laguma doodi karo sheeko walba dhacdooyinka ku xusani inay waafaqsan yihiin sidii runta ahayd ee ay wax u dhaceen. Maxaa yeelay, ma ay jirin dad aannu nolol kula kulannay oo markii ay dhacayeen goobjoog u ahaa.

Sidoo kale, ma aannu helin - saa weligoodba ma jirine - qoraallo ay awooweyaasheen inoo reebeen oo sheekooyinkani ay ku xusan yihiin, annaguna aan ka soo min-guurinney. Waxay ahaayeen ummad xoolo-raacato ah oo aan wax akhriyin, waxna qori jirin, hase ahaatee murti badan. Sidaas daraaddeed, waa sheekooyin ay bulshadu muddo dheer, af ahaan, isugu werinaysey oo, tan iyo maalmihii ay dhaceen, aabbe waliba uu inammadiisa u werinaayey, isaga oo xusuustiisa keliya isku hallaynaaya, wax walbana cuskinaaya.

Waxaa, haddaba, marag-ma-doonto ah sheeko kasta oo habkaas nagu soo gaadhey inay na soo gaadhey iyada oo kala dhantaalan ama iyada oo lagu kordhiyey arrimo aan markii hore ku jirin ama iyada oo dhacdooyinku sidii ay dhabtii isugu xigeen aan la isugu kaaya xijin.

Cidina intay dhiirrato dhab uma sheegi karto sheekooyinkan shanta ahi xilliyadii ay dhaceen. Macnaheedu wuxuu yahay: lama hubo sannadihii ay dhaceeni kuwii ay ahaayeen. Sidaas oo ay tahay, haddana waa la maamin karaa, waxaana lagu male weyn yahay inay ku aaddan yihiin labadii qarni ee ka horreeyey midkaan hadda bilawga ah ee 21d.

Saddex ka mid ahi (Mataan-Ciideed, Wiilwaal iyo Aadan Galaydh) waxay ku beegan yihiin qarnigii 19d qaybtiisii hore. Labada kale (Shire Jaamac-Gaar iyo midda Reer-Tuurgadaal) waxay iyaguna ku aaddan yihiin bilawgii iyo bartamihii kii 20d.

Af kasta ha la isugu weriyo, cid kastaa ha weriso, ifka meeshii ay doontona ha ka dhacdee, sheeko waliba duluc loo weriyo ayay leedahay. Kuwanina kama duwana oo tilmaantaas ayay wada leeyihiin. Malahayga, dulucda ay xanbaarsan yihiin ayaa sabab u ah waxa ay u halmaami weydey ee muddada dheer ay Soomaalidu isugu werinaysey. Taana in aan carrabka ku dhufto waxa aan ka door-biday in aanan ku dhufan, si aan akhristaha ugu daayo inuu isagu sheeko walba kala soo dhex-baxo wax-dheefka ay maankiisa u yeelan karto iyo murtida uu ugu irkan karo ee uu tusaalaha ka dhigan karo.




Si kastaba ha ahaatee, waxaa hubaal ah sheeko walba inay daf ka yihiin dhacdooyin iyo arrimo aan tiro lahayn oo ku saabsan taariikhda bulshadeennii hore iyo dhaqammadii dhexdeeda ka hirgalay; kuwaas oo qaar wacan iyo qaar aan wacnaynba lahaa.

Ugu dambaystana, inta aanan qalinka iska dhigin ayaan waxaan jeclaan lahaa akhristeyaasha in aan xusuusiyo in aniga wax la iga saari karo wixii goldaloolo ah oo lagu arko sheekooyinka halkan ku qoran. Sidaas oo kale, waxaa iyaguna taas eeddeeda wax ku yeelan kara odayadii aan ka weriyey ee ii soo tebiyey.

Akhris wacan

# I



# WIILWAAL

"Rag hooyadiisna u hayey oo 'walaalow'
wax uu ku dhaamo waan waayey!"

*(Wiilwaal)*

Magacyada waaweyn ee taariikh-bulshadeedka Soomaalida ku xusani way faro badan yihiin. Waxaa ka mid ah degaannada dalka oo dhan magac laga yaqaan, asii dadka qaarkiis ay jiritaankiisaba isweyddiiyaan; iyaga oo u haysta inuu ka mid yahay magacyada ku jira sheeko-xariirooyinka Soomaalida sida Dhegdheer, Cigaal Shiidaad, Arraweelo iyo kuwa kale ee ay ujeeddada wadaagaan. Waa magac sida uu u dheer yahay aan wax sugan looga haynin, hase ahaatee weriyeyaashu falal layaab leh ay inaga soo gaarsiiyeen. Waa magac aynu ka dhaxalnay sheekooyin lala amankaago oo in la rumaystaa ay adag tahay, mararka qaarkoodna aan sheeko-xariirooyinka ka dhicin amaba ka ashqaraar badan.

Magaca aan u jeedaa waa Wiilwaal oo ahaa, dhab ahaan, ruux jirey, xusiddiisuna ay lama-huraan tahay haddiiba la rabo hababkii madaxtooyo ee xoolo-raacatadeennii hore in wax laga ogaado.

## 1. Dhalasho & barbaarid

Goor lagu male weyn yahay inay ahayd dhammaadka qarnigii 18d ayuu ninka magacaas lihi ka soo if-baxay Galbeedka Soomaalida degta, gaar ahaan Jigjiga iyo dhulka u ogogga leh ee ay iyadu ugu magaca dheer tahay. Waxaa dhalay tolka Bartire[1] loo yaqaan Garaadkii madaxda u ahaa; kaas oo la oran jirey Garaad Faarax Garaad Xirsi. Garaadku wiilkaas u dhashay wuxuu ku samiyey awowgiis-aabbe. Wan weyn intuu gawracay ayuu Xirsi ugu wanqalay. Malaha waxay la ahayd taasi inay keeni karayso inanka oo awowgii ka raaca tilmaamihii wanwanaagsanaa ee uu lahaan jirey amaba lagu malaynaayey.

Iyada oo weli la xanbaarsan yahay ayay Xirsi hooyadiis waxay ula kacday reer-abitigiis oo degaankoodu ahaa hawdka Hargeysa koonfur-bari kaga aaddan. Sabab ku jiiddey nalooma sheegine, halkaas ayay muddo dhawr gu' ah kula maqnayd.

1. Daarood, Absame



Habka nolosha reer-aabbihiis iyo midka reer-abtigiis way kala duwanaayeen oo halka reer-abtigiis ay giddigood xoolo-dhaqato ka ahaayeen, reer-aabbihiis, xoolaha ka sokow, waxay ahaayeen qodato dalagga beerata oo inta badan aan guurguurine, meelo aan kala durugsanayn ku negaata.

Sida la og yahay, labadaas hab-nololeed dadka kala raacsani way kala anshi duwan yihiin. Muran badan iyo dafdaf siyaado ah ayaa xoolo-raacatada lagu xantaa, beerreydana degganaan iyo feker aamusan. Dirir fudud iyo gacanta oo ka soo horraysa ayaa xoolo-raacatada lagu sheegaa oo waxay ku maahmaahaan, 'dagaal gondahaaga ayuu ka dhashaa', beero-falatadana nabad-jacayl iyo dulqaad badan. Waa laba dabeecadood oo labada hab-nololeed ay ku kala geddisan yihiin, dadkoodana lagu kala sooco.

Xirsi oo kuray ah, reer-abtigiis iyo geeljirena ku soo barbaaray ayaa Galbeed iyo reer-aabbihiis dib ugu soo noqday. Illeen waa inankii Garaadkee, markiiba daymo siyaado ah ayaa loo yeeshay. Mase wiilasha kale ka fudfudud. Wiilasha kale ka firfircoon. Wiilasha kale ka wax-toyasho badan. Wiilasha kale ka su'aalo dhiirran. Wiilasha kalena ka qalab badan, kana dagaal aqoonsan.

Intii meel isugu timaaddoba, isaga uun baa ka soo muray oo wax u teeleeyey. Isaga oo aan la magacaabin ayuu madax isaga dhigay, isaga oo aan cidi u shuuminna waa u taliyey.

Odayaashii degmada midkood oo u fiirsaday ayaa yiri: 'war kani waa jinni-boqor!'. Naynaastaas ayaa muddo loo yiqiin, in kastoo waayadii dambe ay ka hadhay oo loogu beddalay naynaas kale oo ku dhegtey, taariikhdana uu ku galay. Waa naynaasta uu caanka weli ku yahay ee ah: Wiilwaal.

Weli isaga oo aan qaan-gaarin ayaa geesinnimo dheeraad ah lagu arkay, loona qiray. Maalintii uu shan-iyo-toban-jirsadey ayuu colwadeen noqday. Guutooyinkii tolkiis ayuu ammaanduule u ahaaday. Da'daas oo kale wiil wiilal ka fooray mooyee, cid kale hoggaamiyennimo kuma hanan jirin.

Dagaal-aqoon, fardo-dhaarinnimo iyo gacan fudayd lala yaabay ayaa barbaarnimadiiba lagu bartay. Weligiisna, siday weriyeen, cidi ay isqabteeni nabar kalama hor-marin. Feejignaan siyaado ah iyo tuhun joogto ah oo dad oo idil uu ka qabey ayuu caan ku noqday, kuna tilmaannaaday. Had iyo jeer, warmihiisa iyo qalabkiisa dagaalka gacantiisu meel aanay ka gaari karin kuma uu ogaan!

Aabbihiis Garaad Faarax baa dadka u boqranaaye, isagii baa hareeyey oo inta odaygiiba la illoobey ayaa magacii Wiilwaal lagu hadaaqay. Nin waliba waa ka baqay, nin walibana 'Ilaahow gacantiisa iga nabad-geli' ayuu ku ducaystay!

Duqii dhalay oo weli ifka saaran ayuu taliyey oo waxna diley, waxna derajeeyey. Hadal uu yiri cidi ma diidi karin, mana asaraari karin. Nin melaggiis galay mooyee, nin 'maya' kula dhici kareyna lama sheegin!

## 2. Lug laguugu dar!

Geyigu waa geyi colaadeed, dhaca xoolaha iyo dilkuna waa joogto. Ninkii caano-waa iyo cayrnimo ka baqaayey wuxuu u tafo-xaytay geel uu xoog ku soo taabo. Kii dakano laga qabeyna kii ka hayey ayuu ka doontay, birtana u tuntay. Soomaalida ka sokow, waxaa mar walba laga dareen-qabey Gaalo-madow oo iyada iyo Bartiruhu ay ahaayeen col xiirxiire ah.

Markaas buu Garaad Faarax soo rogey xeerar cusub oo tolalka kale ee Soomaalidu aanay aqoon jirin. Wuxuu guddoomiyey in la uruuriyo niman soo-jeedayow loo bixiyey oo hawshoodu tahay degmada cirifkeeda inay habeen oo dhan ku wareegaan, inay ilaaleeyaan raad col oo soohdintooda soo galay, haddii ay wax arkaan ama ay wax dareensadaanna ka soo digaan. Waa 'waardiye[2] ' amaba waa 'gaadh' sida aynu hadda u naqaan. Waxaa iyadana la guddoomiyey reerkii ay nimankaasi u tagaanba inuu siiyo neef ay qashaan oo ay beryo ku noolaadaan.

2. *Waardiye: Eray ka soo jeeda afka Talyaaniga (guardia); kaas oo la macne ah gaadh oo isna afka Ingiriiska ay Soomaalidu ka soo amaahatay (guard). Labada erayba waxay, Soomaali ahaan, u dhigmaan erayga ilaalo.*



Raggaas ayaa Wiilwaal lagu daray, iyada oo markaasna la sinnaa oo 'cid baa madax ah' iyo 'cid baa manjo ah' aan la oran. Ha yeeshee, Wiilwaal oo kale kama suuroobi karin ragba inuu garabkiisa ka dayo amaba uu la masoobo!

Dabadeed, maalin maalmaha ka mid ah ayuu, malaha, isyiri: 'Nimanka kula socda maxaad, tolow, ku fashaa, si ay u caddaato inaad adigu tahay laboontiga keliya ee aan la labayn?'. Wuu fekarey. Haa, allaylehe, hadda ayuu helay!

Wuxuu u soo jeediyey kolkii xoolo la qasho oo hilbo-qaybsiga loo soo fariisto inuu isagu yeesho labada cad ee neefka ugu wanaagsan, inta kalena uu ka saami-qaato!

Isla markiiba wada dareeme wax-qaybsi ay ku dulman yihiin inuu guddoonkaasi xanbaarsan yahay, cidise way ku dhici weydey inay dood ka celiso. Oo go'aanka Wiilwaal kuma ayaa ka hor-imaan kara oo naftiisa nacay! 'Hawraarsan iyo guddoon' ayaa dharaartaasna lagu kala dareeray.

Muddo haddii ay sidaas ku socotey ayaa raggii adkaysan waayey. Markaas bay inta shireen waxay talo ku goosteen: 'War Wiilwaal labadan cad ee neef kasta u wanaagsan ma wada heli karo, dhaxalna uma uu heline, aynu mid ka reebno'.

Taladaas ayaa lagu heshiiyey. Ha yeeshee waxaa haddiiba la isku afgaran waayey oo cid dhabarka u ridata la waayey ninkii isaga u sheegi lahaa in labadii cad mid laga reebay! Wax foodda la iskula jiro oo dhulxarriiq lagu foognaadoba, ugu dambaystii ayay guddoonsadeen inay iska soo dhex-saaraan saddex nin oo go'aankooda Wiilwaal, si wadajir ah, u maqashiiya.

Ballan waxaa laga dhigtay in lagu yiraahdo: 'Wiilwaal labada cad iskuma heshid', hase ahaatee aan nin keliyihi orane, weedha dhihiddeeda la qaybsado. Waxaa lagu heshiiyey ninka koowaadi inuu yiraahdo: 'Wiilwaal', kan labaadna uu yiraahdo, 'labada cad', kan saddexaadna, ugu dambaysta, uu yiraahdo, 'iskuma heshid'.

Fiidkii kolkii ay golihii ku soo dhammaadeen ayaa kii hore yiri: 'Wiilwaal' oo degdeg u fariistay. Markaas buu kii labaadna halhaleel u yiri: 'labada cad' oo isna iska aamusay.

Kii saddexaadi kolkiii uu u hogbaday weedhii la isku ogaa inta ka dhimman inuu ku daro ayaa waxaa daymo kulul ku eegay Wiilwaal oo markaas warankiisii si wacan gacmaha ugu qaabsaday. Daymadii qallafsaneyd iyo umalkii foolkiisa ka muuqdey ayaa ninkii cabsi ba'an ku ridey. Labada bawdo ayaa jareeyey. Garaacii wadnihiisa ayaa waxaa maqlay kuwii garabkiisa fadhiyey. Nin kasta oo goobta joogey waxaa ka dhaadhacday goorta uu afka ciidda gashan doonaa inay isha baalkeeda tahay! Halkii laga filaayey in hadalkii hore ee ahaa, 'labada cad' uu ku dhammays-tiro, 'iskuma heshid' ayuu argaggixii badnaa ka yeersiiyey wax aanu uurku doonayn, afkuse ka xaday. Wuxuu yiri: 'lug laguugu dar'!

Ma war baa yaal? Xan mooyee, sow in loo bareeraa ma dhiman? Maantaas ka dib, sow labadiisa cad iyo wixii uu doono oo uu ku darsadaa uma garoobin? Sheeko iyo maahmaah lagu maadaysto sow ma ay noqon?

### 3. Geeridii aabbihiis

Wiilwaal coofka ayuu kor u taagey. Wuxuu isula ekaaday baarqab awr dhufaanan lagu sii dhex-daayey oo, inta miciyihii soofaystay, qooq la golongolay. Goob Alle goobtii la isaga hor-yimidba, libin buu kala laabtay. Colkii uu hoggaamiyeyba, guul iyo gacmo buuxa ayuu la soo noqday. Arlada ayuu, habi la'aan, u taxaashey, hiyigana wuxuu gashaday inuu geyigaba ka dhawro nin caqli iyo garasho kala mid ah amaba ugu soo dhowaan kara!

Nin ragannimo sheegtay iyo isagu xiirexiire ayay ahaayeen. Dhab wuxuu u rumaysnaa maahmahdii ahayd, 'qoori xero kuma heshiiso!'. Magacaas dheer iyo haybaddaas wuxuu huwanaadaba, 30 gu' ayuu baarka ka jaray. Xoog iyo garashoba wuu istaawiyey, nin walibana bannaanka ayuu ka maray.

Maalintii dambe, isaga oo cirifka degmada soo-jeedayowgii ugu maqaddin ah oo guutooyin tolka soo weerara kaga gaashaaman ayaa ku



dhanbaal baas wadaayi la soo joogsadey. Bariidin gaaban ka dibna wuxuu ku yiri: 'Xirsow, Garaad Faarax Eebbe ha u naxariisto, adigana ha kaa samirsiiyo!'

Geeridii aabbihiis ayuu u sheegayaa; taas oo uu aad uga tiiraanyooday. Waxayse naxdintu ugu darrayd markii loo sheegay inaan aabbihiis bas u dhimane uu bir u dhintay oo la diley! Madaxa ayuu foorariyey, cabbaar ka dibna wuxuu dhanbaal-wadihii ka toydey ciddii Garaadka dishey iyo wixii uu eersaday.

Oo sidee bay wax u dhaceen? Nin la oran jirey Khayrre Shirwac iyo Garaadka ayaa eed lahaan jirey. Wuxuu ka taban jirey in badan oo u tolka wax u qaybiyey inuu isaga ka eexday. Caddaalad-darro goonni ugu dhacday ayaa maankii ka qaadday; kolkaas buu dhagar ku tashaday. Dhiiggii Garaadka ayaa u hillaacay. Waxaaba iska hor-caddaysay inta uu dilo in Garaadnimadaba uu isagu kala meero!

Hoosaale meel la yiraahdo iyada oo la deggan yahay oo geedkii shirka lagu dhan yahay, Garaad Faaraxna fadhiyo ayuu Khayrre soo muuqday. Waa la wada dhugtey, isaga iyo kaalkiisii weynaa oo uu dhexda haysto. Wuu soo dhowaadey. 'Nabad ma sheegteen?' iyo 'maxaa la isugu warramay?' isaga oo aan oran ayuu shirkii gabay ku bilaabay. Waxaa laga qabtay:

*Qadaar malab ah oo meel qotoma oo rag wada quuto*
*Khayrrow aduuni ka qatanow qaadan kari maayo!*

...oo isaga oo aan eray kale ku darin, warankii uu gacanta midig ku haystey Garaad Faarax wadnaha kaga xabaalay! Isla markiiba, isla goobtii waxaa isna hooto halgaad ah saabka kala helay nin geedka fadhiyey oo ay Garaadka xigaalo dhow ahaayeen.

Khayrre Shirwac kolkii ay naftu ka baxaysey, halkii uu ka tawxiidsan lahaa, wuxuu ku ala'ladey: 'qalay oo ka qaday! qalay oo ka qaday!' oo uu ula jeedey; boqornimadii aan Garaad Faarax ka diley ee aan islahaa 'la soo meer oo adigu shafeecso', rag kale ayay u gacan-gashay, anna waan ka qaday'.

Laba xajuub oo aan kala fogeyn ayaa, galabnimadiiba, Khayrre iyo Garaadkii lagu aasay oo looga soo kacay!.

## 4. Maradii la caleemo-saaray

Dhanbaal-waduhu, warka geerida ka sokow, farriin kale ayuu Wiilwaal u sidey. Odayaashii tolka ayaa, marba hadduu isagu dhaxalka Garaadnimo leeyahay, waxay u soo fareen halkii ay degmadu tiil inuu degdeg u yimaado, si loo caleemo-saaro.

Wiilwaal talo ayaa ku caddaatay. Laba arrimood ayaa iskummar la soo gudboonaatey. Wuxuu og yahay, kana digniin-helay col mahiigaan ah oo reerahooda dhowaan ku soo gulfi doona. Karinta uu ragga ku haysto haddii uu banneeyona, tolka ayuu colkaasi cidla' ka heli doonaa, nin kale oo uu caabbigiisa ku halleeyaana uma uu muuqdo.

Midda kale, waa gar oo xeerka ayaa ahaa, haddii uu nin madax ahi geeriyoodo, midka mutaysiga u leh in si degdeg ah duubka boqornimo madaxa loogu xiro. Ceeb aan dusha loo ridan karin ayay ahayd, maalinna Allaha ka dhigee, tol aan lahayn madax kala hagta, waxna u qaybisa! Wuxuu isweyddiiyey: 'Ma waxaa jirta cid aan adiga ahayn oo Garaadnimada haweysan karaysa?'. Jawaabtu waa maya. 'Ma cid baa kugula murmi karta?'. Iyana jawaabteedu waa maya.

Cabbaar haddii uu naftiisa la tashanaayey ayuu go'aan gaarey. Wuxuu ku tashaday, maantaas la joogo inuusan degmada waxba ku degdegine, colka soo socda uu u toog-hayo, tolkana uu ka caabbiyo.

Dhanbaal-wadihii oo jawaabtiisa sugaayey ayuu u yeeray. Wuxuu u dhiibey maradiisii khaylida ahayd ee beesha oo idili ay ku tiqiin. Markaas buu ku yiri: 'Maradaydan qaad oo kolkii aad shirka geyso geedka dushiisa ha lagu fidiyo, dabadeedna iyada ha la caleemo-saaro oo caano ha lagu shubo, hana loo dabbaaldego. Aniga oo idin la jooga uun bay la mid tahaye, sidaas ha la yeelo'!



Waa la yeelay, waxayse noqotay xaajo ugub oo aan cidi uga horreyn, wixii Garaaddada iyo Ugaasyada Soomaalidu ay tiro lahaayeenna, keligiis uun u suuraggashay!

Haddii khaylidii loo dabbaaldegey ka dib, 'Wiilwaal'kii Ina-Garaad Faarax ahaa wuxuu noqday Garaad Xirsi Garaad Faarax. Muxuu la soo bixi doonaa? Muxuu noqon doonaa? Anshigiisa wax ma iska beddeli doonaa, mase dhaqankiisii hore ayuu ku wadi doonaa? Su'aalahaasina waxay ka mid ahaayeen dadkii arrinta goobjoogga u ahaa kuwii ay maalintaas isweyddiinayeen.

## 5. Feejignaan iyo xujeyn

In kastoo aysan qasab ahayn inay run wada noqdaan, haldana sheekooyinka iyo dhacdooyinka loo weriyey waxay ina barayaan Garaad Wiilwaal inuu ahaa si walba nin isugu deyey inuu muujiyo rag nuu wax dheer yahay. Ma uu noqon oo keliya nin madax ah oo meel fadhiya, garta iyo taladana loola yimaado.

Wuxuu kordhiyey feejignaantiisii hore iyo 'indhihii shakiga' ee rag oo dhan uu ku eegi jirey. Ninkii uu dareemo inuu qorshihiisa taakalleel gelin karoba wuu u dardaar-weriyey, wuxuuna ku beeray cabsi joogto ah.

Labadii waran iyo gaashaankii uu mataanaha isaga dhigay ayuu, sidiisii hore, ugu maran yahay. Tallaabadii xaggiisa loo soo qaaday iyo ereygii lagu yiriba waxay ku abuureen feejignaan hor leh. Wuxuu isu ilaaliyey, sidii uu yahay nin ay dunida oo idili ku heshiisey inay nafta weysiiso!

Waa yaabe, col dibedda laga soo diro oo isaga uun loo soo qaybiyey miyuu ka baqaayey? Mase waxaa magliga la raadinaayey dadkii uu u talinaayey qaar ka mid ah? Soomaalida ayaa waxay murti kula baxday, 'dhul' baa lagu yiri: 'dhulow ballaarnidaa?'. Markaas buu ku jawaabey: 'Ballaarkaygu muxuu tari, haddiiba nin godob qaba aan qarin waayey!'".

Feejignaantii Wiilwaal markii laga sheekeeyo ayay soo bixi karaysaa sida ay murtidaasi dhab u tahay. Socod iyo negaansho, hurdo iyo soo-

jeed, shir iyo kelinnimo, ceel iyo carshin, meel kasta ha joogo, si kastana ha ku sugnaadee, qalab dagaal baa gacanta ugu jira. Dhiillo ayuu ku seexday, aammin-darro uu dadka ka qabona wuu ku soo toosay. Alla, malaha, godob uu dadka ka qabey cuslaydaa!

Waxaa la sheegay, waayihiisiina laga garan karaa inuu ahaa nin murti-dhuux ah oo aan hadal seegin; nin jeclaa inuu, rag iyo dumarba, dadka xujeeyo, si uu ugu daaddego bal garashada qofku inta ay qodan tahay.

Ruuxa uu xujeynayaa haddii uu rag yahay, asii uu si wanaagsan xu-jadiisa uga jawaabo, dareen baa ka geli jirey oo halis ayuu u arki jirey. Wuxuu ku dedaali jirey isaga iyo ninkaasi in aanay carro Bartire ku wada noolaan! Haddiise uu qof dumar ah yahay, wuu guursan jirey ama nin xigtadiisa iyo xigaaladiisa ka mid ah ayuu kula talin jirey amaba u dhisi jirey.

## 6. Dhabar-taabad

Waxay sheekooyinka Wiilwaal ina barayaan inuu ahaa nin xirrib badan oo arrintii soo food-saartoba furdaamin kara. Waxaa la yiri: Dumarkii uu qabey oo afar ahaa ayaa qaarkood qaarkii kale ku masayray oo dagaal af iyo gacanba lihi dhex-maray. Waxay ku murmeen: 'Heblaay, adiga waa lagu nacay oo Garaadku kuma rabo'... 'adigu waad iska joogtaa uune, beri hore ayaa lagaa tashaday'... 'aniga ayaa la iga kaa jecel ya-hay... 'gogoshayda gogol kale weligiis ku doorsan maayo!' iyo hadallo kuwaas la too ah.

Raggii u dhowdhowaa qaarkood ayaa damcay inay dumarka Garaadka heshiisiiyaan, ha yeeshee isagii baa diidey. Wuxuu ku adkaystay, isaga mooyee, inaan xaajadaas cid kale loo agmanayn. Afartoodii tu' walba oo ka mid ah intuu goonni ula faqay ayuu ku yiri: "Caawa fiidkii kolkay tahay meel hebla' imow, aniga ayaa idin kala saariye'.

Markuu aaskii dumey oo ay goobtii ku soo wada urureen ayuu ku yiri: "Afartiinnuba sii jeesta oo isgarab-joogsada. Tii aan idiin jeclahay dhabar-ka ayaan ka taabanayaaye, ha iska tagto, iyada oo aan dib ii soo eegin'. Afartoodiiba, dhabarka ayuu ka taabtay, dabadeedna, sida la sheegay, mid waliba iyada oo faraxsan ayay horteeda u dhaqaaqday!



## 7. Cadka ragga israaciya

Marka ay weriyeyaashu doonayaan inay muujiyaan sidii uu Wiilwaal u ahaa murti-dhuux aan hal seegin, waxay soo qaataan sheekooyinkan soo socda ee isaga loo saariyo, kuna saabsan sidii uu ku guursadey qaar ka mid ah dumarkii uu qabey.

Waxaa la yiri: Isaga oo xujo u dan leh ayuu maalin maalmaha ka mid ah awr qalay. Dabadeedna wuxuu u yeeray degmadii uu u talin jirey raggii joogey qaarkood, markaas buu ku yiri: 'Ninkiin waliba ha ii keeno cadka rag israaciya'.

Sidii uu ninba ula soo boodaayey xubin aan ahayn tii uu Garaadku maskaxda ku hayey ayuu, markii dambe, oday ragga ku jirey 'hunguri' u keenay. Wiilwaal baa, kolkaas, la yaabay oo ku yiri: 'War adigu ma aad garane, yaa kuu sheegay?". Hadduu yiraahdo: 'Aniga ayaa gartay' wuxuu, malaha, ka baqay inuu ku xujoobo oo uu dhegta dhiigga u daro. Sidaas darteed ayuu ugu jawaabey: 'Garaadow, gabar aan dhalay baa ii sheegtay!'

Wiilwaal baa gabadhii u bogey. Wuxuu ku maleeyey inay caqli door ah leedahay, kolkaas buu toydey bal inay guurgal tahay iyo in kale. Waxaa loo sheegay inay guurgal tahay, hase yeeshee ay nin u doonnan tahay, loona ballansan yahay in dayrta soo aaddan loo dhiso.

Isla markiiba, wuxuu guddoomiyey inay 'naag Garaad' noqoto! Ninkii ay u doonnanaydna toban sac ayuu ku aamusiiyey; kaas oo isna isu qaatay inuu ayaan badan yahay!

Sidaas ayuu Wiilwaal kula aqal-galay Timiro, kii laga meersheyna wuxuu naftiisa ku maaweeliyey labadan meeris oo gabayga ah. Wuxuu yiri:

*Garaadkii hadduu Timiro helay wuu ku taamahayey*
*Aniguna haddaan toban sac helay waa la ii taliyey!*

## 8. Awrtii baxsatay & Dahabo

Maalin kale, isaga oo awr ka baxsatay baadi-goobkeeda ku jira oo, raq iyo raad toona, wax u baytiya uu la' yahay ayuu goor ay barqadii tahay wuxuu ku soo baxay ari dhowaan ruuman uu toddob helay ku kala baahey. Wuxuu abbaaray inantii la joogtey oo bartamaha ariga taagan, geeddina samaysanaysa.

Faraskii uu ku joogey intuu soo ag-joojiyey ayuu nabdaadiyey, dabadeedna ku yiri: 'Gabarey, waxba awr baadi ah ma aragtay?' Waxay tiri: 'Indho kama qaadin, ha yeeshee bal aan maleeyee, awrta mid dabo li'i ma ku jirey? Wuxuu yiri: 'Haa'. Markaas bay tiri: 'Mid il li'i isna ma ku jirey?' Wuxuu ku jawaabey: 'Haa'. Markaas bay ku tiri: 'Haddaba, raadkoodii uun baan arkay ee ruuxoodii ma arage, dhinacaas qorrax-dhaca ah ka baadi-goob!'

Sidii ay kula talisay ayuu yeelay, galabnimadiina halkii ay farta ugu fiiqday ayuu ugu tegey, iyaga oo si wacan geedaha luqmaha ugula jira, hareerigiina ka hamuun-beelay.

Karkii awrtu markuu ka dhacay ayuu hadalkii gabadhu ku soo duxay. Habeenkii dhex buu iska seexdaye, barqadii uu la kulmay barqadeedii kale ayuu isla meeshii ugu yimid, iyada oo aad mooddo ariga iyo iyaduba ilaa shalay inaysan docna uga dhaqaaqin!

Markii la isnabdaadiyey ka dib ayuu weyddiiyey: 'Gabarey, awrka dabada la' sidee baad ku garatay'? Waxay tiri: 'Awrtu kolka ay saaloonayso, saynta ayay saalada ku kala firdhisaa, kaaguse meel keliya ayuu ku tuuminaayey oo sidaas baan ku gartay inay ka maqan tahay sayntii uu wax ku seeraarin lahaa!'

Wuu ku celiyey oo wuxuu haddana weyddiiyey: 'Waa tahaye, midka isha la'na sidee baad ku garatay?' Waxay tiri: 'Geedkii uu ku soo hagaagoba, dhinac keliya ayuu ka daaqayey ee sida awrta kale dhinaca kale uma gudbeyn. Sidaas baanna ku gartay inuu, kol hore, labada indhood mid beelay !"



Markaas ayuu Wiilwaal gabadhaasna u qiray inay tahay qof qorshe iyo quluud leh, welibana ku darsatay milgo loogu xisho. Wuxuu isla goobtiina ku go'ansaday, carruur tiis ah mooyee, inaysan nin kale wiil iyo gabar midna u xanbaarin. Sidaas ayuuna ku guursadey Dahabo-duula' oo gadaalkii noqotay dumarkii uu qabi jirey tii ugu caansanayd, uguna magaca dheerayd[3].

## 9. Xoolo, xarrago & xaas

Haddii aynu doonno inaan ogaanno dadku jawaabaha ay siiyaan sidii uu Wiilwaal garashadooda ugu dhudhumin jirey, uguna qiimayn jirey, ka maarmi kari mayno inaynu xusuusanno sheekadii iyo murtidii ka hadhay inankii uu abtiga u ahaa.

Waxaa la yiri: Inan ay walaashiis dhashay oo uu isagu koriyey ayaa kolkii uu hanaqaaday reer-aabbihiis u wareegey. Beri dambe ayaa Wiilwaal waxaa loo soo tebiyey dadka uu u taliyo qaarkood inay inankii xanteen, kuna sheegeen iite aan rag wax la qaybsan Karin, isagana aan ku bannaanayn! Hadalkii ayuu liqi waayey. Waxaa ka dhaadhici weydey ruux ay wax uun isu galeeni sida uu dhalliil u yeelan karo!

Dabadeedna, inankii ayuu farriin u diray, isaga oo raggii doonayna kula ballamay maalin hebla geedka shirka inay ku soo beegaan. Wuxuu doonayaa meel raggii xaman jirey ay ku wada dhan yihiin inuu inanka su'aalo ku weyddiiyo; isaga oo aad mooddo inuu hubo, marba haddii uu isagu abti u yahay, inuusan ceebayn doonin. Kolkii uu shirkii isa soo taagey ayuu Wiilwaal inankii kula boodey oo saddex su'aalood mar qura ku halgaadey. Wuxuu weyddiiyey: 'Xoolo maxaad ka timid? Xarrago maxaad ka timid? Xaasna maxaad ka timid?' Inankiina, isaga oo aan kayrkeyrin, in badanna ku maqnaan ayuu sidatan u jawaabey: "Xoolo

---

*3. Sheekadan iyada oo intaas ka faahfaahsan ayaan ku arkay buug ka mid ah kuwa suugaanta Carbeed, iyada oo loo saarinaayo nin iyo gabar u dhashay Carabtii bedowda ahayd ee islaamka ka hor jasiiradda ku noolayd. Waxaan kaloo maqlay isla sheekadaas oo loo saarinaayo Ugaas Diini Faarax oo ka mid ahaa qarnigii 18d madaxdii Soomaalida ee dhulkii Ximan loo yiqiin ka guddoomin jirtey. Taasina waxay inoo muujinaysaa, ninka iyo gabadha arrintaasi dhex-martay, sababteedana isku guursadey ciddii ay doonaan ha ahaadeene, sida ay sheekooyinka qaarkood ay dalal kala fog isaga gudbi karaan oo, marka dambe, dhawr ummadoodi isla sheekadii ay midiba gaar ahaanteeda ugu sheegan karto. Waxa kale oo ay sheekadu ina baraysaa Wiilwaal inuu ahaa nin weedha murtida lihi ay dubaaqiisa meel weyn ku lahayd; taas oo uu kala mid ahaa Soomaalidii la xilliga ahayd.*

waxaan ka imid geel aad u wanaagsan, xarragona geenyadii Xamaro ahayd, xaasna xayn ari ah".

Waxay noqotay jawaab loo wada guuxay, Garaadkiina farxad weyn gelisey. Dabadeed, ma xan dambaa jirta? Wiil iyo waayeelba, shirka intii fadhidey, sow waxyaqaan inuu yahay looma wada qirin? Sow isla goobtiiba kama caddaan Wiilwaal oo abtigiis ah inuu ku bannaan yahay oo, dhab ahaanna, ay walaashiis dhashay?!

## 10. Xeerarkii Wiilwaal

Xilligii Wiilwaal noolaa iyo xilliyo kale oo ka dambeeyeyba, Soomaalida caadadeeda iyo hiddaheeda laguma aqoon boqorrada, ugaasyada iyo garaaddada cusubi inay ka leexdaan waddadii raggii madaxda ahaa ee ay guddoonka ka dhaxleen. Si fudud uma soo rogi jirin xeerar hor leh oo iyaga uun la fil ah. Bulshada dhexdeeda iyo guurtida garyaqaannada ah ee tolalka Soomaalida indhaha u ahaa ayay xeerarku ka soo unkami jireen, kolkaas bay madaxda cidaha u duubani fulin jireen oo markii ay muramo yimaadaan, inta ay tixraacaan, iyagaas dadka ku kala saari jireen.

Jigjiga iyo geyiga ku xeeran kolkii Garaad Wiilwaal loogu dhawaaqay ayuu la soo baxay arrin ugub ah oo uu hiddahaas kaga bayray. Sida qarammada casriga ahi yeelaan si u eg ayuu u abuuray xeerar isaga la da' ahaa; kuwaas oo uu fulintooda ka dhigay wax dusha ka saaran cid kasta oo taliskiisa hoos-timaadda, jebintoodana ciqaab weyn oo dilku ugu badnaa ay dadkii loo sameeyey ku mudan jireen.

Wuxuu guddoomiyey oo xeerka koowaadi ahaa, marba geyigu haddii uu geyi colaadeed yahay, nin kastaaba ha sheegtee, in faras oo idil goob qura la isugu keeno, laguna dhaqaaleeyo. Faras oo keliyihi ma dagaallamee, wuxuu iyana qasab ka dhigay dhallinyaradii timo-cagaarta ahayd ee fardaha ku gulfi lahayd oo qalabkoodu u dhan yahayna inay isla goobtaas diyaar ku noqdaan. Intaba wuxuu uga jeedey feejignaan iyo, haddii reerahooda la soo weeraro, in colka degdeg la isaga caabbiyo oo marna tolka uu u taliyo aan dagnaan laga helin.



Xeerka labaad ee uu soo rogey wuxuu ahaa in karinle awr oo idil meel lagu wada hayo oo baadi iyo banjoognimo laga dhawro. Taasna wuxuu uga jeedey, col aan la caabbiyi karin in laga qaxo haddiiba ay lamahuraan noqoto, in aan gaadiid la'aan awgeed, reeraha qaarkood meesha lagaga tegin, hadhowna aan la darfo-goosan.

Fardaha, ciidanka iyo awrtaba sida uu ugu taliyey markaad u fiirsato ayuu Garaadku isu kaa tusayaa nin tabaha dagaal-aqoonta wax weyni uga bilawnaayeen, dhinaca diyaar-ka-dhigidda joogtada ah ee ciidammadana aan wax u ogeyn ammaanduuleyaashii la xilliga ahaa ee, Galbeed iyo Bariba, dunida ka caan-baxay. Xagga dhaqaalaha, wuxuu xeeriyey qoysaska tolka inaan qaarna dhereg iyo calool buuxda ku seexan, qaar kalena hamuun iyo harimo la'aan la weydoobin.

Hiddaha Soomaalidu wuxuu ahaa reerka saboolka ahi inuu midka hodonka ah neef ama laba ka maashado, inta ay irmaan yihiin shafeecsado, goortii ay guraan amaba ay rimaanna uu dib ugu soo celiyo reerkii awelba iska lahaa. Waxay ahayd arrin dhaqankeenna miyiga aad ugu fog, asii aan fulinteedu sandulle ahayne, samafal ahayd. Waxay, badanaa, ku xirnayd reerkaas hodonka ah ninka ugu weyni siduu deeqsi iyo waxgarad u ahaa iyo kolba inta ay isu jiraan reerka nacfi-yaridu hayso ee wax ka maashanaaya.

Wiilwaal, isagu dhaqankaas samafal kama dhigine, qasab buu ka yeelay. Reer geel badani xerada ugu jiro ayuu goor subax ah ku soo waabberiistey. Dhawr halaad buu inta ka soo laameeyey reer aan tuludna lagu ogeyn xerada ugu shubay. Nin awr badan leh ayuu laba ama saddex ka soo eryey oo ku` wax uu ku guuro la' aqalkiisa ku hor-arrumay.

Waxay la ahayd kadin geel ah nin haysta oo dhiilaha carruurtiisa caanuhu ku baryaan iyo nin an halina u foofeyni, inta ay tol wada noqdaan oo dani dhabbe wada marsiiso, in ay si wadajir ah col ku soo duuley ay ugu jilibdhigaan! Taasina waxay ina xusuusinaysaa meerisyo ku jirey gabay uu lahaa Aadan-Gurey Maxamad Cabdille[4] oo ahaa:

---

*4. Aadan-Gurey (Marreexaan, Reer-Diini): Gabyaa qaybtii dambe ee qarnigii 19d aad caan u ahaa, kuna noolaan jirey Gobollada Dhexe, gaar ahaan degaankii 'Ximan' loo aqoon jirey, haatanna ka tirsan Gobolka Galguduud.*

*Nin ardaaga jiifa iyo nin aan soo afurinaynin*
*Inay hiil u soo wada ordaan sow angaraf maaha?!*

## 11. Xujadii ugu yaabka badnayd

Tilmaamihii uu lahaa Garaad Wiilwaal waxaa ka mid ah maanso-aqoonta. Weligeedba muran lama gelin inuu ku jirey maansada Soomaalida raggii dhidibbada u aasay, ilaa maantana tixihii uu ka tegey waa lagu hal-qabsadaa.

Taas waxaa loogu daraa inuu ahaa nin diinta islaamka wax badan ka akhristay oo wadaaddada beeshiisa iyo kuwa dawaafka ah toona aan waxba u ogeyn. Hase ahaatee, sheekooyinkiisa qaarkood kolkii aad u fiirsatid waxaad la kulmaysaa kuwo dhaqanka islaamka aan cad ku lahayn, aadna uga fog. Ma run baa? Ma been baa? Ma naqaan, Soomaaliduse waxay ku sheekaysaa haddii uu Garaadku sodcaalo oo reerihii uu u talinaayey reer ka mid ah uu ku soo hoydo, waxaa xeer ahayd in loo keeno haweeney uu habeenkaas weheshado oo dumarkiisii uu ka yimid halkoodii u gasha!

Waa dhaqan, sidii aan soo sheegay, midka caqiidada islaamka aad uga durugsan, in kastoo weriyeyaasha qaarkood ay xeerkaas si kale u soo bandhigaan. Waxay ku warrameen xeerku inuu mid jirey ahaa, hayeeshee haweeneyda Garaadka loo keeni jirey, waa marka koowaade, inaysan gabar ahayne, ay carmal ama garoob ahayd. Marka xigana, aan la isaga keeni jirin uune, loo meherin jirey, waabberigiina uu furi jirey!

Si kastaba ha ahaatee, waxaa jirta sheeko ay Soomaalidu aad u taqaan oo arrintaas layaabka leh inuu ku kici jirey loo soo daliishado. Dhinaca kale, waa sheeko wax inaga baraysa siyaabihii uu dadka u xujeyn jirey iyo dabeecadihii ad'adkaa ee uu wax ku maamuli jirey qaarkood.

Wax la yiri: Wiilwaal baa maalin maalmaha ka mid ah u yeeray dumarkii u dhaxey middood. Waa Dahabo-Duula'; haweeneydii habkii uu ku guursadey aynu ka soo sheekaynay ee uu caqliga badan ugu xishay. Wuxuu ku yiri: 'Muddo ayaan maqnaanayaa. Waxaan ku tashanahay sodcaal dheer. Haddaba, kolkii aan soo noqdo aan kuugu imaado adiga oo haysta wiil aad dhashay oo aniga ii eg iyo geenyadayda oo faras kayga u eg iyaduna dhashay oo haysata! Haddii kale, luquntu kugu oolli mayso!'.

Waa xujo iyo yaab! Haweeney uu ninkeedii sodcaal ku maqan yahay, sidee bay ku uuraysan oo ay wiilal u ummuli?! Way ummuli kartaa oo gogoldhaafba way ku kici kartaaye, sidee buu wiilka ay dhashaa ugu ekaan karaa ninkeedii muddada ka maqnaa?!

Faraskiisii haddii loo xakameeyey oo inta wejiga shaal loogu guray loo shaqlay, isaguna uu ku sodcaalay, sidee bay ku suuroobi kartaa geenyadii hebla' ahayd ee uu ka tegey inta ay rinto in neef u eg laga soo jiido?!

Xujooyinka Garaadka sidii loo furi lahaa iyo wixii laga yeeli lahaa in lagu dhaqaaqo ha joogtee, in laga hor-yimaado amaba doodo laga celiyaa cidna uma bannaanayn. Afadiisana, Allaha ka dhigee, ruux naftiisa rajo ka qabaa inuu 'maya' ku yiraahdo kuma uu dhiirran karin.

Dahabo-Duula', welwel baa ku dhammaaday. Sidii ay xujadaas ku furdaamin lahayd ayay habeenno u soo jeeddey. Waxay talooyin dhawr ah rogrogto oo kala doorataba, ugu dambaystii ayay inta mid ku xasishay istiri: 'Allaylehe waad haysaa' oo inta isu bogtey dhoollaha ka qososhay.

Beryahaas halkii Wiilwaal lagu malaynaayey ayay toyatey. Reerkii geeddiga ahaa iyo kii negaaba way weyddiisey. Ninkii socotada ahaa ee ay aragtayba way haybisay. Waxaa loogu warramay: 'Reer hebel buu habeen saddexaad la hoyadey'. Mar kale waxaa loo sheegay: 'Nin-ebel baa habeenkii xigey degmo hebla' ugu loogaayey '. Mar kalena waxaa lagu yiri: 'Maalin hebla' ayaa fagaare weyn loogu dabbaaldegaayey'.

Cawadaas ma ahee habeen dambe reeraha uu ku hoyan doono markay hubsatay ayay, waabberigii, marriimatay dharkeeda kii ugu bilicda roonaa, waddadana cagta saartay; iyada oo ku joogta geenyadii uu u tilmaami jirey oo bee- ddalan.

Cilcillowga fiidkii goor ay tahay oo aan habeen iyo dharaar loo kala garan ayay dhinaca bari waxay ka soo gashay reerihii uu Wiilwaal galabta carraabada ku yimid. Waxay gees ula baxday oday ka mid ah odayaashii reerahaas ka magacawnaa oo sooryo-qalqaalinta Garaadka ku hawllanaa. Way isu sheegtay, waxayna ku tiri: 'Ninyahow, hebla'-hebel' ayaan ahay. Afadii Garaadka ayaan ahay. Qof arrin culusi wareerisey baan ahay. Dahabo-Duula' oo xujeysan baan ahay. Waxaan kaa durraamanayaa qoolka qoorta iiga maran in aad ila furfurtid!'

Ruuxa dumarka ahi waxa ay sheegi isaga oo ka yaabban ayuu yiri: 'Maxaa dhacay? Qoolka kugu maranse muxuu yahay? Markaas bay si hagaagsan ugu sheegtay xujada furitaankeeda laga sugaayo ee iyada iyo ninkeeda dhex-martay.

Af-kala-qaad baa odaygii ka soo haray. Meel uu wax ka bilaabo ayuu aqoon waayey. Wuxuu aamusnaadaba, markii dambe ayuu ku yiri: 'Si wax loo farsameeyo iyo irrid laga baxo midna anigu garan maayo, igamana sugtid!' Markaas bay ugu jawaabtey: 'Irrid aan ka baxo in aad i tustid kuuguma iman. Kaalmo uun baa kaa dooniye, taladaydu way ii dhooban tahay. Wiilwaal kolkii uu caawa idin yiraahdo: 'haweeneydii carmalka ahayd ha la ii keeno' intii aad tu' kale u geyn lahaydeen, aniga ii gee, si aan ula hoydo. Waxaan ku male weynahay in aan qaadi doono oo astaamihii uurka aanda u ahaa ayaan isku ogahaye, aniga taas ha la ii fuliyo. Midda kale, geenyadu way beeddalan tahay oo soo celin maysee, iyadana isla caawa faraska Garaadka ha la kudsiiyo!'

'Hawraarsan iyo guddoon' ayuu odaygiina yiri, isaga oo la ashqaraarsan sida ay taladu u habboon tahay, haweenna u quuri la' Dahabo oo kale inay ku jiri karto!

Sooryadii kolkii ay dhammaatay, debinna loo sheekeeyey ayaa waxaa la soo gaarey goortii Wiilwaal loo keeni lahaa qoftii carmalka ahayd ee caawa oo kale loo keeni jirey. Intii aan raggii kale su'aashii Garaadka ka jawaabin ayaa waxaa halhaleel u soo boodey oo hadalkii boobay odaygii ay Dahabo fiidkii isa soo arkeen. Wuxuu yiri: 'Bilic iyo caraf haddii ay dumar lahaayeen, cawo kale yeelkeede, caawa way ku garab-jiifsan, Garaad Xirsiyow. Kashaadu sidaas ha ku qabowdo'. Farax buu isna la



muusooday. Habeenkaasna, dhaxantii gelin hore iyo gabaddanadii arornimoba waxay iska xigsadeen Dahabo oo aroos cusub looga dhigay!

Ha yeeshee, wada-joogga habeenkaas si aanu berri-ka-maalin ugu dafirin oo haddii ay ilmo ku beermaan ugu malayn fal gogoldhaaf keenay, maxay, tolow, yeeshaa? Durba xeel bay heshay. Judhii horeba markii uu gacan-togaaleeyey ayay ka durugtay. Way isu diiddey. Markii uu doocdoociyey oo hadba uu dhinac ka maray oo 'waa ku sidee, sow inaan Garaadkii ahay ma ogid?' uu dhawr jeer ku celceliyey ayay tiri: 'Fargashiga aad qabto haddii aadan i siin, taf iga rogi maysid'. Isma uu ogeyn markii uu inta degdeg isaga siibey uu weliba u geliyey fardhexada, faryarada iyo faadumada u dhexaysa!

Isla markaas iyadu Garaadka ay gogosha la jiifto, odaygii baa, sidii lagu ballamay, wuxuu meel isugu geeyey faraskii iyo geenyadii ay iyagana xujadu ka aloosnayd. Intii aan waagii dhab u beryin, iyada oo aan weli geed iyo nin la kala garan karin, ayay Dahabo gogoshii Garaadka u soo bannaysay oo intay geenyadii kooraysatay u jarmaadday halkii ay reerkeedii ku ogeyd.

Ka-bil-ka-bil hadduu maqnaa ayuu galabtii dambe, isaga oo faraskiisii Weyrax ahaa ku jooga soo dhigtay, kagana degey aqalkii Dahabo ardaagiisa. Sheedda aqalka ayuu milcsaday, mase waxaa ku mayracanaya geenyadii iyo darmaan ay dhashay oo aan laga aqoon faraska uu hadda meesha kaga degey. Wuu yaabay, waxaase uga yaab badnaa markii ay Dahabo aqalka ka soo baxday; iyada oo naaska u dhigaysa wiil si wacan u kobcay oo aan isaga laga aqoon!

Markaas buu ismadax-maray. Indhihii baa haddiiba guduutey, caro iyo ceeb wada socdaana way isugu yimaadeen. Wuxuu u maleeyey Dahabo inay sinbiriirixatay oo ay magaciisa meel uga dhacday, intii uu maqnaana ay garcatay!

Isaga oo aan waxba weyddiiyey ayuu seeftiisii afka badnayd galka kala soo baxay oo xaggeedii u degdegey. Wuxuu maaggan yahay iyada iyo wiilkaba inay caawa waraabeyaashu ka hamuun-beelaan. Markaas buu isku daray isaga oo seeftii qaabsaday iyo su'aal gaaban oo ahay: 'Ima-

ha aad sidato yaa kaa dhalay? Inta ay dhabarka ka soo wareejisey ayay ugu jawaabtey: 'Horta waa wiil, waana Ina-Garaad Xirsi'. Foolkiisa ayay ka garatay inuusan rumaysan. Dabadeedna, si aanay seeftu luqunteeda ugu dhicin ayay, haddiiba, waxay farteeda ka soo saartay fargashigii ay ka qaadan jirtey. Hortiisa intay ku tuurtay ayay tiri: 'Garaadow kaasna ma aqoonaysaa?' Isna markii uu eegayba wuu aqooday. Sidii ay sheekadu u dhacday ayuu xusuustay. Halkii ayuu ku qaboobey oo habeenkiina uu wiilkii ugu magac-bixiyey!

Run ama been mid ay noqotaba, qayb dhan oo ka mid ah sheekooyinka Wiilwaal ay ka sheegaan ayaa waxaa ka muuqda anshax-darro ka fog diinta Islaamka iyo dhaqankii ay Soomaalidu ilaalin jirtey, haatanna uu qaarkeed weli ilaaliyo. Sidii aan meel hore ku soo carrab-baabay, waxay weriyeyaashu Garaadka u saariyeen falal uu qofkii maqlaaba la amankaagi karo oo uu isagu ku kici jirey amaba, ugu yaraan, uu bulshadiisa ugu dulqaadan jirey. Malahaygana waxaa falalkaas iyaga ah ugu ba'an galmada guurka ka baxsan oo xagga ragga ah iyo gogoldhaafka oo xagga haweenka ah.

Waxaynu meel hore ku soo marnay sheekadii xujada xanbaarsanayd ee dhex-martay Garaadka iyo afadiisii Dahabo-Duula'. Sida aynu xusuusan karayno, waxay ahayd sheeko ku saabsan galmada meherka ka baxsan. Taas ka sokowna, waxaa iyaguna jira laba kale oo wax inaga baraya anshaxaasi siduu, malaha, ugu baahsanaa bulshadii uu Wiilwaal xilligaas u talin jirey.

## 12. Dibigii Naaso'adag:

Sheekooyinka layaabka leh ee Wiilwaal laga weriyo kuwooda ugu caansan ayay tan soo socotaana ka mid tahay. Waa sheekada ay Soomaalidu u taqaan 'Dibiga Naaso'adag' ee inoo muujin karaysa sidii layaabka lahayd ee uu bedbaadada naftiisa isha ugu hayn jirey iyo, guud ahaan, gacantii birta ahayd ee uu ku maamuli jirey tolkii uu u talin jirey. Sidaynu arki doonno, waa sheeko si weyn looga dheehan karayo naxariisdarradii uu dadka kula dhaqmi jirey, xataa haddii ay arrintu ku lug leedahay xubnaha qoyskiisa kuwa ugu dhowdhow.



Waxaa la yiri: Wiilwaal waxaa la walaal ahayd gabar yar oo ay isku bah ahaayeen, walaalihiisa kalena uu ka soo dhoweysan jirey. Mar walba isaga ayay la socon jirtey, xoolahana la dhaqaalayn jirtey, gaar ahaan intii aan Garaadnimada loo caleemo-saarin. Haddii uu reeraha dhex-joogo iyo haddii uu bulsho-lo'aadda ku maqan yahayba, isaga ayay gacanyare u ahaan jirtey oo agtiisa lagu arki jirey.

Muddo haddii ay arrini sidaas ahayd ayay waagii dambe gabadhii kortay. Waxay noqotay gashaanti guurgal ah. Waxay soo baxday inan qurux dumar lagu kuunyey iyo bocor aan indhaha laga qaadi karin. Xilligii la xodxodan lahaa oo ay barbaartu guurkeeda u tartami lahayd ayay gaadhey. Sida gabdhaha la ayniga ah, waxay u bislaatay ragga geyaankeeda ah maalintii ay ka dhex-dooran lahayd kii ay oorida u noqon lahayd, dabadeedna ay carruurta isu dhali lahaayeen.

Hase ahaatee, taasi ma dhicin. Gabdhaha waalkeeda ah halka, habeen iyo dharaarba, ay barbaartu ag-dhooban tahay, iyada midkoodna kuma soo hanbaaso, cidina xodxodo uguma timaaddo. Waxaana jirtey sabab maangal ah oo iyada iyo dhallinyaradii u soo hawoon lahayd kala fogeysey. Yaa beer iyo wadne leh oo ku dhici karey inuu Wiilwaal walaashiis ku soo dhiirrado?! Yaa, isaga oo xodxodo-doon ah, inta golihiisa isa soo taaga walaashiis naagnimo u soo haweysan karey?!

Nin waliba warmaha Wiilwaal intuu ka baqay ayuu walaashiisna ka maarmay, kana fogaadey. Wuxuu barbaar waliba door-biday inuu xidid kale yeesho, reero kalena uu xilo ka doonto!

Ragse ma quustee, wiil baa isa soo kilkilay. Wiil baa soo bareeray. Wuxuu goostay gabadhaas uu rag oo idili ka maagey inuu isagu isku biimeeyo! Mararka ay keligeed tahay intuu ilbaadsado ayuu dhegaha ugu shubaa sheekooyin ay dhab u rabto oo, isaga mooyee, aan cid kale kula soo dhiirran karin! Lo'ley bay ahaayeene, inta badan lo'da dhexdeeda ayuu kula kulmi jirey, ka dib markuu hubsado inaan walaalkeed carriga ka dhoweyn! Waxay haasaawaanba, ugu dambaystii ayay ku guuleysteen mid waliba inuu midka kale is'oggolaysiiyo, waana la is-aamminey.

Hase ahaatee, waxay mugdi iyo dhuumasho isku arkaanba, waxaa la gaarey wixii ay muddaba isu sheegayeen markii ay ka dhabayn lahaayeen. Waxaa la gaarey markii ay yeelan lahaayeen aqal ay nin iyo ooridiis ka yihiin oo ay qoys ku noqdaan. Laakiinse, waxaa ka murugtey riyadaas macaan sidii ay ku rumayn lahaayeen. Markaas bay kolba talo istuseen.

Mar waxay ku tashadeen barbaarku inuu Wiilwaal toos ugu tago oo gabadha uu af-muggiis ku weyddiisto! Mar labaadna waxay isla heleen inay degaankoodaba ka cararaan, dabadeedna ay dhul shisheeye isku guursadaan.

Sidii ay midba mar u falanqeynayeen ayay, ugu dambaystii, waxa ay ka badin waayeen inay labada taloba maankooda ka saaraan, ayna iska illoobaan. Waxaa u caddaatay inaan midina suuraggal u noqon karaynin.

Maxaa yeelay waa hubaal oo inanka guur-doonka ah naftu in badan kuma sii jirteen, hadduu geesinnimo iska dayo oo inta Wiilwaal hor-fariisto uu walaashiis ka doono. Wuxuu u qaadan lahaa inanku inuu isaga isla simaayo, markaasna kurka ayuu hor-dhigi lahaa!. Dhinaca kale, waxay garan waayeen geyiga uu Wiilwaal baarqabka ka yahay meel aan ahayn oo inta ay isku guursadaan ay kaga nabad-geli karaan, kuna dhaqmi karaan.

Si ay wax yeelaan ayaa laga madoobeeyey. Sheekadoodu waa qarsoodi. Labadooda uun bay ku eg tahay. Cid kale oo la ogi ma jirto. Cid ay kala tashadaanna lama arko, maxaa yeelay waxay ka baqayeen, haddii la ogaado, inuu Wiilwaal maqlo, dabadeedna uu qorshahooda dhexda ka kala jebiyo, haddii uusan dilinba!

Ugu dambaystii, waxaa talo keentay gabadhii oo jacayl darani uu ka saayid-caleeyey. Dhawr cisho oo isku xigta ayay barbaarkii waxay laabta ugu riddey walaalkeed Wiilwaal oo ifka saaran inaan guurkoodu sina meelmar u noqon karin! Markaas buu ku yiri: 'Ma waxaad u jeeddaa in aynu iska sugno inta uu ka dhimanaayo? Markaas bay ku jawaabtey: 'Maya, dhimashadiisa ma sugi karayno! Inankii baa inta su'aal kale ku



celiyey ku yiri: 'Maxaynu, haddaba, yeelnaa?' Dabadeedna, iyada oo aan la gabban ayay ku tiri: 'Waa in la dilaa oo, weliba, aad adigu gacantaada ku dishaa!'

Mar keliya ayuu gabadhii ku dhaygagay oo, isaga oo aan is-ogeyn, waxa uu la soo boodey: 'Dil aa! Wiilwaal dil baa! Yaa beer iyo wadne leh oo ku dhaca? Yaase dagnaan ka heli kara?' Markaas bay ku tiri: 'War nin baa Alle kaa dhigaye, walaalkay goorta uu dagan yahay haddii aan kuu sheego, sow ma dili karaysid?. Wuxuu ku jawaabey: 'Oo, heedhe, yaaba arkay Wiilwaal oo dagan, miyaad i melgeysaa? Waxay tiri: 'Aniga ayaa arkay oo aqaan goorta uu dagan yahaye, adigu nin ma tahay?'

Kolkaas buu, isaga oo aan ku qanacsanayn waxa ay sheegayso, waxa uu weyddiiyey: 'Oo waa goorma? Waxay ku jawaabtey: 'Waa fiidkii; xilliga ay lo'dayadu golaha u soo hoyato ee, si uu liso, uu weelka u qaato. Badanaa, isaga oo hubkiisa dagaalka gacanta bidix ku wada haysta ayuu lo'dana midda midig ku lisaa!'

'Ha yeeshee, arrintu mar walba sidaas ma aha. Waxaa lo'dayada ku jira sac tood ah, xoog badan, dad-dil ah, si loo maalaana ay dhib badan tahay. Sacaas oo lagu magacaabo Naaso`adag wuxuu ku irmaan yahay, laguna maalaa dibi` uu dhalay oo isna itaal miiran ah, sida hooyadiisna aan wax qaban karaayi jirin. Haddaba, marka uu sacaas lisayo oo keliya ayuu hubka oo dhan meel iska dhigaa, waana marka keliya ee uu dagan yahay, adiguna aad dili karaysid!'

Inankii wuu amankaagay. Wuxuu ka yaabay inanta dhiirranaanteeda iyo isaga baraq-nugeylkiisa! Isaga oo cabsiyi buuxisey, asii gabadha guurkeeda aad u raba ayuu iyadii su'aal ku celiyey. Wuxuu yiri: 'Oo sidee baan ku garanayaa marka uu Naaso`adag lisayo, aniguse waqtigaas xaggee baan ku suganahay?'. Waxay ugu jawaabtey: 'Fiidkii markay noqoto oo lo'duna reerka u soo hoyato ayaad soo fariisanaysaa meel u dhexaysa golaha lo'da iyo aqallada; adiga oo hubkaagu kuu dhan yahay. Dabadeedna, marka uu walaalkay lisidda sacaas u tafo-xayto ayaan aniguna waxaan kuugu baaqi doonaa cod dheer oo aan kugu ogeysiinayo goortu inay tahay goortii habboonayd ee, Wiilwaal oo dagan, aad makali lahayd, ka dibna aynu, sidaas, qoys ku noqon lahayn!'.

Qorshahaas halista ah inuu yeelo ayay, si isdabajoog ah, ugu guubaabisey. Habeen iyo dharaarba, goortii ay is'arkaanba way ugu celisey. Waxay u qurxisay dilka walaalkeed ilaa ay kolkii dambe yeelsiisey. Habeenkii lagu ballamay ayay qorraxdiisii dhacday. Inankii oo u eg wax nafta ka samirsan, asii jacaylka gabadhu uu maan-tiray ayaa golihii Wiilwaal u soo xaydxaytey. Dhagar buu ku tashan yahay, sidaas daraaddeed wuxuu ku raran yahay wixii uu hub heli karaayey: waran, gaashaan, hooto, seef, toorrey, iwm.

Geed xagar ah oo aan ka fogeyn edegta weylaha lagu xereeyo ayuu ku soo gabbaday. Wuxuu doonayaa waxa golaha ka dhici doona oo dhan inuu si wacan ula socdo. In aan sharqan yarina dhaafin ayuu rabaa, si aanu u seegin baaqa uu u dheg-taagaayo ee xagga gabadha uu ka sugaayo.

Wuu welwelayaa. Dhab ayuu uga walaacsan yahay tallaabada ba'an ee uu kol dhow ku dhaqaaqi doono. Waxa uu og yahay inay tahay tallaabo, isaga ka hor, aan cidina ku riyoon, kuna dhiirran. Meel uu ka noqdose ma joogo.

Dhabanka ayuu dhulka ku hayaa. Durba waxa uu dareemayaa dhaqdhaqaaq hor leh oo xagga reerka ka soo gaaraya. Xiddigtii Waxaraxirta ayaa sii 'wis' leh oo cirka ka sii hoobanaysa. Wisinkii lo'da la maali lahaa ayaa la gaarey. Waxaa u muuqda dab oogan oo lo'da iyo carruurta qaarkeed ay kulaalayaan. Ololka dabkaas ayaa kolkol wuxuu tusayaa dumar gacnaha wata agabkii lo'da lagu maali lahaa sida dabarro, haruubbo culan, kuwo la deebiyey iyo caanaha habeenkaas la liso dhiilihii lagu dhigi lahaa. Weylihii iyo sacihii dhalay ee ay ku irmaanaayeen ayaa bilaabay inay isu ciyaan, markii la gaarey, fiid walba, xilligii la isu soo deyn jirey.

Lo'da inteedii badnayd waa la maalay. Wuxuu inanku u toog-hayaa naftiisa goortii uu biimayn lahaa oo soo dhowaatey! Baaqii gabadha oo ilmilicsi kasta dhegihiisa ku soo dhici kara ayuu sugayaa. Wuxuu goostay xagarkii uu ku gabbanaayey inuu ka yare baxo oo xagga reerka inta uga durko uu xerada lo'da foodda ku qabto. Sidaas markii uu yeelayna waxaa u suuraggashay inuu maqlo hadal kasta oo dhex-maraya Wiilwaal oo kolba sac lisaya iyo walaashiis oo weylaha hadba mid u soo deyneysa.



Cabbaar wuxuu halkiisaas ku nabnaadaba, waxaa la soo gaarey markii la lisi lahaa sacii dhibta badnaa ee lo'da loogu dambaysiin jirey; laguna magacaabi jirey Naaso`adag. Inankii ayaa wuxuu maqlay Wiilwaal oo gabadhii ku leh: 'Heblaay, dibiga Naaso`adag soo daa'. Markaas bay, si ay inanka ugu baaqdo, waxay cod dheer ku tiri: 'Dibiga Naaso`adag baa?'

Hadalkaas dambe ee walaashiis ka soo yeeray ayaa Wiilwaal dareen geliyey, maxaa yeelay ma ahayn hadal uu uga bartay. Isla markiibana, dabarkii iyo agabkii kale ee uu saca ku lisi lahaa ayuu gees isaga tuuray. Halhaleel ayuu dhulka uga haabhaabtay qalabkiisii dagaalka, wuxuuna ku hubsaday labadiisa gacmood. Dabadeedna, isaga oo aan garanayn halka looga imaan doono ayaa waxaa afkiisa ka soo baxday su'aal waayadii dambe noqotay wax lagu maahmaaho oo ahayd: 'Naa maxaa dibiga Naaso`adag iyo weedha kulmiyey?'.

Hortiisa iyo hareerihiisa ayuu dhab u eegay. Mase waxaa ku soo ganan wiilkii oo bidixda iyo midigtaba labadiisii waran ku sita, abley af badanina ay u galaysan tahay oo dhinaca ugu xiran tahay. Haddiiba Wiilwaal wuu fekerey. Wuxuu hubsaday ninka soo maqiiqani inuu isaga maaggan yahay. Markaas buu degdeg u banneeyey halkii uu taagnaa oo dhanka bidix u boodey.

Inankii oo xawligii orodkiisa yarayn waayey ayaa Wiilwaal gadaal u dhaafay. Isaguna intuu, sidii libaax diihaalsan, uga dabo-boodey ayuu hooto dhegaley ah ku halgaadey oo garabka bidix kaga joojiyey! Inankii oo nabarkii la ala'ledaya, hootadiina ay ku taagan tahay ayaa dib u soo jeestey. Wuxuu damcay inuu is`axmo oo ninka diley uu waran tuuryo ah caloosha kaga xabaalo, ha yeeshee waxay noqotay toog baaqatay!

Wuxuu iska waayey xooggii uu waranka ku seeraarin lahaa ee uu Wiilwaal ku gaarsiin lahaa. Kii oo dalanbaabbi ah oo naf xuni ay ku sii ciriiq leedahay ayaa Wiilwaal dul-tegey. Uma uu kaadine, seeftiisa oo hillaacaysa ayuu kurka kaga jaray! Gabadhii iyadu maxay, tolow, mudatay? Bal adba!

Garaad Wiilwaal wuxuu ahaa dagaalyahayn wax badan ku kordhiyey aqoonta dagaalka iyo abaalulka ciidammada. Sidoo kale, wuxuu ahaa maansoyahan tixihiisa ay bulshadu isu weriso. Siday ila tahayna, taariikhda suugaanta Soomaalida markii la qoro waxaa ku sheegnaan doona inuu ku jirey hal'abuurradii hore ee gabayga Soomaalida u qaabiyey habka uu haddaba u qaabaysan yahay. Isaga iyo Raage Ugaasba waxaa lib loogu hayn doonaa inay ahaayeen raggii ugu horreeyey ee maansadeenna u yeelay xeerarka ay, ilaa maantaba, leedahay ee aynu wada ilaalinno; haddii ay jaangooyada miisaanka tahay iyo haddii ay qaafiyadda tahay labadaba.

### 13. Goob dagaal & Gabay ka haray

Gabayada tirada yar ee Wiilwaal naga soo gaarey midka ugu caansan waxa uu ku tilmaamay sidii ay u dhacday goob dagaal oo dhinacyadii isaga hor-yimid midkood uu isagu ammaanduule ka ahaa, guushiina ay ciidankiisii ku raacday. Waayihiisa ragga wax ka ogi sida ay qabaan, waxay goobtaasu ahayd tii magaciisa cirka ku sii shareertay, dadkii uu u talin jireyna u gacan-gelisey degaan idil oo, ilaa maantaba, ay deggan yihiin. Sidaas daraaddeed, inta aanan gabayga soo bandhigin waxaa ila habboon bal horta inaan soo bandhigo sidii ay u dhacday goobtaas iyada ah.

Qabaa'ilka Soomaalida iyo kuwa Gaalluhu[5] waxay muddo dheer ahaayeen xoolo-raacato deris ah. Labaduba waxay ka tirsan yihiin qawmiyadaha ugu waaweyn kuwa Geeska Afrika wada dega. Wixii ka horreeyey qarnigii 20d, waxay, si joogto ah, labada qawmiyadoodi ugu halgami jireen lahaanshaha ceelasha, harooyinka iyo, guud ahaan, dhulka ay biyihiisu dhow yihiin ee waraabka xoolaha iyo dadkaba aan looga maarmi karin.

*5. Magaca 'Gaalla' waa magac hore oo loo yiqiin qawmiyadaha Geeska Afrika midda ugu tirada badan; taas oo waayadan dambe 'Oroomo' loogu yeero. Sida Soomaalida, Harariga iyo Cafarta, Gaalluhu waa ummad ay Amxaaradu dhulkeeda gumeysato oo ku baahsan qaybo ka mid ah Bariga iyo Koofurta waxa maanta 'Itoobiya' loo yaqaan ee qarnigii 19d uu dhul-fidsiga hubaysan Boqor Menelik ku sameeyey. Waayadii hore, qawmiyaddaas waxay Soomaalidu ku magacaabi jirtey; Gaalo-madow , Gaalo-waranley iyo Gaalo-dhoorreey. Sidaas daraaddeed, waxaa lagu male weyn yahay erayga gaal oo, ilaa maantaba, ay Soomaalidu ku tilmaanto qofka aan muslinka ahayni inuu halkaas ka soo jeedo, in kastoo tiro bar ku dhow oo muslin ahi ay ummaddaas xilligan ka mid tahay.*



Dhinaca Soomaalida waxaa dirirtaas ugu badnaa tolka Bartire ee uu Wiilwaal madaxda u ahaa, halka xilligaas boqorka Gaalluhuna uu ka ahaa dagaalyahan macangag ah oo ay Soomaalidu u tiqiin Gaal-Gurey.
Haddaba, mar lagu wado inay ku beegan tahay dabayaaqada qarnigii 18d ayay dagaallo ba'ani degaanka Jigjiga labadaas qolo ku dhexmareen. In kastoo ay muuqato in Gaalluhu xoogaa ay Bartiraha ka itaal roonaayeen, haddana, si ay ku dhacdayba, waxay markii dambe gaareen is`afgarad ku saabsan biyo-qaybsiga ceelka Jigjiga. Waxay ku heshiiyeen maalinta gelinkeeda hore inay Gaalluhu ceelka ka cabbaan, gelinka dambena uu Bartiruhu xoolaha ka waraabsado, reer-gurigana uga dhaansado.
Ha yeeshee, muddo yar ka dib ayaa waxaa soo if-baxday inuu Bartiruhu heshiiskaas ku hulgan yahay, Gaalluhuna ay ku guuleysan yihiin. Oo sababtuna maxay ahayd?

Dhulka ay Jigjigi ku taalli waa dhul jilicsan, sidaas darteedna ceesha laga qotaa si fudud ayay u duntaa. Gaal-Gurey iyo dadkiisu waabberigii ayay yimaadaan ceeshii oo xalay si wacan u maaxatey, markaas bay xoolaha ka waraabsadaan, sidii kale oo ay doonaanna uga muraadsadaan.

Gelin dambe ayaa la soo gaaraa; kolkaas oo, sidii lagu heshiiyey, ahaa xilligii uu Bartiruhu lahaa. Hase ahaatee, iyaga iyo xoolahooduba waxay dawda ku soo beegmaan ceelashii oo cagtii geela iyo isdhafandhaafkii dawlisyadu ay jilciyeen. Dabadeedna, dhawr hormo oo keliya markii ay ka waraabsadaan ayay wada dumaan; iyada oo, intoodii badnayd, xoolihii ay soo aroorsadeeni ay ka oomman yihiin, haamihii ay reeraha u soo dhaansadeenna ay ka wada maran yihiin! Markaas bay waxay ku dedaalaan inay mar kale qodaan oo ciidda dibedda uga saaraan, waxse ugama naaso-caddaadaan. Maxaa yeelay, iyaga oo weli ciid-bixinta ku hawllan, xoolahooduna ay oon la ildaran yihiin ayay, maalin walba, qorraxdu ka dhacdaa!

Arrintaasi Garaad Wiilwaal way u cuntami weydey. Keligiisna ma ahayne, xoolo-raacatadii Bartire oo idil bay u dhadhami weydey. Gaal-Gurey haddii ay dareenkaas u gudbiyeenna, wuu uga garaabi waayey. Markaas bay go'aansadeen in aysan sinaba u oggolaan heshiiskii hore ee biyo-qaybsiga ceelka Jigjiga, dagaalna ay ka xigaan.

Hase ahaatee, tiro iyo hubba laga badane, sidee bay wax yeelaan? Dagaal waa lamahuraane, yay hiil iyo cudud ka heli karaan? Yay u qayshan karaan? Kolba waxay talo gorfeeyaanba, ugu dambaystii, waxay ka badin waayeen inay u qaylo-dhaansadaan Soomaalidii xilligaas isaga ah ugu oodda dhoweyd ee xagga bariga ka xigtey. Maalintaas ayuu Wiilwaalna wuxuu Bartire ka soocay odayo culculus oo uu ku kalsoon yahay, una ergeeya Ogaadeen iyo Soomaalidii kale ee ay degaan-wadaagga ahaayeen.

Sidii dhaqankii hore ee Soomaalidu ahaa, si wanaagsan ayaa ergadii Bartire loo marti-geliyey. Toddobaad markii ay reeraha dhex-joogeenna waxaa loo sheegay war ay aad u jeclaysteen. Waxaa la ogeysiiyey farriintii Garaadka in la yeelay, codashadiisiina laga oggolaaday. Si aan leexleexad lahayn ayaa loogu ballan-qaaday in loo soo gurman doono oo rag, fardo iyo qalab dagaalba loo soo diri doono, si ay iyagu ceelka Jigjiga ugu adkaadaan.

Ergadii oo sidaas u guuleysan ayaa u darbatay sodcaalkii ay ugu noqon lahaayeen Galbeed iyo carro Bartire. Ha yeeshee, intii aanay anbabbixin ayaa oday ku jirey cidihii ay martida u ahaayeen waxa uu weyddiiyey su'aal ay ka garaabeen, jawaab wacanna ay ka bixiyeen. Wuxuu yiri: 'Xigtooy, degaankayaga iyo kiinnu waa kala durugsan yihiin. Toddobaad ka badan, malaha, waa la isaga socdaa. Marka waxa aan garan la'ahay sida, annaga Bartire ahi, aan ku ogaaneyno inuu ciidankiinnu noo soo dhow yahay iyo, kolba, inta uu noo soo jiro?' Waa runtiis oo dhulku waa kala fog yahay, xilligaasna lama aqoon farsamada qalabka uu aadanuhu gadaalkii bartay ee, iyada oo kumanyaal mayl la isu jiro, la iska maqlo, wararkana la isugu tebiyo.

Odayadii su'aashu ku socotey ee martida loo ahaa ayaa isku noqday. Cabbaar ka dib ayay ergadii u yimaadeen, iyaga oo jawaab u wada. Waxay ku yiraahdeen: 'Hadda iska anbabbaxa. Reerihiinna markii aad gaadhaan, warmihiinna xayr ama subag mariya, dabadeedna dul-saara xero walba bawdkeeda. Marka aad ku aragtaan habaas yar oo fuulay, waxaad ogaataan laba maalin-socod inuu ciidankayagu idiin soo jiro. Markaas ka dibna haddii aad aragtaan habaaskii oo warmaha wada qariyey, waxaad ogaataan in hal maalin-socod uu ciidankayagu idiin soo jiro'.



Sida aad garan karayso, waxay afgarad ka dhigteen siigada ka dhalata qoobabka fardahooda iyo dhulka ay gaari karayso, masaafadana looga qiyaas qaadan karo. Sidaas baa lagu kala tegey.

Intii ay ergadu Bari ku maqnayd, Wiilwaalna wuxuu ku hawllanaa sidii uu dadkiisa ugu darbi lahaa dagaalka soo aaddan ee lamahuraanka ah. Wuxuu bilaabay ragga xoogga leh oo idil inuu gaar u sooco oo cidaha dhexdooda ka saaro, si ay ugu tabo-bartaan halganka isha baalkeeda u soo jirsadey ee ay Gaallaha la geli doonaan.

Ciidankii ayuu si fiican ugu habeeyey goobta ba'an ee soo dhowaatey. Wuxuu u qaybiyey shan qaybood, mid walbana wuxuu u qaydey dhinaca ay dirirta ka geli doonto: midigta, bidixda, bartamaha, horay iyo gadaal. Dagaalyahan walba wuxuu u sheegay qaybta uu ka tirsan yahay, qayb walbana wuxuu u qeexay goorta ay dagaalka geli doonto iyo tirada ragga ay ku geli doonto.

Garaad Wiilwaal waxaa ka go'nayd dirirta soo aaddan inuu isagu ku guuleysto. Sidaas darteed, waxa uu ku kacay tallaabo aan looga horreynin oo ninkii fuleyoobi lahaa oo idil uu ku quusiyey. Colka meel ka gadaalaysa geed ku yaal ayuu labaddible waxa uu ugu xiray Axmed Garaad oo ahaa curadkii uu carruurtiisa ugu jeclaa. Markaas buu dagaalyahannadii qaybaha ciidankiisa inta kulmiyey waxa uu ku yiri: 'Nin walbow ogow, midigtayda ayaan ku gawrici doonaa ninkii dib u jeesta oo 'goobta ka baxso' inta isyiraahda, geedka Axmed ku xiran yahay gadaal ka mara!'. Waxay ahayd digniin kulul, dhaar culusna uu ku adkeeyey.

Gaal-Gurey qudhiisu ma fadhiyin, ismana dhigan. Weligiisba wuxuu ahaa nin aad u dhiifoon. Wuxuu og yahay abaabulka dagaalka ee dhinaca Soomaalida ka oogan.

Banka Jigjiga ayuu ka dhigtay saldhig iyo goob uu ku ciidan-urursado, dhawr cisho gudahoodna wuxuu ku soo dhoobay guutooyin ku hubaysan dhammaan wixii qalab dagaal ahaa ee degaanka Geeska Afrika xilliyadaas laga yiqiin. Maalin walba dhanka uu Bartiruhu joogo ayuu ciidammadiisa u soo durkiyaa, ilaa ay isu soo jirsadeen wax aan galab-carraabo dhammayn. Waxay ka ahayd daandaansi, waase lagu gartay!

Wiilwaal oo ahaa nin looga haray ammaanduulka iyo maamulka dagaalladu, ma degdegsana. Ma uu rabo in lagu hanboorriyo dagaal aanu hubin inuu ku guuleysan doono. Weli ciidankii uu Bariga ka sugaayey ma soo gaarin. Ha yeeshee, wuu soo dhow yahay oo siigadii fardahooda ayaa warmihii wada qarisay. Siduu baaqu ahaa, hal maalin-socod oo keliya ayuu u soo jiraa.

Maalintii dambe ayaa waxaa la soo gaarey gaasaskii Reer-Bariga subaxdii uu galabteeda filaayey. Barqo dheer markay noqotay ayuu milicsaday Gaal-Gurey iyo raggii uu goobta soo dhoobay oo ka muuqda meel uu si wacan uga arki karo. Isaga oo faraskiisii ku jooga ayuu hor-taagan yahay ciidankiisii oo ay suuraggal tahay inuu mar walba soo duuliyo. Isna wuxuu rabaa inuu ku baajiyo, haddiiba tashi caynkaas ahi uu ku jiro.

Dabadeedna, isaga oo keligiis ah ayuu u xawaareeyey halkii Boqorka Gaalluhu uu colkiisa ku hor-taagnaa. Wuxuu ku joogaa Weyrax oo ahaa baxdoygii lagu yiqiin ee fardihii xilligaas la haystey ugu orodka dheeraa. Tashiga uu ku socdaana wuxuu yahay, si uu yeeloba, inuu dib u dhigo dagaalka ka-fool-ka-foolka ah ee labada ciidan ay foodda isku dari doonaan. Wuxuu diidayaa iska-hor`imaadka weyni inuu dhaco, iyada oo aan weli la gaarin dharaarta gelinkeeda dambe oo ah marka uu gurmadku soo gaari doono. Kolka, sow Gaal-Gurey inuu maaweeliyo ma aha?

Meel looga tannaagoon karo markuu u soo jirsadey ayuu inta faraskii hojiyey wuxuu ku yiri: 'Waxaad tahay Boqor dagaalyahan ah oo la wada yaqaan, aniguna waxaan ahay Garaad dagaalyahan ah oo magac dheer. Kolka, waxaa ila qumman, innaga oo aan isdileyn, inaynu labadeenna col tusno sida uu midkeen waliba u yaqaan tabaha dirirta iyo fardo-ku-dagaallanka; ka hor inta aanay labada ciidan foodda isdarin'.

Gaal-Gurey oo aan rabin in fuleynimo lagu maleeyo ayaa taladii Wiilwaal halhaleel u oggolaaday, isaga oo raaciyey: 'Waan yeelay, hase ahaatee ma adigaa dhoollatuska bilaabaya, mase aniga?'. Wiilwaal oo ay hubaal tahay in tashi cusubi uu maankiisa ku soo kordhay ayaa ku jawaabey: 'Bal aan ku aragnee, adigu ku horree'.



Iyada oo aan eray kale la isdhaafsan ayay labadii colba waxay dareemeen Gurey oo, sidii aar-libaax, u baabbul-kacsaday! Isla markiiba, waxa uu ciribta ku dhuftay faraskii uu ku joogey ee uu ku soo dagaal-tegey. Suu inta boodey buu cirka galay, markaas oo ay daawatadu mooddey kob dhulka iyo hawada u dhexaysa in cabbaar lagu hakiyey!

Haddana, bankii ayuu ku sii daayey. Marna dhirta iyo boholaha ayuu ka dul-bootiyaa, marna, si kedis ah, ayuu u hojiyaa. Mar kale, neefkii oo aad u xawaaraynaya ayuu inta dhabarkiisa ka soo meero bogga isaga dhejiyaa, in yar ka dibna intuu labada lugood ciidda la helo dushiisii ku noqdaa; kii oo aan orodkiisii innaba waxba ka dhimin!

Mar kale, warmihiisa midkood ayuu kor u ganaa, markaas buu, inta aanu dhulka kaga dhicin, meel dhexe ka qabsadaa. Mar kalena, geedaha midkood ayuu waranka ku halgaadaa: qaybta birta ah oo idil intuu jirridda kaga xabaalo ayuu haddana xoog kagala soo baxaa; isaga oo weli ku jooga faraskii oo sidiisii u xawaaraynaya. Labadii dhinacba, intii maantaas wada daawanaysey ayuu ashqaraar iyo af-kala-qaad ku ridey!

Haddaba sidii lagu ballamay, dhoollotuskii lala yaabay ee Gaal-Gurey waxaa lagu xijiyey kii uu Wiilwaal soo bandhigay oo noqday mid ka daran oo lala amankaagay. Daawatadii iyo labadii colba wuxuu u muujiyey tabaha fardaha dushooda iyo hubkaba loogu dagaallamo; tabahaas oo ahaa qaar ay bulshadu horay u tiqiin iyo kuwo cusub oo maantaas ka horow aan cidina arag.

Dhoollatuska intii uu ku jirey oo dhanna wuxuu kolba eegayey halkii uu colkiisu tuurraa. Ujeeddadiisu waxay ahayd inuu sidaas ku sii wado oo banka ballaaran uu kolba dhinac u cararo tan iyo inta gaasaskii Barigu ay ciidankiisa ku soo biirayaan. Taasina sidii uu rabey ayay u dhacday, markii la wada arkay fardihii Reer-Bariga siigadoodii oo mar keliya cirkii iyo dhulkii kala qarisay! Xoog hor lihi sow, kolkaasna, kuma soo kordhin?

Dabadeed, ciidankii Gaalluhu halkii uu safnaa intuu bidhaansaday ayuu cagta u rogey faraskiisii Weyrax ahaa. Xawli layaab leh ayuu wuxuu ku gaarey goobtii ammaanduulahoodu uu dhoollotuskiisa ka daawanaay-

ey. Waxaa la isweyddiiyey: 'Muxuu ka doonayaa meesha uu ciidanka cadawgu dhooban yahay? Muxuu, tolow, maaggan yahay? Cidina lama oga, wuxuuse rabaa inuu ballankii ka baxo oo, dagaal-weynaha ka horba, uu Gaal-Gurey dhegta dhiigga u daro!

Hase ahaatee, Gaal-gurey tashiga caynkaas ah maba soo rogin. Xawaaraha Wiilwaal wuxuuba u haystaa inuu qayb ka yahay dhoollotuskii ay isku ogaayeen.

Haddaba, isaga oo sidaas isaga baraad la' ayuu ku war-helay hooto lafdhabarta qaybteeda hoose kaga dheggan iyo, isla markiiba, waran isna la soo halgaadey oo xuddunta bartankeeda kaga taagan. Kaas baa inta xiidmihii calooshiisa halakeeyey cadcad u rogey oo haddana dhabarkiisa ka kudey! Sow, haddiiba, dhiig butaaco ah afka kama uu keenin!

Ha yeeshee, intii aanu faraskii ka dhicin ayuu istiilay oo labadiisii waran midkood gacanta bidix la helay. Wiilwaal oo meel aan ka fogeyn ka muuqda ayuu ku tuuray. Isna gaashaankii uu bidixda ku haystey intuu isaga dhigay ayuu hareer isaga dalfiyey, sidaasna kaga bedbaadey. Dharaartaasna waxaa sidaas ku ahaaday geesigii dagaalyahanka ahaa ee muddada dheer ay Gaalluhu hasha ku maalayeen.
Markii uu hubsaday Gaal-Gurey inuu afka kala taagey ayuu Wiilwaal wuxuu marada u taagey ciidankiisii iyo gaasaskii soo xoojiyey ee dhanka Bari uga soo gurmadey. Markaas bay iyagiina, lug iyo farasba, sidii gamuunno fallaaro laga ganay u soo gulfeen oo haddiiba bankii qof iyo siigo u rogeen!

Waqti iskama ay lumine, si degdeg ah ayay birta ugu boobeen guutooyin idil oo, maalintaas ka hor, geesinnimo loo ogaa, asii johoraddii dhigay, ka dib markii halyeygoodii uu Wiilwaal ku hamuun-tirtay! Waxay ahayd dharaartii guusha fudud ee aanu filanaynin uu Garaadku goobtaas kala laabtay. Waa dharaartii isaga loo geliyey baalkii dheeraa ee guyaasha badan Gaal-gurey madaxa u saarnaan jirey. Waa dharaartii, qorraxda oo aan weli dhicin, ay lo'dii Bartire ceelkii soo wada gashay; iyada oo uu u hor-cabbey sacii Golyo loo yiqiin ee uu isagu lo'diisa ugu jeclaa.



Sidoo kale, waxay ahayd dharaartii Jigjiga iyo agagaarkeeda uu geesigaasi Soomaalida u soo gacan-geliyey; geyigaas oo ay weli ku dhaqan yihiin, in kastoo, intay dib ka gumoobeen, ay hadda Xabashidu ugu taliso.

Dhawr toddobaad haddii dirirtaas laga joogo ayuu Wiilwaal faanay oo, gabyaa buu ahaaye, wuxuu tiriyey tix uu isku tilmaamay, goobtaasna uu ku taariikheeyey. Malaha wuxuu ugu caansan yahay gabayada tirada yar ee naga soo gaarey. Dhinaca kale, wuxuu ugu da' weyn yahay gabayada ay maansayahannada Soomaalidu tirin jireen marka ay ka soo noqdaan goob dagaal oo ay iyaguba ka qayb-galeen amaba looga sheekeeyey. Wuxuu yiri:

*Xalay gelin-dhexaadkii miyaan gogosha soo laabay?!*
*Gurxanka iyo gooraanka iyo guuxi iga yeedhay*
*Hanqadh geedo-laaye ah miyaa laabta iga guuxay?!*

*Ogaadeen Galduur iyo hadduu Webi ka soo gaasay*
*Meeshiyo Garlooggube hadduu galawgu eedaamay*
*Guntadayeey! haddaan khaylidii labada naas geeyey*
*Asaan Weyrax nadigii geshuu gucummo aar yeeshay*
*Gaalladii ka goor iyo ka goor reebi nagu goysey*
*Gurey maalintaan diley colkeed inuu go'aan sheegtay!*

*'Golyaay!' maalintaan idhi darkii inay gashaan sheegtay!*
*Meeshaan ka geyllamey dadkii inuu go'aan sheegtay!*
*Garbidaan[6] ku tiirsaday rag inuu garab-maraan sheegtay!*
*Geeraarshe dheer iyo dagaal warangalaan sheegtay!*
*Gacan iyo in geed laga hadliyo gobannimaan sheegtay!*

---

*6. Garbi waxaa lagu sheegay geed banka Jigjiga ku oolli jirey oo maalintii ay goobtaasi dhacaysey uu Garaadku inta dhufeys ka dhigtay uu ciidanka ka hoggaaminaayey. Gabaygaas ayaa waxaa mid jawaab ah ka tiriyey Cigaal-lleey oo ay Wiilwaal loollami jireen, kana mid ahaa raggii tirada yaraa ee isku dhereriyey. Isaga oo ku ceebaynaya meeriska uu geedkaasi ku xusan yahay oo Garaadka fool-nugeyl u qusurinaya ayaa waxaa tixdiisii ka mid ahaa: 'Ma gashaanti baa tahay maxaa geedka kugu tiirin?!'. ( Arag sheekada 'Hal ku xamey' ee soo socota ).*

## 14. Laba sheeko:

**A. Sac waalwaalan!**

Waxaa la yiri: Haweeney Wiilwaal u dhaxdey oo la xaman jirey ayaa la isla dhex-qaaday in wiilka Maxamad la yiraahdo oo uu Garaadku adeerka u ahaa iyo iyadu ay dad isugu dambeeyeen!. Dharaartaas ayuu Wiilwaal go'aan ku gaarey inuu arrintaas hubsado oo uu inanka qudhiisa runta ka ogaado.

Ha yeeshee, sidee buu uga ogaan karaa? Wuxuu doortay su'aal sarbeeban inuu wax ku weyddiiyo. Markaas buu tixdan, maalintaas ka dib, caanka noqotay wiilkii wax ku su'aaley. Wuxuu yiri:

*Wanaagsane walaalkay-dhalyow wiilkayow Maxamad*
*Sac wanaagsanoo weyl watoo kayn wahdi ah jooga*
*Oo yaraha waalwaalanoo wiilasha eryooda*
*Marna inaadan weysha u furteen ii mar wacad Eebbe!*

Meeshii uu haweeneyda iyo magaceeda carrabka kaga dhufan lahaa wuxuu ka xusay sac socod iyo miraaf badan, bulsho-lo'aadda wada oggol, hadbana kii arkaa uu u godlado! Wuxuu su'aashii ku soo gebaggabeyey: 'Maandhow, iigu dhaar mar, saca sidaas u camalka san inaadan weli u hawoon oo aadan caano ka maalin?

Wiilkiina ujeeddada wuu gartay. Sarbeeb tii Wiilwaal la mid ah ayuu su'aashii kaga jawaabey. Wuxuu yiri: 'Dhaaran maayo'. Laakiin tu` dhar la' ma ahayn.' Sidii adeerkiis daboolka xishoodka uu doodda u saaray ayuu isna u saaray. Wuxuu ku jawaabey su'aal rogaal-celis ah oo jawaab u noqotay tii adeerkiis. Wuxuu yiri:

*Hal waraabe diley oo haddana weli xalaaleeyey*
*Waax qalo' haddii lagu yiraa oon wax kugu raacin*
*Inaadan weel u soo qaadateen ii mar wacad-Eebbe!*



Wuxuu ka hadlay tulud bahal diley oo inta birta lala soo gaarey hilboqaybsigeeda la isugu yimid; taas oo uu ula jeedey haweeneydii lagu xamanaayey. Wuxuu kula dooday: 'Adeer, aniguna aan wax ku weyddiiyee, hal bahal diley oo intii aanay baqtiyin uu nin muslin ahi gawracay, haddii hilibkeeda qayb 'u kaalay' lagugu yiraahdo, iyada oo aan waxba lagaaga dooneyn, inaad diidi lahayd adigu bal horta iigu dhaaro!'

Hadal kama dambeyn. Waa la is-afgartay, si hufanna waa loo wada hadlay, in kastoo waxa laga wada hadlayaa aanay hufneyn!

**B: Hal ku xamey!**

Taariikhda inaga soo gaadhey sida laga dheehan karo, Wiilwaal wuxuu ahaa keligi-taliye naxariis daran oo dadkii uu u talinaayey fudayd iyo cayaayir ku layn jirey. Sidaas darteed, wuxuu noqday nin aad looga cabsado. Ha yeeshee, sidaas oo uu ahaa, waxaa haddana Bartire ka soo dhex-baxay rag isku taagey oo uu sina uga il-heli waayey, gadaalkiina iyagu 'hah' iyo 'huh' kaga yeersiiyey!

Raggaas ayaa waxaa ka mid ahaa nin la oran jirey Cigaal-Ileey oo, af iyo addinba, Garaadka in badan ugu babac-dhigay. Sidiisa ayuu gabyaa ahaa. Oo sidiisa ayuu dagaalyahan ahaa. Oo sidiisa ayuu dadka uga digtoonaan jirey, goor walbana isaga ilaalin jirey.

Xigaalo dhow ayay labadu ahaayeen, ismase indho-buuxin jirin. Waxa uu Cigaal weligiisba ka hawoon jirey sida ragga kale inuu Garaadka uga baqo, ugana dambeeyo. Wuxuu ahaa nin la loollama, waxbana aan u ogaan jirin. Sidaas awgeed, in badan ayuu Garaadku isku deyey inuu dabinno u maleego, marnabase waa ugu soo dhici waayey.

Ma yarayn inta jeer oo uu u soo diray dhallinyaro goor habeen ah gaadmo ku soo disha, hase ahaatee, waxay Wiilwaal ku soo noqon jireen iyagii oo uu Cigaal qaarna laayey, qaar kalena uu dhaawacay!

Haddaba, Wiilwaal oo garan la' tabtii uu Cigaal kaga saayid-caleyn lahaa ayaa goor habeen-bar ah waxa ay sheeko dhex-martay dumarkii u dhaxey middood. Goor dambe oo ay kala seexan lahaayeen ayuu ra-

gannimo xad-dhaaf ah u sheegtay. Wuxuu ugu faanay geyiga ballaarka badan ee ay ku dhaqan yihiin inuu isagu rag oo idil ugu xirrib badan yahay oo ugu xeel dheer yahay, uguna geesisan yahay oo nin u soo bareeri karaaba aanu ku noolayn! Markaas bay ku tiri: 'Garaadow, arrintu ma aha sida ay adiga kula tahay. Dunida rag kalaa kula jooga!'

Waxay ahayd jawaab uu aad uga argaggaxay, Maxaa yeelay ma ahayn mid uu marnaba filaayey! Yaab iyo cabsi isku dhafan ayaa Alle u keenay. Waa kushaday oo dhab u kululaaday. Meel uu jireyba, shaki baa, si degdeg ah, maankiisa ugu soo ururay.

Markaas buu weylaalistii uu ku fadhiyey inta kor uga boodey qoftii dumar ahayd 'haw' ku soo yiri oo, sidii libaax toog lala helay, dusha kaga dhacay! Isaga oo si laxaw leh kolba dhan ugu seeraarinaya ayuu ku yiri: 'Sheeg naa yaa, ninka aad adigu og tahay ee cid kula ogi aanay geyiga joogin, anigana ii beer-dhigi kara. Ogowna, halhaleel haddii aad iigu sheegi weydo, kurkaagu kuma oolli doono oogadaada inteeda kale?!'

Dabadeedna, iyadii oo isku deyeysa farahiisa xoogga badan in ay luquntеeda ka fujiso ayay tiri: 'Garaadow, ninka aan sheegayaa waa midka igu soo dhiirradey oo, isaga oo og in aan anigu kuu dhaxo, habeennada aad iga maqan tahay igu soo dheelmada. Waa ninka waaga ii beriiya, isaga oo iga raba inaan dharka isaga furo oo, sidaada oo kale, uu gogoshaada dusheeda iigu naagaysto!'

Markaas buu sidii hore si ka daran u carooday. Umalkii ku soo kordhay ayuu qarsan kari waayey; markaas buu qawlallada abuur ka keenay! Wixii ay dhegihiisu maqleen ayuu rumaysan waayey. Kolkaas buu inta haweeneydii sii daayey, hadalkiina u qaboojiyey wuxuu ku yiri: 'Sharac'Allee, ninka sidaas igula kacay magaciisa ii sheeg, iiguna dhaqso?' Waxay tiri: 'Anigu haatan cidnaba magac-dhebi maayo, ha yeeshee waan kuu tilmaami oo si aad ku garato ayaan kuugu sheegi'. Wuxuu yiri: 'Waa tahaye, bal ii tilmaan'. Waxay tiri: 'Waa ninka marka saaddanbe geedka shirka la isugu yimaado lulmoon doona!'

Tilmaanta caynkaas ah Garaadkii kuma uu qancin, mana garan dulucdii ay afadiisu ka lahayd. Markaas buu weyddiistey inay arrinta u balballariso; taas oo ay kaga jawaabtey: 'Habeen dambe ayuu ninkaasu ii imaan doonaa. Aniguna intaan sheeko ku asqaysiiyo ayaan daahinayaa. Gelin hore iyo gelin dambeba intaan haas Garaadkii aawiyo ayaan soojeed ku gaarsiinayaa barqadii iyo xilliga uu raggu geedka shirka ku soo ururi doono. Ninkaasi geedka la fadhiyo ayuu ku lulmoon doonaa oo kolba madaxa ayaa hoos uga dhici doona, adiguna sidaas baad ku garan kari doontaa!'



Habeenkaas gelinkiisii dambe, Garaad Wiilwaal ma uu ledin. Dhinac, wuxuu ka seexan kari waayey ninka sidaas u dhiirran oo carro Bartire kula dhaqan, isaguna aanu weli garan karin. Dhinaca kalena, wuxuu ka fekeraayey garashada dheer ee afadiisa iyo xujada ay hor-dhigtay ee laga rabo inuu isagu, berri, furfuro!

Isaga oo labadaas arrimood jiifkii la qaban la' ayuu waagii u beryey. Kolkaas buu odayadii Bartire wuxuu ugu dhawaaqay shir berri lagu kulmo oo aan cidina ka maqnaan karin.

Isla dharaartaas gelinkeedii dambe ayay afadiisiina waxay farriin u dirtay Cigaal-Ileey, si uu cawadaas ugu yimaado, iyaduna ay u haasaawiso. Waa sidii uu rabaye, Cigaal oo aad u faraxsan ayaa fiidkii horeba isa soo dhigay. Meeshii ay ku ballamisay intuu sii fariistay ayuu ku sugey, iyaduna markii uu reerku xoolihii maalay ayay u timid.

Waxay ku bilawday sheekooyin hor leh iyo haasaawe ka macaan kii uu awel uga bartay. Rag oo idil inay isaga ugu jeceshahay ayay laabta ugu riddey. Waxay ugu bishaaraysay, si ay yeeshaba, inay aakhirka isaga xilihiisa ku dambayn doonto!. Isna intuu hadalkeedii u beer-raqay ayuu wada rumaystay. Bogga iyo beerkaba wuu ka qaboobey. Eray walba oo ay ku tiriba dhegaha ayuu u raariciyey, markaas buu maanka iyo maskaxdaba ku hubsaday.

Riyadaas quruxda badan ayuu fiidkii hore ilaa aroortii ku jirey. Markii ay qorraxdii bari ka soo iftiintayna, afadii Garaadka ayaa, si wacan, u anbo-bixisay Cigaal oo weli la-jooggeeda sii raba. Iyada oo ilko cadcad iyo cirrid madow badan ugu qoslaysa ayay sagootisey, wax yar ka dibna geedkii shirka ayuu isa sii taagey; isaga oo dhanna ka faraxsan, dhanna ka daallan.

Siday caadadu ahayd, geedka markii lagu soo dhammaaday ayuu Wiil-waal hadalkii ku hormaray. Wuxuu wax ka sheegay arrimo ku saabsan daaqa iyo degaanka tolka iyo dadyowga ay deriska ahaayeen wixii qaan ahaa oo kaga maqnaa amaba iyaga lagu sheeganaayey. Hadalkiisa qayb walba oo ka mid ahba aad buu u dheereeyey oo u faahfaahiyey, si uu shirka u daaliyo. Intii uu dabeebanayey oo dhanna raggii goobta fadhiyey ayuu midmid isha ula raacayey, bal inuu arko nin lulmoonaya oo inta kale ka duwan.

Barqo dambe markay ahayd ayuu indhaha ku joojiyey Cigaal-Ileey oo gamaanyoonaya. Qoorta ayaa u laadlaadda, garkuna laabta ayuu ku qotomaa. Marba hoos ayay luquntu uga dhacaysaa, haddana intuu is-garto ayuu soo ceshanayaa. Indhaha ayuu kolba isku qabanayaa, haddana, intuu marmarto, ayuu kala furayaa.

Wiilwaal oo tilmaantii afadiisa wax ka arkay ayay markaas wax u iftii-meen. Hase ahaatee, caro ayuu isla madax-maray. Isaga oo aad u um-alsan oo warankiisii weynaa midigta ku haysta ayuu halhaleel Cigaal isu dul-taagey. Intuu warankii dushiisa ku gilgiley ayuu ku tuuray su'aal aan canaan ka marnayn, isla markaasna sarbeeban. Wuxuu ku yiri: 'Hal ku xamey, Cigaalow!' Cigaalna intuu ujeeddadii gartay ayuu kaga jawaa-bey: 'Ima xamane waa hammiyey, Garaadow!' Markaas buu Garaad-kiina su'aal kale Cigaal ku celiyey, kuna yiri: 'Maxaad, Cigaalow, ku ham-midey?' 'Naaso-dameeraad ma horaaddaa, mase waa dambeeddo?!' Cigaal ayaa dulucdii hammigiisa sidaas ku laqbeeyey.

Dhammaan intii geedka joogtey ayaa la amankaagtay dabuubihii labada nin dhex-maray iyo sidii degdegga ahayd ee uu Cigaal isku xujo-furay. Waxaa la garan waayey naaso-dameeraad horaaddo ama dambeeddo mid lagu tilmaamo! Markaas ayuu Garaadkii qudhiisuna inta iska aamu-say wuxuu halkiisii ka sii watay wararkii uu shirka u jeedinaayey; isaga oo weli raggii goobta fadhiyey isha ku wada haya. Wuxuu jeedaalinayaa, Cigaal mooyee, cid kale oo meesha ku lulmoota, dabadeedna uu ruuxa weysiiyo!

Taasise ma dhicin oo ninna dabinkii u yiil uguma soo dhicin. Maxaa yee-lay, wuxuu is`adkeeyoba, Cigaal baa mar kale si ba'an u hurdoodey oo



luquntu laadlaadiyey! Markaas ayuu Wiilwaalna hadalkii uu wadey inta hakiyey isagii kula boodey oo inta warankii dushiisa ku gilgiley ku yiri: "Hal ku xamey, Cigaalow!". Cigaalna sidiisii intuu ku jawaabey ayuu yiri: "Ima xamane waa hammiyey, Garaadow!". "War bal sheeg, shirkana maqashii wixii aad ku hammidey? Haddii kale...".

Intii aanu Garaadkii weedhiiba dhammays-tirin ayuu Cigaalna ka hor-geeyey su'aal uu ku sheegay inay tahay wixii uu ku hammiyaayey, taas oo ahayd: "Addimmo goroyo ma jeenyaa, mase waa lugo?!"

Dabadeedna, Garaadkii kolay ku tahay, raggii oo idil ayaa, sidii markii hore, yaab la kala jeestey. Waxay la ashqaraareen sidii degdegga ahayd ee uu mar labaad Cigaal isku xujo-furay iyo, weliba, dhumucda su'aashii uu iyaga soo dhex-dhigay.

Runtii, su'aal meesha ku jirta ayay ahayd, ha yeeshee ma ahayn tu' weligeed maankooda ku soo dhacday. Waxay ahayd intii cabbaar ah su'aal ay baadiggoobka jawaabteeda ku raageen, nin walibana wuxuu isku deyey kii garabkiisa fadhiyey inuu ka toydo bal addimmo goroyo waxa lagu sheegi karo!

Waa galabgaab ay xoolihiina soo-hoyaad yihiin. Godkii galbeed ee ay gelijirtey ayay qorraxdii ku sii siqaysaa, lo'dii oo insaarax ahina wax-ay tiigsaneysaa goleyaashii la fariisin jirey iyo halkii ay weylaheeda ku ogeyd. Ha yeeshee, Garaad Wiilwaal weli waa taagan yahay oo, isaga oo hubkiisii u dhan yahay, ayuu dabeebanayaa. Guurtidii Bartire iyo rag-gii u dagaallami jirey ayuu la hadlayaa, isaga oo hadalkana, si ulakac ah, ugu dheeraynaya.

Ninkii oday ahaa iska daa warkiisee, kii dhallinyaro ahaa ayaa daal u dhimanaya oo jeclaan lahaa, mar uun, inuu Garaadku shirka soo ge-baggabeeyo. Iyagu waa moog yihiin, isaguse wuxuu weli jeedaalinayaa, Cigaal mooyee, bal cid kale oo meesha ku lulmoota, dabadeedna uu ruuxa weysiiyo!

Waa laga wada yaabban yahay, ragguna waxay si hoose isu weyddi-inayaan: "War hadal la isyiraahdaaba ma harine, muxuu Garaadku mee-

sha inoogu hayaa? Oo, tolow, miyuu geedka caawa nagu hoynayaa? Oo sidaan ma ahaan jirine, maxaa maanta ku soo kordhay?" Dhabtii, waxay ahaayeen su'aalo ay dhexdooda iska weyddiin karayeen, isagase aan cidina kula dhici karin!

Wuxuu sidaas u dabeebtaba, mar saddexaad ayuu indhaha ku joojiyey Cigaal oo inta madaxii kor u hayn waayey kolba laabta ka soo ceshanaya. Wuxuu arkay oo misana hubsaday kii oo aad u gamaanyoonaya; iyada oo dhammaan raggii kalena ay qun u fadhiyaan oo, daal foolkooda ka muuqda ha joogtee, aan mid lulmoonayaa ku jirin!

Markaas buu dhab u carooday. Umal daraaddiis ayuu dhulkii cagaha ku hayn kari waayey. Ilkaha ayuu isku lisayaa. Wuxuu u hamuuman yahay inuu helo ninka gurigiisa iyo afadiisa ku soo dhiirradey. 'Wax baa kuu bidhaamay' intuu isyiri ayuu mar kale booddo ku dul-joogsadey Cigaal iyo halkii uu shirka ka fadhiyey.

Uma uu kaadine, isaga oo warankii dushiisa ku gilgilaya ayuu weyddiiyey erayadii uu hadda ka hor labada jeer weyddiin jirey ee ahaa: "Hal ku xamey, Cigaalow!". Cigaalna tabtii uu u jawaabi jirey intuu u jawaabey ayuu yiri: "Ima xamane waa hammiyey!". Wiilwaal oo ay la tahay inuu Cigaal mooggan dabinkii ugu soo dhacay ayaa, dabadeed, ku guulguuley: "War bal sheeg, shirkana maqashii waxa aad ku hammidey?...haddii kale, galabta hooyadaa way kaa gablami, dhashaadu way agoontoobi, ooridaaduna asay baa qaadi!". Markaas ayuu Cigaalna, isaga oo deggan, wuxuu ku jawaabey: "Waxaan ku hammiyey: naaso-hablood ma jiir baa, mase waa caddiin!".

Mooggaanna wixii uu ku hammiyey ayaa sidii tabtii hore loola wada yaabay. Raggii shirka fadhiyey ayaa haddna cabbaar ku hugmey su'aashii uu soo hor-dhigay. Nin waliba wixii ay la ahayd ayuu goobtii ka yiri. Ha yeeshee, ugu dambaystii, way isku raaci kari waayeen naasaha haweenku baruur iyo jiir midka lagu sheegi karo.

Qorraxdii ayaa u janjeersatay xagga galbeedka. Waxay ku sii socotaa godkii markii ay gasho ay habeenka noqon jirtey. Markaas buu Wiilwaalna shirkii soo gebaggabeeyey; ka dib markii uu heli kari waayey



marmarsiinyo uu Cigaal-Ileey ku xujeeyo, kuna dilo. Kolkaas baa cidihii loo kala carraabay; iyada oo jawaabaha su'aalihii Cigaal uu nin waliba maanka ku hayo, kuna hawllan yahay.

Sidii ragga kale ayuu Wiilwaalna ku dheelmaday reerihiisii, gaar ahaan ooryihii uu qabey tii ay sheekadu u socotey. Fiid dambe mar ay tahay oo xoolihii ay xeryaha ku xasileen, carruurtiina ay kala seexatay ayay isaga iyo haweeneydii isku keliyeysteen. Kolkaas buu uga warramay shirkii Bartire iyo sidii ay wax uga dhaceen. Wuxuu ku yiri: "Raggii shirka joogey nin keliya ayaa saddex jeer iila ekaaday wax lulmoonaya oo hurdo hayso. Ha yeeshee, kolkii aan weyddiiyey sababta uu saddexda jeerba la lulmooday ayuu ku andacoodey wixii uu la foorarey in aanay lulmo ahayne, uu ku hammiyaayey arrimo wareeriyey oo uu jawaab u waayey. Saddexdii jeerba wuxuu soo bandhigay su'aalo lala yaabay oo jawaabtooda shirkii oo idili uu garan waayey, isagiina loogu garaabay. Sidaas darteed, aniguna waan iska daayey kolkii aan u waayey marmarsiinyo aan ku xujeeyo".

Intaas markuu afadii u sheegay ayuu ka durraantay inay xujada ka deyso, una sheegto magaca ninka gurigiisa u soo dabo-maray ee iyada soo damaaciyey. Markaas bay ku tiri: "Waxba magac kuu sheegi maayee, waxaan kuugu yeelayaa astaan uu ragga kale kaga duwnaan doono, adiguna aadan ka habaabi doonin". "Oo maxay tahay?" ayuu yiri. Waxay tiri: "Habeen dambe markuu ii yimaado ayaan go'iisa sare tafta ka goynayaa. Adiguna markuu geedka shirka soo fariisto waxaad isu fiirisaa go'iisa iyo go'yaasha ragga kale. Ninka aad adigu baafinaysaa waa midka uu go'iisu taf-go'naan doono!" "Hawraarsan iyo guddoon" ayuu yiri, sidaas ayayna habeenkaas ku kala seexdeen.

Maalintii lagu ballamay ayay odayadii iyo garmadowdii tolku waxay u qulquleen geedkii ay ku shiri jireen. Wuxuu ahaa kulan uu Garaadku ku dhawaaqay, sidaas darteedna waxa uu nin waliba ku qasbanaa inuu ka soo qayb-galo.

Sidii uu tashigu ahaana, gelinkii hore ee xalay waxaa Cigaal haasaawinaysey haweeneydii Garaadka ee uu qalbigu u ruxanaayey. Waxay kolba rajo gelisoba, caweysin dambe markii ay noqotay ayuu ka dheelma-

day, isaga oo faraxsan oo dhoollaha ka qoslaaya. Hase faraxsanaadee, waxaa jirey arrin uu moogaa. Wuxuusan ogeyn go'a uu huwan yahay inuu taf-go'an yahay oo, isaga oo haasawaheeda ku marqaansan, ay afada Garaadku qayb dhan ka goysey. Mandiil ay hoosta soo gashatay oo af badnayd ayay 'kaf' kaga siisay!

Had iyo jeer, Cigaal-lleey wuxuu ka mid ahaa geedka lagu shiro ragga ku soo hormara, Wiilwaalse wuxuu soo muuqan jirey iyada oo madasha lagu soo wada dhammaaday oo weliba la raagsadey. Maalintaasna geedkii oo rag aan toban gaarini uu fadhiyo ayuu Cigaal soo gaarey. Wuu yare daallanaa, sidaas darteed go'iisii ayuu doonyooday. In yar ka dibna, wuxuu shax la dhigtay oday ay shax-wadaag ahaayeen oo isna sidiisa goor hore soo shiray.

Nin-nin iyo laba-laba sidii la isaga dabo-imanaayey ayay madashii si degdeg ah ku soo buuxsantey. Markaas bay Cigaal iyo ninkii ay shaxayeeni ay baashaalkii joojiyeen. Raggii kale oo mar kaftamaya, marna iswaraysanaya ayay ku biireen. Kaftanka iyo iswaraysigana waxay ku sugi jireen Wiilwaal oo, in kastoo aan cidina ka murmi karin, ay u badnayd goor dambe oo uu raggu jactadey inuu geedka yimaado.

Cigaal oo si macaansi leh ku dhegeysanaya tix uu gabyaa goobta fadhiyey ragga ku maaweelinaayey ayaa si lama-filaan ah gondihiisa u eegay. Suu wuxuu arkay go'iisii uu doonyaysnaa qaybtiisa hoose oo cad idili uu ka maqan yahay! Markaas buu yaab u go'ay. Wuxuu isweyddiiyey: "Tolow, go'u waaba cusbaaye, yaa tafta gooyey?"

Dareen baa galay. Wuu walaacay. Weli wuxuu xusuusan yahay shirkii hore iyo siduu u sigtay. Wuxuu u maleeyey tanina inay tahay shirqool loo soo maleegey oo la rabo in dilkiisa marmarsiinyo loogu helo. Markaas buu, haddiiba, si degdeg ah maanka iyo maskaxdaba uga shaqaysiiyey. Raggii geedka fadhiyey oo dhan ayuu, sidii isaga oo la faqaya, midba mar soo ag-fariistay. Go'ii uu nin waliba huwanaa ayuu taftiisa cad ka gooyey, si go'yaasha la qabo oo idili ay iskummid u noqdaan; kiisa keliyihina aanu u taf-go'naan!



Cigaal oo sidii uu rabey ay hawshaasi ugu ebyoontey ayaa milicsaday Wiilwaal oo madashii soo gaarey, kuna raran dhammaan wixii qalab dagaal ahaa oo xilliyadaas degaankooda laga yiqiin. Halkii geedka ugu mudnayd, uguna hooska badnayd ayuu salka dhigay. Markiibana wuxuu bilaabay inuu jeediyo hadal iska hadoof ah oo uu ku qarinaayey dantii dhabta ahayd ee uu shirkaba ka lahaa.

Si kedis ah intuu hadalkii u hakiyey ayuu seeftiisii afka badnayd galka kala soo baxay. Tii oo gacantiisa midig ka 'walac' leh ayuu la dul-tegey Cigaal oo, mindhaa, isaguna u toog-hayey. Markaas buu ku yiri: "Waryaa Cigaalow, maxaa tafta go'aaga gooyey?" Kiina isaga oo aan jawaab celinnin ayuu si tartiib ah waxa uu u fiiriyey qaybta hoose ee go'iisa. Wuxuu iska dhigayaa nin baraad la' oo waxa uu Garaadku sheegaayo aan, markaas ka hor, warba u haynin. Haddana raggii shirka fadhiyey intuu isha wada mariyey ayuu isagii kor u eegay, uguna jawaabey: "Garaadow, waa runtaa oo go'ayga cad waa ka maqan yahay, maxaadse aniga igu geleysaa oo igu goonni ah, haddiiba inta badan ragga meesha fadhiya ay go'yaashoodu wada taf-go'an yihiin?!"

Mar qura ayuu nin waliba go'iisii hoos u dhugtey, mase cad dhan baaba ka maqan! Yaab baa lala kala jeestey. Garaadkiina, tabtooda oo kale, ayuu isna amankaag la madax-wareeray. Waxa uu garan waayey cidda Cigaal u warranta. Waxa uu suurayn waayey, mar walba oo uu dabinno u daadshoba, duulka uga soo diga.

Maalintaasna Cigaal xujo waa loo waayey. Xirribtiisa weyn ayaa bedbaadisey, ha yeeshee Wiilwaal weli ma samrin.

Dabadeedna, goor aan laga filayn, ayuu madashii wuxuu kaga dhawaaqay, Cigaal mooyee, ragga intiisa kale inuu geedka ku kala dareero. Mar kale ayaa lala yaabay sababta sidaas degdegga ah uu Garaadku shirkii ugu soo gebaggabeeyey. Waxaase ka sii darnaa oo nin sheegа raggii laga waayey sababta uu Cigaal keliya ula haray. In kastoo aan cidina la ogeyn, haddana waxaa Wiilwaal ka go'nayd, inta aan qorraxdu dhicin, inuu Cigaal dhegta dhiigga u daro, sidaasna uu ku eedsiiyo dhiirridii uu afadiisa ku haweystey!

Cabbaar ka dib, kolkii uu nin waliba goobtii ka galbaday ayaa geedkii iyo agagaarkiisii waxaa isugu soo haray Wiilwaal, Cigaal iyo labadoodii faras oo meel aan ka fogeyn ugu shakaalnaa. Dabadeedna Wiilwaal oo raba inuu asaddihiyo, kana dhaadhiciyo sabab aan ahayn tii uu ula haray ayaa Cigaal ku yiri: "Indhoweyd si gaar ah uma aynu kulmin, sidaas darteed waxaan gartay inaynu galabta isku keliyeysanno. Waxaan rabaa, ilaa qorrax-dhaca, in aynu iska sheekaysanno; innaga oo bankaan Jigjiga manjo-marayn iyo taxtaxaash ugu dhex-saqaafayna".

In kastoo aanu ka dhawaajin, haddana weedhaas iyada ah Cigaal uma uu riyaaqin. Wuu dareensaday, wuxuuse ku goostay inaanu taldiisa diidin, isla mrkaasna uu Garaadka dhab isaga ilaaliyo. Sidaas darteed buu 'hawraarsan' kaga jawaabey, isaga oo, weliba, u ilko-caddaynaya!

Waa kuwaas, haddaba, labadii oo bartamaha banka dhex-saqaafaya; iyaga oo labadoodii baxdooy ku jooga. Mid waliba wuxuu ku hubaysan yahay qalabkii lagu dagaallami jirey oo u dhammays-tiran: laba waran, gaashaan, abley iyo seef u galaysan oo labadoodaba dhinaca midigta uga laadlaadda. Danta Garaadku waxay ahayd inuu, si gaadmo ah, Cigaal ku dilo. Wuxuu ku dedaalayaa inuu haad ka helo oo markuu isdhigto uu labada waran isu dhaafiyo.

Waa kuwaas isagarb-wada labadoodii faras oo si qabow ula kadlaynaya. Wiilwaal ayaa sheekaynaya oo gacnaha taagtaagaya. Hadba wuxuu iska keenayaa qosol aan bushimaha dhaafsiisnayn, laabtiisana aan ka soo go'in!

Cigaalna, isaga oo dhab uga digtoon ayuu ka war-gurayaa. Ilqooreedda ayuu ka eegayaa. Wuxuu indhaha ku hayaa dhaqdhaqaaqa labadiisa gacnood, maxaa yeelay wuxuu og yahay, ilmilicsina Allaha ka dhigee, haddii uu demmanaado in Wiilwaal halhaleel uu kurka kaga jari karo ama si kedis ah uu caloosha kaga soo ridi karo. Sidaas darteed, kol walba gacnaha Cigaal iyo hubkiisu waa isa saaran yihiin. Wuxuu u tooghayaa gacanqaad kasta oo xagga Garaadka uga imaan kara.

Haddii ay cabbaar sidaas ku wada socdeen, wax ilbaad ahna uu Cigaal ka waayey ayuu Wiilwaal ku tashaday inuu xeesha beddelo. Faraskii



uu ku joogey ayuu ka degey. Markaas ayuu Cigaalna kiisii ka degey. Dabadeedna, iyaga oo labadii neef taxaabanaya, qorraxdiina ay sii galbanayso ayaa waxaa Wiilwaal u muuqday haad meel dhulka iyo daruuraha dhexdooda ah heehaabaysa oo kolba dhinac u dillaamaysa. Mar keliya ayaa waxaa ku soo dhacday inuu haaddaas Cigaal ku jeediyo, markuu kor u dhugtona uu qoorta ka jaro! Kolkaas buu inta socodkii faraska iyo kiisiiba hakiyey Cigaal ku yiri: "Cigaalow, maxay haaddaasi ku dhacaysaa?". Isaguna, illeen waa nin dhab u digtoone, halhaleel ayuu u gartay dulucda su'aashii Wiilwaal. Kolkaas buu, isaga oo aan kor iyo hoos midna eegayn, indhihiisuna ay gacnaha Garaadka iyo hubkiisaba dul-qotomaan waxa uu ugu jawaabey: "Garaadow, hadba keennii eega!"

Wuxuu u jeedey, 'waan ku gartay Garaadow oo labadeenna hadba keennii haaddaas dhugta ayaa dhimanaya oo la dilayaa, sidaas darteed anigu ma damacsani inaan eegee, tashigaagii hore dib ugu noqo!'. Sidaas bay jawaabtiisu daarranayd. Wiilwaalna intuu candhuuf buu dib u liqay ayuu naftiisa u qirtay, xirrib iyo xeel, af iyo addin, sir iyo saaq, sina inuu Cigaal kaga saayid-calayn waayey!

Markaas buu go'aansaday inuu la nabdo. Dabadeedna, wixii hub ahaa ee uu sitey intuu dhulka ku daadiyey ayuu gacan-salaameed u soo taagey, isaga oo ku leh: "Ina-adeerow, haddeer laga bilaabo colaaddaadu iguma jirtee, tayduna ha kaa baxdo. Marka hore, ooryhayga iyo guryahayga ii daa. Mugga xigana, Garaadka aan ahay igu maamuus oo shirka Bartire ha igula akeekamin, maalintii geedka lagu dhan yahayna ha isku kay taagin!".

Kolkaas bay Cigaal neef kululi ka soo kuddey. In kastoo dhiilladii uu qabey ay laabtiisa weli wax kaga harsan yihiin, haddana hadalkii Garaadka wuu u bogey. Wuxuu ugu jawaabey: "Waa tahay Garaad! Talada aad soo jeedisey ayay ku dhan tahay, loona noqon maayo...anna waxaan ka leeyahay: 'hawraarsan iyo guddoon!'.


Galabtaasna, iyaga oo ninna aanu midka kale ka irdhaysnayn, iskana ilaalineyn ayay labadoodii reer u kala carraabeen.

Cisho dambe oo uu gaboobey ayuu Wiilwaal u sheekeeyey odayo ay xigto ahaayeen. Wuxuu ku dheeraaday, hoog iyo ba', wixii uu rag ku falay. Wuxuu xijiyey wixii isagana ay rag kale ku markadeen iyo tabihii ay uga saayid-caleeyeen. Si gaar ah ayuu markaas wuxuu u xusuustay oo u xusay arrintii isaga iyo Cigaal-Ileey dhex-martay ee ay markii dambe ku heshiiyeen. Kolkaas buu sheekadii wuxuu ku soo idleeyey: "Rag hooyadiisna u hayey oo 'walaalow' wax uu ku dhaamo waan waayey!". Taas oo noqotay halqabsi iyo hawraar ay marar badan Soomaalidu ku maahmaahdo, kol walba oo la isla helo awood waliba inay soohdin leedahay.

* * *



# 2



# MATAAN-CIIDEED

**"Salaadooy! ma aniga iyo nin Ciid joogaa la kala qariyaa?!"**

*(Mataan-Ciideed)*

Geyigii la joogoba, nin baa uunka 'mudh' ka soo yiraahda. Xilligii lagu sugan yahayba, wiil baa la soo tufaa oo arlada ka soo shaac-baxa. Nin baa hannaanka nolosha ee dadka badani ku wada dhaqmo dhinac uga leexda.

Wax ugu wacanba, nin baa falal laga cawdu-billaysto ku kaca oo waxa uu samaynaayo uu duulba duul u weriyaa. Awoodda muruqiisa iyo gardarro garbo og ayaa xigmad oo idil garaadkiisa ka xala. Garaadka kolkii uu waayona, samaanta iyo xumaanta ayaa sooran u noqda!

Isaga oo indho leh ayuu aragga beelaa; kolkaas buu uunku ula ekaadaa yaryarood aan maamuskiisa mudnayn oo ilmilicsi cagta ku marin karo. Isaga oo dhego leh ayuu maqalku ka baalidaa, kolkaas bay waanada waxgaradka iyo tusaalaha waayeelkuba sidii hadaaq carruureed ku soo gaaraan.

Maroodi aan la hormari karin oo cadhoole ah ayuu isu qaataa, rag intiisa kaleetona waxay ugu muuqdaan cayayaan marka uu jeeniga saaraayo aanu dareemin, iyaguse dareema!

Hortiisa iyo anbada uu ku socdo 'tiigso' mooyaane, wuxuu falay iyo abuurtii uu dandarreeyey midna dib uma eego. Lamaba noqoto inay yihiin wax mudan in daraaddood uu hashlihiisu la hakado. Su'aasha ah, 'ayaa sidaas u fasaxay?' haddii aad is-haybinaysona, waxaan oran karaynaa: 'aqoon-xumo iyo garaad-darro, kibir iyo ka-badbadinta ku-adeegsiga awoodda, aadkeedaba, iska kooban ee aadanaha'.

## 1. Wiil la soo tuuray!

Arartaasu waxay hordhac u tahay sheekadan soo socota oo ah tu' in badan afka laga marinaayey, asii aan, ogaantay, hadda ka hor xaashi



lagu qorin. Waa sheeko Soomaaliyeed oo dadkeedii iyo kuwii goobjoogga u ahaa toonihi aysan maanta, adduun kale mooyee, adduunkan cidi kaga dhaqnayn. Waa sheeko waa fog dhacday, asii hari weydey oo, sidii la isugu werinaayey, nasiibkayagu na soo gaarsiiyey.

Qiyaasta waa qaybtii hore ee qarnigii 19d. Geyiga aynu joognaa waa dhulka Ciid loo yaqaan oo carrada cas ee furfurka ah ku tilmaaman. Ninkii aan aqoon baa loola dan leeyahaye, waa dhulka Garlooggube ugu magaca dheer yahay ee ay maanta Qabridaharre magaalada u tahay.

Dalku waa nabad oo gaalo weli cagta ma soo dhigin. Saancadde iyo saanmadoobe toonihi weli kuma dhex-saqaafin. Waa la barwaaqaysan yahay oo roobku xilliyada la sugo ma maqnaado. Indhoweyd abaaro ma dhicin oo dareenka la qabaa wuxuu ku kooban yahay subaggii oo qunbeyaasha ka batay iyo xoolihii oo tiro-dhaafay, wax celiyana la waayey!

Geela ayaa halkii loo dhaqaaqoba sariiran. Lo'da ayaa balliyada agtooda ka banaaxiyi. Weganno fardo ah oo barbaar timaha deebeeyey ku joogto ayaa la bedri. Seenyo-dhuux iyo Dhiin-waal, iyaga carruur iyo dumar mooyee, nin rag ahi dheef kama jeeqaaqo oo waa ka garannuug!

Dhiig iyo dhaqan, xilo iyo xoolo wixii dadka kala gala guurti abwaanno ah oo talo-yaqaan miiran ah ayaa loo geeyaa. 'Ilaahow aqoonna ha nagu cadaabin, eexona ha nooga tegin' intay ku ducaystaan ayay xeer la wada yaqaan oo la wada okobban yahay garsoorkooda ku saleeyaan. Shareecada Islaamka iyo xeerku kolkii ay isdiidaanna, shareecada ayay ula bayraan. Guddoonka ugu dambeeya wadaadka Tuxfaha iyo Minhaajka xanbaarsan ayaan laga dabo-hadlin.

Go'aanka geedka shir, nin diidaa canbaarow, habaar iyo in la isugu tufaana u dheer iyo, weliba, isaga oo 'gardiid' magac ugu yeero!

Habkaas nololeed ee geyiga Ciideed looga dhaqnaa waxaa calwinaayey barbaar kol qura la soo tufay oo magaciisa lagu wada hadaaqay; barbaar far dheeraatay dadkii Eebbe ku ahaaday.

Nin kibray oo tadhahay oo wixii uu doonoba ku kacay ayuu ahaa. Safarkii uu la kulmoba waa dhacay. Laba eray ninkii ay dhex-martay qaar buu saarsaaray. Madax iyo manjo, uunka wixii ka hor-yimidna, waxyeello ayuu u geystey.

Xumaan mooyee, nin aan dubaaqiisa samo ku soo hoyan ayuu ku caanbaxay. Waalid buusan maqlin, guurti baan wax u sheegi karin, waano culimmo ayuu dhegaha ka furaystay. Eed nin ay lahaayeen iyo nin aysan lahaynba, waa dubaaqeeyey, shisheeye iyo sokeeye waxa u dhexeeyana ma uu aqoon. Raafley iyo qoobley, wixii xoolo bananka daaqaya inuu leeyahay ayuu isu qaatay; kolkaas buu, sebenba, qolo ka soo meersaday nool wixii ay dhaqeen.

Barbaar u babac-dhiga ayaa intii muddo ah la waayey, markaas buu maskaxda gashaday Ilaaha weyni inuu isaga geyiga Ciideed ku xuddumay!

Inuu sidaas yeelo, kuna bedbaado, miyaad, i weyddiin? Daw baad su'aasha u leedahay, anigana jawaab baa igu garawdaye:

a) Horta xoog iyo tiirrinnimo qabso;
b) Marka xiga geesinnimo macangagnimo weheliso ku labayso;
c) Marka saddexaadna waa qoyska uu ka dhashay oo qaran ahaa, intii qoys itaal yeelan karona lahaaye, iyadana ku darso.

Wuxuu isku hallaynaayey boqollaal gaashaan-qaad oo ay awoowe wadaageen, gar iyo gardarrona ku garab-taagnaa oo aan dhiiggiisa ciidda u oggolayn! Gardarro garbo og oo uu sidii ugu ba'nayd ugu adeegtay ayaa ku kaalmaysay inuu muddo madaxa taago oo qaydar qodaxdiis uu dadkii agihiisa ku noolaa ku ahaado!

Tilmaamahaas aan cidina jeclayn, tolow, ninkii lahaa kumuu ahaa? Waa Xasan Axmed Xirsi oo Mataan-Ciideed ay Soomaalidu ku garan og tahay. Ninku waa ninkaas magaca Ciideed kiisii ku darsaday ee ku laray. Ma mooddaa, isaga mooyee, inaan labood kale Ciid lagu dhalin?!



Haddaba, waa uun la sheegaaye, Mataan-Ciideed, ma doqon buu ahaa? Ma diric buu ahaa? Ma geesi buu ahaa? Ma macangag buu ahaa? Ma waxgarad buu ahaa? Ma liite xun buu ahaa? Sheekadiisa ayuun baa wax badan inooga sheegi doontee, bal ila dhadhanso.

Eebbe ha u naxariistee, abwaanka af-soomaaliga, Sheekh Maxamad Xaaji Xuseen 'Sheeko-xariir' (1893-1991) ayaa noo sheekeeyey oo yiri: Adeerradii dhawrka ahaa ee Mataan-Ciideed waxaa ku jirey waxyaqaan xirrib badnaa oo aragti-dheeriyi harsatay, lana oran jirey Axmed Muxumad Xirsi. Saadaal aan habaabin nin looga bartay ayuu ahaa.

Wuxuu ku jirey raggii guurtida ahaa ee Mataan waanadiisa ku oomay. Wuxuu ku jirey raggii isku hawlay Mataan iyo uumiyaha inay u kala miciinaan oo kala maadiyaan, asii waxba ka gaari waayey. Wuxuu ku jirey garcaddaayadii gadaalkii Mataan ka quustay oo 'waano abuur baa ka horraysey' inta ugu maahmaahay u saadaaliyey, ha dhowaato, hase dheeraatee, goor ay noqotoba inuu gardarradiisa eedi doono.

Arrin foolxun kolkuu faraha la galo oo la isku uugaamo ayaa, illeen jifo ayuu u ahaaye, Axmed Muxumad loo iman oo lagu oran: 'Axmedow, maantana Mataan waxaas iyo waxaas ayuu ku kacay.' Axmed Muxumad, isaga oo aan islurin buu oran: 'Xasan-Mataan wixii Eebbe ku abuuray weli ma dhicin'!

Weedhaas lama garan jirine, waa la garan waayi jirey. Axmed Muxumad baa dharaar kale loo iman oo inta loo warramo lagu oran: 'Nin baa maanta geedkii shirka iska taagey, dabadeedna Xasan-Mataan baa inta labadii waran isugu qabtay xuddunta kaga dhuftay oo duud-dheerta kala jebiyey'. Axmed Muxumad wuxuu oran: 'Xasan-Mataan wixii Eebbe ku abuuray weli ma dhicin!

Dharaar kale ayaa Axmed Muxumad loo iman, kolkaas baa lagu oran: 'Shirkii buu maanta Xasan-Mataan baa tegey, dabadeedna jeedal buu inta qaatay ninkii ragga ugu mudnaa ama shiikha ahaa, siduu ugu garaacayey, dubkii kaga murxiyey oo ciidda jiifiyey'! Axmed Muxumad wuxuu ku jawaabi: 'Xasan-Mataan wixii Eebbe ku abuuray weli ma dhicin'!

Maalin afaraad ayaa haddana loo iman, laguna oran: 'Axmedow, aqal buu xalay gubey, dabadeedna markii la maagay in loo soo gurmado oo dabkii la seexiyo ayuu gabooye fallaaro mariidaysani ka buuxaan dadkii meesha ku soo uruuray ku bilaabay oo rag iyo dumar wixii goobta isa soo taagey midba fallaar baarrimaha u joojiyey.' Axmed Muxumad, isaga oo qabow ayuu ku jawaabaa weedhii uu goor walbaba ku jawaabi jirey oo ahayd: 'Xasan-Mataan wixii Eebbe ku abuuray weli ma dhicin!

Dadka kale ayaaba yaabbane, isaga yaabba taaban maayo! Ma garabdaar buu lahaa oo waxa loo sheegaayo wax ka weyn oo dhici doona ayay duulashiisu waayo hore, dubaaqiisa, ku hubsadeen? Hadda garan mayno, gadaal baynnuse ka garan doonnaa.

## 2. Xagarkii gardarrada!

Mataan-Ciideed; laqankaas la baxay wuxuu, malaha, ku tashaday dad oo idil inuu gumeeyo. Gardarro ayuu hub ka dhigtay. Habeen baas bay talo kaga go'day dadka Eebbe wixii aan isaga dabo-gelin inuu nolosha u dacareeyo.

Qof-qof wuxuu u gardarraystaba, wadar inuu u waxyeelleeyo ayaa la macaanaatay. Waa nin kibir indhaha tiraye, wuu gedaggadeeyey. Maalinba fal laga naxo ayuu ku kacay, dharaaro kooban kolkay ka soo wareegaanna mid ka daran iyo wax aan la eegayn ayuu la soo baxay. Dumarka iyo carruurtu, maatadu waa ka nabad-geli jirtaye, iyagiina waa ka ajoon waayey. Gamuunnadii gardarradiisa ruuxna kama uu bedbaadin. Kol qurana isma uu oran: 'Ba'e, yay adiga kugu soo noqone, duulduulkooda uunka ka aayar'!

Wuxuu ugu darraa diraacdii kululayd kolkii uu kala dhex-galay biyihii iyo dadkii u oommanaa. Muqlo-Hogato ayuu geed ka waabtay; geed xagar ah oo inta waa hore la gurmo'go'aneeyey halkii ay godintu ku dhacdayba ay laani ka baxday. Geedkaas ayuu inta sii hadoodiley harac ka yeelay. Koorihii inta saartay ayuu wixii aan fardihiisa ahayn harsigiisa uga dhaartay oo isna dhinac ka degey!



Waa kob aan biyo ceel u ogog lahayn, balli iyo xareedna warkoodaba daa, saa xilligoodba lama joogee. Ninkii dhulka yiqiini wuxuu yiri: 'Haddii Gunaggado loo dhaamiyo iyo haddii Malaa-Dakharre iyo Qorraxey loo dhaamiyoba, waa saddex-guul.' Macnaheedu wuxuu yahay: Laba habeen dhaan ceelka ka soo maqnaa ayaa habeenka saddexaad Muqlo-Hogato iyo xagarka Xasan-Mataan ku soo beegma. Habeenkaas ayuu dhaankaasi halkaas ku furtaa oo awrta rarka lagaga nasiyaa, ragga wadaana cabbaar ku indho-guduudsadaan. Berri oo kale ayay ku aaddan yihiin maatadii dumar, carruur iyo doonkaba lahayd ee, oonka aawadiis, kolba hirarka dhalanteedka ay laabtu uga hinqanayso!

Rag allow, maxaan u malaynaa kobtaas oomasooraha ah waxa Xasan-Mataan fardihiisa ku xereeyey? Oo waa kii gedaggadeyn jiraye, muxuu tolow, moogganna maaggan yahay? Dadkii baa wax-toyasho isla dhexqaaday. Su'aal aan laga jawaabi karin ayay ahayd, isagii baase wax yar ka dib ficil kaga jawaabi doona.

Show sheydaankii gardarrooyinka u soo kala doori jirey ayaa ku yiri: 'Mataanow, ma adiga oo Mataan ah ayaad fardahaaga xoog-tiri oo diif aan Eebbe badin adigu ku keeni? Xilligan lagu jiro fardo Qorraxey u arooray maxaa ka hari, fardose ma kuu noqon?! Bi'i waaye, dadka kale ka gobsanid oo la mid ma ahide, adiga oo sidii qof midiidin ah fardo u waraabinaya, yaan kaalin ceel lagugu arag!' Mataan baa sheydaankiisii dhegta u raariciyey oo markuu dhammaystay, mindhaa, weyddiiyey: 'Oo maxaan yeelaa?' 'Waxaad yeeshaa xagarka haraca ah dhaamanka wabaxa ah ee soo mara maalinba mid haamaha ka deji oo, geesigii Ciideedow, argeegta ayaa ugu biyo qaboobe, fardahaaga hadba dhoonhoraad ka durduur. Maxaa fardahaaga aroorna u geeyey, adiga oo Mataan-Ciideed ah'!

Ma laballabayne, talo isha laga ridey ayay ula ekaatay. Dhallinyaro tabaraysatay oo isaga ka dambaysa ayuu urursaday. Dhaankii iyo maatadii uu saddex-guulka u ahaa ayuu isgefsiiyey. Awrtii soo martaba waa toydaa. Wuxuu haybiyaa ninka leh iyo cidda loo wado. Nin Alle ninkii uu madax-taag ku maqlay ratigiisii buu arrumay. Haamihii buu ka rogey oo baxdowyadii uu xagarka qol-ku-jiraha kaga dhigay afka u geliyey!

Sow ceelkii ku noqo ma aha? Sow saddex maalmood oo kale maatadii ha oommanaato ma aha? Sow ilmadowdu ha yuusto ma aha? Sow gantaalaha gardarrada ee ay awooddu lalinayso kuwa habaarku, kolkol, kama xanuun badnaadaan? Taas Mataan ma ogeyn, luunka saqiirkana waxaa uga darraa aroorka fardihiisa! Kibir baa xigmaddii kala dhoofay, wuuse eedi doonaa.

## 3. Ganacsi iyo Magan

Dadkii Soomaaliyeed ee qarnigii 19d kuma ay faaneyn gaadiid dheereeya oo ay isugu tagaan. Gaadiid faras iyo rakuub weydaarsan ma ay lahayn, hase ahaatee waxba iskuma seegganayn.

Baabuur iyo dayuurado yaan la haysen oo ha la kala fogaadee, war baa la isu hayey. Toltol kolba xasaradi dhex-gasho ha la ahaadee, xidid iyo qaraabona waa la ahaa. Waa la isu socon jiraye, lama kala seerrayn. Saqiir-gawrac maalintii uusan jirin, waa la isbixin jirey oo la is-ammaan gelin jirey. Fadaqa yeelkiise, xeer iyo dhaqan ayuu dadku lahaa oo wax ku kala qaadan jirey.

Ganacsi aan lacag la aqoon ayaa lagu macaamili jirey oo xeebaha iyo dhulka ka fogi xiriir bay lahaayeen. Ciid iyo geyiga la jahada ah ee aynu hadal-hayno, Saaxil baa magaalo u ahayd; magaaladaas oo hadda Berbera loo yaqaan, badyarada Cadmeedna ku taal.

Doonyo shixnadan oo Hindiya iyo dalalka Carbeed laga soo buuxiyey ayaa ku soo xiran jirey. Maxay sidaan baa? Timir, dhar, irbado lagu tosho iyo badeecooyinka kale ee, waagii la joogoba, raacatadu ay bendarrada uga baahan tahay.

Ganacsatada Reer-Saaxil waxay badeecadaas ku rari jireen awr iyo rag garka haya oo 'kabadhe' loo yiqiin, imaanshahoodana la dhawro. Safrahaas ayaa tegi jirey miyiga xeebaha ka durugsan, si waxa ay sidaan ay ugu soo beddashaan baalka gorayada, malmalka, garceesaanka[7], gaashaammada iyo hadba wixii Reer-Saaxil abdo u leh oo ay dibedda u dhoofsanayaan amaba ay lafahooda u doonayaan.

7. *Garceesaan: geed sida qadowga dhirta kale ku baxa oo la ganacsan jirey. Wax baa lagu midabbayn jirey.*



## 4. Afcad iyo xeerkii maganta

Isdhexmarkaasi ma tabaalo la'ayn. Dadku godobo raagey ayuu kala qabaa. Ciidammo qabaa'ilka u dhexeeya oo ammaanka qofka iyo hantidiisa dhawraa ma jirin. Dawlad uu dhagar-qabuhu ka baqaa iyaduna dalka kama abuurrayne, rag allow yaa u damiin ah ninka Saaxil safraha ka soo kaxaysta oo Ciid ama Bay ama Ximan ama Mudug u soo kicitima? Ruuxa iyo xoolihiisa tolka ayaa difaacoodu saarraa, ninkaasina tolkii ka yimid oo waa kan badeecada baahida loo wada qabo tolalka kale la dhex-gooshayee, rag allow kuma ayaa looga cabsanayaa oo daraaddiis lagu nabad-gelinayaa?

Soomaalidii hore arrintaas iyada ah kama ay il-duufin. Waxay u soo rogeen waxa 'maganta' la yiraahdo oo ka mid ah tiirarka waaweyn ee uu xeerkeennii durey ku taagnaa.

Ninka safarka lihi kolkii uu Saaxil ka soo anbo-baxo wuxuu soo sheegan jirey degaanka uu ku socdo nin magac ku leh. 'Hebel buu safarkaygu ku jeedaa ayuu oran jirey', hebelkaas oo ka mid ah ragga awoodda iyo maamuuska ku leh tolka uu safarku maalintaas ku socdo. Badanaa waa 'hebel' la isku hallayn karo oo aan magantiisa loo dhaafi karin, haddii loo dhaafona la og yahay in la eedi doono.

Hebelkaas oo kale waxay maradu ka dhacdaa, gabadhiisuna ku guur weydaa marka nin soo sheegtay la dilo ama safarkisa la dhaco ama, siday ahaatoba, waxyeello la gaarsiiyo, dabadeedna uu ka gar'allayn waayo oo uu geeri ka xigi waayo. Maganta oo wax la yeelaa waxay ahayd dhaleeco iyo bar madow oo ku oolli jirtey qoyska ama ninka la soo magansaday ee magantiisa magan-gelin waayey.

Su'aashuse waxay tahay: yaa magan noqon jirey? Waxaa noqon jirey safarka, inan-la-yaalka xididka la deggan, martida caawa kuu soo hoyatay ee ardaayadaada jiifta iyo ergada kuu soo sodcaashay oo qardoofooyin hore oo idin kala dhex-galay meel-isla-dhigiddooda kuugu soo cago-dhigatay.

Sheekaduba ha ila dheeraatee, magan iyo xaalkeed intaan u bayro aan iraahdo: Isla xilligaas aynu hadal-hayno ayaa nin la oran jirey Xuseen Xasan Samatar oo lagu naanaysi jirey 'Xuseen-Qoordheer' (Majeeteen, Reer-Khalaf) waxaa si kamma' ah waran kaga fakaday nin la oran jirey Jaamac Dalmar (Dhulbahante, Bah-Ararsame). Ninkaas dambe oo Reer-Nugaaleed ahaa ayaa wuxuu safar la soo aadey Dhudub oo ka mid ah ceelasha Ceelcad la wada yiraahdo; halkaas oo ahayd gadaalkii halkii uu melaggiisu ku galay.

Ninkaas la diley waxay walaalo ahaayeen gabyaagii dagaalyahanka ahaa, ceesha Ximanoodna kol magaciisa lagaga haasaaway. Waa Faarax Xasan Cali (Marreexaan, Reer-Diini) oo, malahayga, dadka suugaanta daneeyaa ay Faarax-Afcad ku garan og yihiin. Jaamac oo gacanta Xuseen-Qoordheer ku baxay wuxuu ka mid ahaa niman Reer-Nugaaleed ah oo ay Afcad xagga hooyo walaalo ka ahaayeen, asii aanay degmo wadaagin, isna aqoon[8]

Inuu Faarax aarsadaa waa qodob isna ka mid ah qodobbadii waaweynaa ee xeerkeennii hore uu oggolaa. Dalka ayaa kala fogaaye, Faarax uma suuraggelin inuu walaalkiis u aaro. Lagaba yaabee walaalihiisa kale ee Nugaal ku dhaqan in uu libtaas u deynaayey.

Si kastaba ha ahaatee, Xuseen-Qoordheer isaga oo aan war u haynin ninkii gacantiisa ku baxay inuu Ximan walaalo ku leeyahay ayuu Ceelcad iyo Mudug ka soo qaxay. Niman aanay Afcad tolnimo iyo bahnimoba ku kala fogeyn ayuu la xididay, inanna ka dhistay. Mindhismo ayuu degmada dhexdeedii ku noqday.

Wuxuu isyiri: 'Allaylehe, Nugaal ka soo durugtay oo ninkii aad qabtey raggii aarkiisa lahaa kuma soo gaari karaane, Ximan iska ool oo reerkaaga cusub ku dhaqo'. Magan baa magac ugu yeeray, guul iyo guuldarrona wuxuu ula sinnaa raggaas uu la xididey ee uu guryahooda guurka ka alkumay.

8. *Afcad hooyadiis (Majeerteen, Bah-Abasguul) ayaa, isaga oo weli socod-barad ah, waxay ka carootay Xasan Cali Shirwac 'Xasan-Dhiillo' oo aabbihiis ahaa. Dabadeedna, intay dhinaca waqooyi u dalowday ayay waxay guursatey nin Dalmar la oran jirey (Dhulbahante, Bah-Ararsame); kaas oo ay u dhashay rag dhawr ah oo ay sidaas walaalo-hooyo Afcad ku noqdeen.*



Maalintii dambe ayaa waxa uu Xuseen soo joogsadey geed nin tumaal ahi bir ku tumanaayey; godin, waran, amley iyo wixii la mase ah. Afcad oo isagana meeshaas waran loogu deelaynaayo ayaa ku baraarugey saantii Xuseen iyo jaanqaadkiisii. Kolkaas buu inta warankii qaabsaday xaggiisii ula jeestey; isaga oo ay ka go'an tahay dhiiggii walaalkiis inuu dhiig ku daro!

Ha yeeshee, ilmilicsi wax aan dhammayn ayaa wahan ku beermay, dhabna wuu isula hadlay. Wuu farxay oo wuxuu isyiri: 'Allaylehe, ninkii walaalkaa Jaamac Dalmar qabey maanta ayaad haysaa'. Dhanka kalena wuu naxay oo waxaa ceeb la noqotay nin reerkooda magan u ah sida uu u dili karo oo uu uga aarsan karo.

Hadduu dilo dhibaato ka soo gaari mayso, waase magan oo in reeraha lagu dhex-dilo ceeb ka weyni ma jirto. Nin kula siman oo aad isu rag urursateen ayaa lala diriraaye, nin keligiis ah oo adiga iyo guryihiinna loo tirinaayo, welibana mindhismo kugula jooga, sow in loo gacan-qaadaa foolxumo ma aha? 'Ba'e ma ina-adeertaa baad asay u saari?' ayuu Afcad ku hammiyey, isaga oo ay talo ka wansiixsan tahay.

Ugu dambaystii, Faarax waxay arrini kaga idlaatay inuusan Xuseen-Qoordheer dilin. Warankii ayuu inta gacanta midig ka wareejiyey oo bidixda ku qabsaday dhulka qotomiyey. Markaas buu tiriyey tix gole-kafuul ah oo wax badan inaga baraysa Soomaalidii hore sidii ay u dhawri jirtey hiddahaeedii maganta ku saabsanaa. Wuxuu yiri:

*Waa taad jafkii Dhudub dhigteen johoraddaydiiye*
*Anoo jooga baad hooyaday 'jabay!' ka siiseene*
*Nin walaalki haad loo jarjaray looma jiifsado e*
*Waxaad Jiica Faraggoo[9] u timid hooy wax baa jira e;*
*Jirrid-weynahaygaas haddaan jiriyo ruuxaaga*
*Jeeskayga oo meel fadhiya lama jiteeyeene*
*Geelayga Jaawiyo Idiin Jiid ma bixiyeene*
*Ninna ima jujuubeen haddaan ruuxa kaa jaro e;*

9. *Jiica Faraggoo: Meel magaceed. Malaha waa halkii ay maalintaas labada nini ku kulmeen.*

*Inta kale jarkood waad tihiyo jalanqahoodiiye*
*Waxsaan kaa jeclaa Dhoorrihii jinaha dhuubnaaye*
*Waxaan kaaga joogsadayse waa magan jalleeceede*
*Iga jaho Xuseenow nin soo jiitey baad tahaye!*

## 5. Mataan & magan-dhac

Xeerkaas bay magantu lahayd, lagumana xad-gudbi jirin. Sidaas daraaddeed, safraha Saaxil ka yimaadaa 'hebel baan ku socdaa oo aan magantiis ahay' ayay ku caano-maali jireen oo dhulka ku mari jireen.

Qiyaasta 1880kii goor aan ku wadno ayaa magaaladaas waxaa awr safar ah (kabadhe) ka soo kaxaystay nin la oran jirey Wacays Xirsi (Habar-Awal, Reer Axmed) oo gabyaana ahaa. Dhaqankii safraha iyo maganta waa tii aan kor ku soo faahfaahinnaye, Wacays oo safarkiisa Ciid ula socdey waxaa la gudbooneyd nin uu magaciisa geyiga ku maro inuu soo sheegto. Waxa uu soo sheegtay nin xoog iyo ragba Eebbe ku galladaystay oo u dhashay jifada Reer Ugaas (Ogaadeen, Reer-Cabdille) ee talada Ciideed iyada looga dambeeyey. Si uu uga bedbaado col iyo qawle wixii laga yaabo inay waddada ka helaan ayuu soo sheegtay Xirsi Muxumad oo 'Xirsi-Jabane' ku magac dheeraa, ahaana isaga iyo Mataan-Ciideed nin aanay abtirsiino ku kala fogeyn, in kastoo ay laba lafood kala ahaayeen.

Labaduba waa Ogaadeen oo waa Reer Cabdille oo haddana waa isku Bah-Xawaadle. Markaas buu Mataan yahay Reer Dalal, Xirsina Reer Ugaas yahay. Waa ilmo-adeer xurmo iyo ehelnimo kala mudan, Mataan baase wuxuu ahaa nin aan cidnaba ragannimo la qaybsan karin, gardarrada sokeeyahana malab loogu daadshey!
Safarkii Wacays oo reerihii dhex-maraya ayuu Mataan sheedda ka arkay. Sheydaankii gardarrooyinka u kala doori jirey ayaa malaha halhaleel ula soo joogsadey. Awrtii ayuu milicsaday. Wuu muusooday. Suu waa ku dhaqaaqay. Wuu joojiyey oo haybsaday. Wacays oo aan wax dhiillo ah qabin oo isleh 'aqallada Xirsi-Jabane ayaad berri barqadii ku furi' ayuu waraystay. Isaga oo isku kalsoon ayuu u deexday. Wuxuu ugu warramay: 'Safarkaygu Xirsi-Jabane ayuu ku socdaa oo isaga ayaan magan u ahay'. Waxaa ka dhaadhacsanayd, kol hadduu ninkaas magan u yahay, Mataanna inuu u yahay, wuuna ku hagaagsanaa, haddii xeerarkii jirey la raacaayo.

Hase ahaatee, arrintu nin ay xeerarku qabtaan ma joogin. Qosol jees-jees ka keenay ayuu Mataan kolba dhinac ula jeestey. Keligiis buu isla hadlayaa. Hoos buu u gunuunucayaa. Dhegta ayaa loo raariciyey. Mase wuxuu leeyahay: 'Ciidey, laguma dego haddiiba maanta la qabo nin aan aniga ahayni inuu cid ku magan-gelin karo!'

Markaas buu inta Wacays dhawray ku yiri: 'War yaa beenta kuu sheegay oo ku marin-habaabiyey? Yaa kugu yiri; 'geyiga Ciideed baa nin aan Mataan ahayn laga magansadaa'!"
Wacays baa amankaagay. Wax uu ku jawaabo ayaa laga madoobeeyey! Markaas buu Mataanna, si degdeg ah, awrtii iyo moodkii saarraa afka ugu dhigtay, xoolihiisiina ugu darsaday!

Wacays oo leegleegsanaya ayaa goobtii ka hadaafey. Oo maxaa kaloo u bannaan? Ayaan buuba leeyahay haddii uu gacantii Mataan ka baxsadaye, maxaa uga eg, Xirsi iyo qoyskii uu maganta u ahaa inuu u dalaabo? Sidaas ayuu yeelay.

## 6. Xirsi-Jabane oo ceeboobey!

Dhiillada dabaylo jin baa dawiyee, warkii baa la isxuliyey oo dal dheer oo idil degdeg loogu tebiyey. Waa sidii laga filaayaye, Xirsigii magantiisa laga dhacay ayaa uugaamey. Maalin uu hiil uga baahi weyn yahay inaysan jirin ayuu raggiisii dareensiiyey. Qayladaa willatay. Ceeb daran bay ahayde, Xirsi iyo barbaartiisii waxay go'aansadeen inay iska mayraan, marka horese ay ka ergeeyaan.

Dirirta iyo ergeynta intii lagu hawllanaa, Wacays isagu wuxuu dharaartii harsanaayey geed harac ah oo loo waabay, haabeenkiina wuxuu caanaha haleelada ku durduuranaayey ardaa loo dugsiiyey, loona kashkaashay oo meel u dhexaysa aqallada dhawrka bahood ah oo Xirsi-Jabane looga asteeyey. Isaga shiddo ma hayso. Xoolihiisii inuu soo dhacsado

laga idi maayo. Hawshu Xirsi iyo xigtadiisa ayay ag-taale, sow inuu ka dhur-sugaa kuma habboona?

Waala isguubaabiyey. Dagaal-humid iyo ergoba waa la holliyey. Warmaha ayaa la isu looshaday. Waxaa lagu guuleystey safarkii uu Wacays ka dhacay intii ugu badnayd in Mataan laga soo celiyo. Wacays baase wuxuu dhaar ka maray iyada oo shey qurihi ka maqan yahay inuu guddoomo!

Oo tolow, maxaa ka maqnaa? Wuxuu tebaayey laba-hal. Waa makaawi; kuul laba ah oo waaweyn oo raggii hore uu luqunta ku xiran jirey. Raggii horena kama wada sinnayne, qaarkii magaca dheer yeeshay oo madaxnimo amaba geesinnimo ku caan-baxay ayaa xiran jirey. Nin rag ka soocmay ayaa ku taxaashi jirey. 'Mataanow, ha lagaa gado' ayaa lagu yiri. Markaas buu diidey. Waa lagu noqnoqday oo si walba wax loo tusay, waase laga soo furfuri waayey. Si Alle si looga soo meeriyo ayaa lab loo waayey.

Wacays ma damacsana makaawigii oo loo keeno mooyee inuu Saaxil dib ugu noqdo. Xirsi baa, kolkaas, muddo u qabtay. Waa la gaarey. Muddo labaad iyo mid saddexaad ayuu haddana u qabtay. Giddigoodna waxay dhammaadeen iyada oo hantidii maqnayd aanay soo gacan-gelin.

Dhawr muddo haddii la dhaafay, Xirsina uu maalinba maalinta ka dambaysa ku amahanaayo ayuu Wacays hiyi-kacay. Waxa uu bilaabay gabayo uu Reer Ugaas ku guubaabinaayo; isaga oo doonaya Mataan-Ciideed iyo reerkooda inay makawigii uga soo dhiciyaan.

Martida iyo magantaba af-gaabni baa ku habboon, Wacays baase diidey oo gabyey. Wuxuu shallaayey safarkii uu Ciid la soo aadey. Wuxuu xusuustay dhulkii uu ka yimid derajadii uu ku haystey. Intii uu Xirsi sugaayey, maxaa dulbaax ka baylahay? Maxay ilmo-adeerradiis duullaan bixiyeen oo togga Herer haleelo ka soo qaadeen? Maxaa saami uu lahaan lahaa weydaartey? Muxuu geeliisii dayacan yahay, maxaase caano laga lisay qayrkiis ka durduuranayaa? Maxay, gacalisooy, Dahabadii uu dhaxdey



kolba aqalkii u asoosi, iyada oo u toog-haysa oo, 'tolow, ma caawa ayuu iman, ma berri buu soo dhici?' ku tallamaysa? Alla meesha ma melaggey baa ku galay, maxaa i dhigay? Ma wax baa iiga soo socda, bal maan isaga dhaqaaqo?'. Wuxuu yiri:

*Dawlooy ba'eey! Reer Ugaas nalagu deyn waaye*
*Hadduu duubigii[10] nool yahaan nala danqaabeene*
*Dagdagle iyo nin diihaal qabaa dawga soo mara e*
*Imminkay da'deydii rogaal dabo-maraysaaye*
*Imminkay ilaalada u diri dooxyadii Herere[11]*
*Imminkaa nirgaha loo dalqamin dayrcadkaan[12] dhaqaye*
*Imminkaa markaha laga daf siin sidigta Doolaabe[13]*
*Imminkay min weyn soo dugsiyi Dahabadaydiiye[14]*
*Dil miyaan ku sugi xoolo waa doogga soo baxa e!*

Odaygii uu maganta u ahaa ee Xirsi-Jabane la oran jirey, gabaygaas ma uu garaysan. Waxay la noqotay inaanu waxba hagran, hantidii Wacaysna soo dhiciyaye, uu malaha wax kale ka doonaayo. 'Go'e aan ahayn, wax walba iga heshaye, ma daar baad iga dooni?' ayuu ugu daray tixdan jawaabta ah ee uu ugu hal-celiyey. Wuxuu yiri:

*Hadduu duubigii mood yahay rag baa degelladii yaale*
*Waa taan dar xidhan kaaga dhigay harada Doolloode*
*Dad abaal ma gudo waxaadse tahay dagayow liddoore*
*Waxaad dooni een daar ahayn- dugaye - yaa sheega?!*

Wacays isaguna markiisa tixdaas ma garaysan. Wixii uu Xirsi ka tirsanaayey ayuu oogta ka caddeeyey. Makaawigiisa Mataan-Ciideed uu Galduur ku mushaaxaayo ayuu carrabka ku dhuftay. In Xirsi iyo raggiisa laga waayey nin Mataan u beer-dhigi kara ayuu ku dacwiyey. Wuxuu ku gar-naqsaday:

10. Duubi: Nin tol madax u ah. Wuxuu u jeedaa nin Ugaas ahaa oo markaas ka hor geeriyoodey, ahaana ninhoraad la isku hallayn jirey.
11. Herer: Togga mara halka ay magaalada Hargeysa ku taal.
12. Dayrcad: Jaad geela ka mid ah.
13. Doolaab: Magacyada geela loo bixiyo midkood.
14. Dahabadaydii: 'Xaaskaygii' ayuu u jeedaa.

*Moodkayga oo dedan miyaan weerar lagu miisin?!*
*Meeshii intii timid miyaan maro-maruu qaadan?!*
*Murqufkii ka soo hadhay miyaan lagu muraaddaysan?!*
*Ma makaawigaygaan Galduur lala mushaaxaynnin?!*
*Ma Mataanka xidhan baa dartiis loogu mari waayin?!*
*Nin majeerta oo kaca miyaan - magane - loo waayin?!*
*Naftu inay macaan tahay anaa kuu markhaatiyahe*
*Meeshii mildhaawo leh rag sow kula masaal maaha?!*

'War gacalkaa ha waayine, rag hadduu diriro waa isku mid oo nin aan birtu karini ma jiree, kac oo Mataan waxaygii iiga soo dhici' ayuu Wacays ku soo gebaggabeeyey miinleydiisii jawaabta ahayd.

Tixdaas Xirsi wuu ka carooday. Waxay ula ekaatay inuu Wacays abaal-laawe yahay, deelqaafna ku darsaday. Wuxuu garaysan waayey in laga dafiro hawkarkii uu ka maray soo-dhicinta moodkii magantiisa laga dhacay. Markaas ayuu tix jawaab ah ka celiyey gabaygii Wacays; taas oo uu ku yiri:

*Hal aad tidhi Wacaysow naf baa kaa halaanhaline*
*Oo heedhe Herer waa la geyn hadal-xumaantaase*
*Waa tay haleeladu dartaa Haro ku oodnayde*
*Hubka maannu dhigin jeerahoon helay waxaagiiye!*

Mataan-Ciideed, gabayada la isu celinayaa way soo gaarayeen. Wuu dhuuxayey, wuuna ku raaxaysanayey. Wuxuuba rag-ka-rooni u qaatay wixii uu falay Wacays iyo Xirsi-Jabane inay ku eedoobaan! Halyeyga Ciideed buu isu haysteye, aar laga maagtey inuu yahay ayuu isu rumeeyey. Miinleydii Wacays tirin jirey ayuu dib u dhegeystey.

Saddex meeris oo uu jeclaystay ayuu ka dhex-helay:

*Ma makaawigaygaan Galduur lala mushaaxaynnin?!*
*Ma Mataanka xidhan baan dartiis loogu mari waayin?!*
*Nin majeerta oo kaca miyaan – magane – loo waayin?!*



Waa markhaati uu wax badan sugaayey. Waa erayo islaweynidiisii caadda sii saaray. Waa saddex meeris oo kibirkiisii aad u sii laballaabay. 'Awooddaadii Wacays wuu aqoonsadaye, Allaylehe, adiguna isbar oo u sheeg sababta inaad dhacdo kugu jiiddey' ayuu Mataan ku tashaday.

Farriin buu u diray. Wuxuu ugu yeeray inuu u yimaado, si uu makaawigiisii u guddoonsiiyo. Wacays, malaha, geesi buu ahaaye, taladiisii wuu oggolaaday. Mindhaa soor oo habeenkii u loogye, waabberigii kolkay tahay ayuu labadii hal soo qaaday oo Wacays oo waxa dhici doona aan dooc iyo dareen u haynin la soo joogsaday.

Intii uusan kuushii guddoonsiin ayuu u mariyey tix uu ugu sheegaayo safarkiisii uu dhacay inuu rag ku xiniinyo-baaraayey. Siduu yiri, waxay ka ahayd inuu dareensiiyo, isaga mooyee, cid magan-gelin kartaa inaysan jirin, hadda ka dibna uu dawgu yahay haddiiba uu Ciid kabadhe la soo aado inuu isaga uun soo sheegto! Wuxuu Mataan yiri:

*Shanta reer oo bah-Xawaadle waa kala shisheeyaane*
*Ha yeeshee shaf iyo gawrac waa kala shishlaadaane*
*Rag baan sharad ku beenaynayee kuma shiddeeyeene*
*Labadeenna oo shaarugtaan shuqul-xumaadeene*
*Hadday sharaf lahaayeen beryaan soo shafeecsadaye*
*Adaan sheeyadii kuu huray ee sharac'Allee qaado!*

...oo labadii hal gacanta ugu ridey. Malaha waa maalintii uu Mataan ugu talo roonaa!

Hase ahaatee, sheekadaasi waxay abuurtay isdareensi xoog leh oo aan markii hore jirin; kaas oo ka dhex-aloosmay Reer Ugaas oo ah jifadii uu Xirsi-Jabane ka dhashay iyo Reer Dalal oo ah jifadii uu Mataan ka soo jeedey.

## 7. Guur silloon!

Muddo hadday qoortu kor ugu taagneyd oo falalkiisii silloonaa iyo magaciisiiba bari iyo bogox lagaga haasaaway ayuu maalintii dambe geelooda dhexdiisa kadalloob u fariistay. Hammi baa ku soo kordhaye, dhulkii buu

jifeeyey. Hal iyo faras baxdooy ah ayaa mooradiisii ka batay. Barbaar turuqyo waaweyn oo wada okobbanna garabkiisa ayuu ku arkay, kolkaas buu istaawiyey rag inuu wax dheer yahay, ayna la ahaatay bili adduun inuu u soo maray.

'Maxaa kaa maqan?' ayuu isweyddiiyey. 'Allaylehe, doobnimo laga roone, waa ruux dumar ah oo aad alkumato, ka dibna aad la aqal-gasho' ayuu naftiisa ugu jawaabey. Hawo guur baa ku soo korodhay. Oo tolow, tee buu gaataa, dadse yuu kala xididaa? Tashi buu bilaabay. Oo duqow iyo abwaanno uma bayrine, da'yartii ay isku gedaha ahaayeen ayuu u leexday.

Wuxuu goostay gabadha uu guursan doonaa inay noqoto milgo iyo qurux, geyiga Ciideed, inanta lagu kuunyo. Dhaban dumar loogu xisho ha ku tilmaannaato. Magaceedu mid ay safruhu ku haasaawaan ha ahaado. Ha ku aroorto qoys xoog leh oo awood iyo wardheeriba loo daayey.

Meel Alla meeshii dab ka bidhaamayeyba dhallinyaro ayuu u diray. Ciid oo idil ayay cagta soo mariyeen; iyaga oo indho-indhaynaaya inantii Mataan-Ciideed u qalmi lahayd.

Ina-hebeshii loo soo sheego wax uu ka maagto oo wax ku dhalliiloba, ugu dambaystii ayaa barbaar geenyo qodban ku joogaa uu geedkii uu fadhiyey kaga degey. Wada-hadal gaaban ka dib waxaa la milicsaday Mataan oo ilko-caddaynaaya oo aad mooddo safar dagani inuu u muuqday! Waxaa la arkay Mataan oo muusoonaaya. Mataan oo boodboodaaya sidii uu yahay canug aan weynaan oo wax ka lumay ciidda ka dhexhelay! 'Allaylehe, gabadha laguu sheegay way kuu qalantaa. Reer la yaqaan way ka dhalatay. Bilic aan dumar loogu wada deeqinna waa loogu deeqay, laguna galladay, qorshe iyo quluudna waa lagu sheegay. Waa Salaado Yuusuf .

Waa inan kibir iyo qabba lagu tilmaamay. Waa inan rag oo idil cagaha isugu dhufatay. 'Hebel bay diiddey, hebel kalena waa tii aabbahay buu iga yahay tiriye, malaha adiga ayuun bay ku sugaysey. Qoodhay iyo xeraday maanta ayaa guur kuu eg yahaye isbandhig oo, doobnimo lama ammaanine, reer yeelo', Mataan baa sidaas naftiisa kula shawray.



Oo guur waa doonis iyo la-bixide, labada tabtee buu raacaa? 'Illeen xodxodo iyo afgarasho ayaa ka horraysa, gabadhana hadal idiinma horreynine, la-bixid iyada haba soo qaadin. Midda kale, tabta la-bixidda waxaa u irkada nin cayr ah oo xoolo adduun ku yar yihiine, maxaa Mataan uga dan ah?

Inuu doono ayay talo kaga dhammaatay. Raggiisii kuwii uu ugu kalsoonaa ayuu uruursaday. Reer-Ugaas oo ah qoyskii ay Salaado ka dhalatay ayuu fardihii u heensaystay. Isla markiiba wuu u dadab-galay. La isma haybsan oo waa la isyaqaan. Isna ma leexleexannine, inuu Salaado doonaayo ayuu diirka ka qaaday.

Dumarka oo la isu diidaa xeer ma ahayne, waa lala xaajoodey oo loo carrab-laallaadiyey. 'Geel iyo fardo iyo 'yarad immisa ayaad bixinaysaa?' dooddu kama joogin oo lagu murmi mayn. Maxaa yeelay waxaa la ogaa Mataan inuu yahay wiil-hoog ammaan jecel oo diyaar u ah rag inuu ka fooro, xididkana wax sheeko reeba uu guddoonsiin doono.

'Hawraarsan' baa codsigiisii lagaga jawaabey, Salaadona waa la siiyey. Yarad mayro geel iyo gammaanba leh oo baxdooygiisii Feyd la baxay uu ku jiro ayuu u soo laameeyey. Maro-weyntii Reer Xandulle (Ogaadeen, Reer Cabdille) sida Faarax Afey, Cali-Dhan iyo Nuur-Jiir ee Salaadona ay jifada ahaayeen ayuu tacabkaas xeryaha ugu shubay. Iyaguna wixii xidid laga filan jirey oo qalqaalo ah ayay ku dhaqaaqeen.

Raggu ha wada hadlo, gabar ha la isa siiyo, yaradna ha la kala qaatee, tolow, Salaado arrintu halkee bay ka taagnayd? Maxaa madaxeeda ku wareegaayey? Inuu Mataan soo doonay oo hablo oo idil iyada ka doortay, ma gallad bay u qaadatay, mase laba-caloolyow baa ku dhacay?. Waxay istiri: 'Waxa geyiga Ciideed rag ku dhaqan, maxaa tolow, ninkan kaaga soo soocay?'.

Su'aashaas ayaan, aniguna, jawaabteeda toydey, waxaanna ku-tiri-ku-teen igu soo gaadhey dadab-galkii horeba inay doonistii Mataan ka maagtey. Dumar iyo rag mid ay kula sheekaysatayba, waxay ka ergeysey ninkaas, habaar mooyee, aan dhankiisa waana duco loola jeensan

in la weydaarsho. Malahayga, waxay ka cabsi-qabtey carruurta ay dhali doonto habaarka Mataan ku larani inuu fac-ka-fac ka hari waayo!

Hase ahaatee, ha ka maagtee, marna diidmo Salaado uma bannaanayn. Wax walba oo rag ku heshiiyey waxay ahaan jirtey inay dumarku raacaan oo, Rabbi iyo ragba wixii ay ku taliyaan, marna kama ay hor-imaan jirin. In kastoo raggii hore qaarkood ay yaradka iyo aayaha hablahooda ay kolkol yaradka u xilan jireen, haddana run ma ahayn waalidka iyo jifadu halka ay gabadhoodu ku socto in aanay u meelo-deyi jirin. Salaado, iyada oo taas maaanka ku haysa ayay 'hawraarsan' tiri.

Ha yeeshee, gugii gabadha inuu dhisto laga sugaayey ayuu imaan waayey, farriinna ma soo dirin. Xagaagii xigeyna lama arag. Dayrtii haddii la gaareyna ma soo joogsan. Waxaase yaab loo wada go'ay gugii labaad kolkuu da'ay, welina aan wax war ah xaggiisa laga helin. 'Muxuu, tolow, Mataan maaggan yahay' ayaa dadkii yiqiini is-haybshey.

Waayeel iyo dhallinyaro, rag iyo dumar, iyada oo wixii uu damacsanaa ay cidina suurayn la' dahay ayuu maalintii dambe tix gabay ah soo dhiibey. Waxay ahayd tix ay ka muuqato in aanu inantaba dan sidaas ah ka lahayn, kalgacal sii ridanna aanu u haynin. Bil-soonqaad iyada oo lagu jiro ayaa Salaado loo sheegay gebaggabadii tixdaas oo ahayd:

*Soonkan iyo soonkiis haddaad socotaday weydo*
*Iga samir Salaadooy Ilaah nin uu ku siiyaaba!*

Wax la sugaba, gugii saddexaad ayuu isa soo dhigay; isaga oo, haba yaraatee, aan wax cudurdaar ah xididkii iyo gabadhii toona u sheegin. Dabadeedna, 'maxaa ku maqnayd intaas oo gu'?' iyada oo aan la weyddiin ayaa aqal aan aqallo u ekayn loo dhisay. Kashkaash iyo dermo ladan oo raaxo loogu gam'o ayaa loogu gogley. Qunbeyaal subag ah iyo tebbado oodkac ah ayaa gasada loo dhigay, si diihaalka gaajadu uu agagaarkaba uga fogaado.

Fardaha ayaa lagu dabbaaldegey oo laga dul-geeraaray. Ammaantii gabadha ayaa lagu dheeraaday. Dhallinyarada ayaa sacabka iyo jiibka isla heshay, Salaadona goor fiid ah oo dayaxu sagaal iyo kow iyo to-



ban u dhexeeyo ayaa Mataan-Ciideed aqalkii loogu soo hooyey. Aroosgobeed buu ahaa, maxaase ka dambeeyey?

Sideedaba faanfaan ma ahee, dulucda guurku waa taranka aadanaha oo loo diidaayo inuu tirmo. Ismehersiga inanka iyo inanta waxaa looga gol leeyahay, dhimasho ka dib, inaan magacooda ifka lagu xusi waayin. Mashxaradda arooska ugu dambaysa waxaa lagu xijiyaa ducada caanka ah ee ay wiilka iyo caanuhu ku sheeggan yihiin. Raas-weyn inay noqoto oo 'abaydin abaydin gaarey' lagu gallado ayay culimmadu gabadha ugu ducaysaa, xigtadeeduna waxay u rajeeyaan sayga inuu Eebbe bayaxow uga dhigo. Macnaha guurku leeyahay, isweheshiga ka sokow, waa carruurta labka iyo dheddiggaba leh ee uu reerku reerba ku noqdo.

Mataan-Ciideed wiilkaas la baxay ee Salaado guursadey, isaga, tolow, xigmaddaasi ma u muuqatey? Arrinta markeedii horese sidaas ma u galay? Wuxuu ahaa nin ku dhaqma wax kasta oo aan dadka kale ku dhaqmin. Wuxuu ahaa nin ay la xaraareyd inuu uunka kale la mid noqdo; nin la jeclaysiiyey inuu dadka ka duwanaado. Waxaa la xumaatay sida dadka kale intuu haweeney guursado oo la aqal-galo inuu carruur Eebbe ka tuugo oo hooyo iyo aabbe ay wiilal iyo gabdhoba u noqdaan!

Wuxuu ku tashaday guurkiisu mid sheeko reeba inuu ahaado. 'Mataan baa guursadey, wax lala yaabaana ma dhicin' way u cuntami weydey. 'Dhibaato kasta, dad iyo duunyoba, waad u geysatay, welina itaal-rag waad tahaye, yaan wacdarahaagu isdhimin' ayuu ku tashaday. 'Guurkaagu ha noqdo mid aan isaga oo kale weligeed la arag, eed kastaa ha ka timaaddee' ayuu naftiisa kula heshiiyey.

Laba-saddex habeen kolkii ay Salaado iyo Mataan sidii laba nin u wada joogeen ayuu fiidkii dambe daboolka uga qaaday tashigii uu sheydaanku laabta ugu tiray. Oo muxuu ahaa?. Sidii nin iyo afadii inay aqalka ugu soo wada hoydaan, sidii laba ninna ay u wada noolaadaan!

Waa wax aan taariikhda guurka weli soo marin. War oo idil wuxuu ugu soo koobay: 'Salaadooy, boqorka Ciideed ayaan ahay, adiguna marba haddaad afadaydii noqotay, haweenka Ciideed ayaad boqorad u tahay oo, maanta ka dib, Salaado-Ciideed weeye magacaagu. Salaadooy, bo-

qor iyo boqoradi inay wax iska doontaan waa ila liidasho! Wallac, uur, ummul iyo jilicsanaan dumar maxaad ku fali? Ubad aad daadiso iyo ilmo aad araxda ku xanbaarto waan kaala han weynahay! Inaan sidaas ku wada joogno, sheedda iska dhawranno, iskana sheekaysanno ayaa inoo guddoon ah'!

Waa amankaag iyo af-kala-qaad. Waa xaajo aanu abwaan soo-jire ahi u soo joogin, cid ku kacday oo Mataan ka horreyseyna aan laba isugu sheekayn.

Go'aankaas silloon, Salaado 'hawraarsan' bay tiri. Oo maxaa kale oo ay oran karaysey inan ka mid ah hablihii Soomaaliyeed ee qarnigii 19d lala aqal-geli jirey? Hablihii soo-qaadka guurkaba ka xishoon jirey, marka la guursadana inay magaca ninkooda afka ku ballaariyaan ka leexleexan jirey? Hablihii markay ninkooda xusayaan oran jirey: wadaadkii reerkan lahaa ama carruurtayda aabbahood' iyaga oo ka xishoonaya Jaamac ama Guuleed inay carrabka ku ballaariyaan.

Sidaas daraaddeed, guddoonka Mataan ee gurracan, xigmadduna ku yarayd, Salaado dood kama ay soo celin, muddona sidaas ayay ku wada joogeen. Aqalka ayay u soo wada hoydeen. Caano iyo wixii kale ee ay haysteen ayay quuteen. Way sheekaysteen, dabadeedna way kala sexdeen!

'Sidee baa markii dambe lagu ogaadey?' miyaad i weyddiin?. Waxaa la yiri: Waayadii hore waxay Soomaalidii reer-miyiga ahayd rumaysnayd kolkii uu doobku aroos galo inuu tabar-darreeyo oo haddii uusan isdhaqaalayn uu degdeg jirkiisu u debcaayo. Sidaas darteed, waxaa caqli lagu tilmaami jirey beryaha aqal-galka ninka aashi-socodka ah.

Si kolka loo ogaado barbaarkii aroosay labadaas waddo mid uu qaaday waxay dhallinyaradu muddo ka dib samayn jireen tijaabooyin lagu garan jirey hebel inuu isboobay iyo in kale. Tijaabooyinkaas waxaa ka mid ahaa orodka, legdanka iyo bootimaaleysiga.

Haddaba, aqal-galkii Mataan iyo Salaado haddii ay bili ka soo wareegtey ayay dhallinyaradii beeshu bootin dhisteen. Inuu ka boodo geedihii



la isdul-tubay ayaa loogu yeeray, haddii uu weli yahay sidii lagu yiqiin ama uu beri hore ahaan jirey. Illayn waa nin aan maalloonayne, si xallad leh ayuu isaga jaray. Taasise layaab dheeraad ah ma lahayne, waxay dhallinyaradii layaab la kala jeesatey markay Salaadona dhismihii ka booddey oo, sidii barbaar xooggu u buuxsamey, cirka isaga jartay!

Durba bulaan baa aloosmay. Wax baa la dareemay. Shaki iyo xamxam baa beeshii ka dhex-abuurmay. Qofba qofkii uu ka hor-yimid ayuu labada ruux xaalkooda ka toydey. Kolkaas baa Salaado waxaa loo diray dumar soo warsada. 'Dhismihii aan maanta ogeyn gabadhii ka booddey aroos ma geline, Salaadooy noo warran' ayaa waxaa ku yiri haweenkii oo raggiina uu ka war-sugaayo.

Waxay jawaabta ka meermeertoba, waxaa markii dambe laga helay aqalkii arooska sidii ay ku gashay inay baaqi ku tahay! Bulaankii iyo xamxamtii baa sii batay. Warmihii tuhunka ayaa Mataan lagu halgaadey. Waxaaba shaki la geliyey, oogo ahaan, qof dumar ah oo ugub siduu say ugu ahaan karo.

Xilligaas ma jirin tuhunkaas isaga ah tabaalo ka weyn oo la soo gudboonaada nin dhowaan guursadey. Jirro jirrooyinka ka mid ah looma arki jirine, waxaa loo arki jirey liidasho quursi lagu muto. Gudashada waajibka ninnimo oo laga soo dhalaali waayaa waxay ahayd ceeb aan ceebi ka weyneyn oo aan ninka ka hari jirin, safka laboodka iyo dheddigoodkana uu labadaba ku seegi jirey!

Qaar ka mid ah odayadii aannu wax ka werinney waxay ku sheekeeyeen, 'Mataan ma awood la'ayne, wixii uu falay wuxuu kaga aarsanaayey Salaado qudheeda oo waagii uu doonaayey diidmo yar looga soo sheegay!' Sababtu taag daranaa, qaabka aarsiguse sirgaxanaa!

Si kastaba ha ahaatee, Mataan-Ciideed guuxii bulshada ayaa gaarey. Aad buu uga xumaaday in ragannimadiisii la duray. Inuu ka gilgisho ayuu damcay, ha yeeshee eed kale oo kibirku ka hakin waayey ayuu dhabarka u ritey.

Waa nin gardarrada iyo kibirka malab loogu daadshaye, gabadhii uu asaaggeed ka reebay ayuu, haddana, ceebeeyey oo keligeed ma aflagaaddeyne, hooyadeed oo soddohdiis ah sii galaaftay! Hadal tiraab ah oo lagu sheekeeyey waa laga kabtaa oo la iska illoobaaye, hooyaale maanso ayuu labadiiba ku dhaleeceeyey. Kolkii loo soo hooyey inaysan isku san-bannaanayn ayuu Salaado ku tilmaamay. Soddohdii dhashayna wuxuu ku canbaareeyey inanteeda inay ababkii hore ka lumisay. Wuxuu ku eedeeyey farsamo-xumada gabadheeda, yaraantii, ku soo gaadhey inay iyadu ku ogeyd, raallina uga ahayd. Gabadhiiba wuxuu ka soo saaray, qurux foolka ah ha joogtee, ruux aan innaba wax kale la gole-imaan.

Wuxuuse ku roonaa inuusan sidaas qayaxan wax u orannine, uu u sarbeebtay, taasaana keentay in la kala weriyo, gabaygiisii ba'naana uu ina soo gaaro.

Geed la tuuran yahay oo dhallinyaro iyo waayeelba aan loo kala maqnayn ayuu soo joogsadey; isaga oo taxaabanaaya faras xamar ah oo uu lahaa. Wax yar ka dibna, wuxuu goobtii ka tiriyey gabaygii uu Salaado iyo hooyadeed ula jeedey; isaga oo inanta faras ugu sarbeebanaaya, soddohdana geenyo ku maldahaaya. Wuxuu yiri:

*Inta geed ah geel-waaqistaa ugu guduud roone*
*Hadday gaajo xooluhu qabaan goosan mahayaane*
*Garannuugta waan ugu necbahay gebi ugaadheede*
*Gaaraabidhaan laguma daro galowga haadeede*
*Golcastaa sagaaro ugu daran guuyo dhaantida e*
*Waxba kuuma galo roob-la-dhacu waana shey goba e;*

*Galka Sirow raacdada markii la isku soo gaadhey*
*Neefyahow guduudani midkii gaabiyaad tahaye*
*Guuldarrada waxa kuugu wacan geenyadii hore e*
*Is-gudgudubka Xamarow maxaa golihi kaa raacay!*

Waagaas ceeb aan ceebi ka weyneyn waxaa ahayd dumarka oo xumaantooda gabay lagu sheego, malahayga cid Soomaali ah oo Mataan uga horreyseyna ma ay jirin. Afada la qabaa kuma sii jirin, waxaase



ka sii daran oo laga siqoon jirey soddohda oo, xurmo mooyee, ninka gabadheeda markaas qaba ama qabi jirey aan wax kale ka mudnayn. Ha yeeshee, ninka aannu hadal-haynaa waa Mataan oo xeerka dadka qabtaa aanu isaga qaban!

Bal malee kolkii tixdaas la maqlay wixii dhacay. Raggii geedka joogey ee loo mariyey niman hadal seego ma ahayne, sarbeebtii waa la gartay. Hoos baa loo wada jeestey. Rag baa damcay inay isla geedka shirka ku dhaleeceeyaan, ha yeeshee way ka maageen. Waxay ka baqeen wax ka daran inuu goobta ka geysto. Dhiig iyo dhabbaqo midkood in madasha lagala carraabo intay ka cabsoodeen ayay afafkoodii xagsadeen. In yar ka dibna inta la isdhugtey ayaa, iyada oo aan ninna nin la hadlin, shirkii lagu kala dareeray.

Odayadii xilku dhibi jirey iyo garmadowdii ceebta necbayd ayaa kor iyo hoosba ka habaaray. Addimmadiisa ayaan laga baxsan jirine, carrabkiina ma ku daray?. Abwaannadii baa laabtu huguntey. Fiid-horaadkii ayaa tixdii ba'nayd oo dhallinyaro iyo waayeelba la qaybsan yahay aqalladii iyo goleyaashii geela lagula laabtay. Waa lagu haasaaway. Odayaashu ha diideen oo dhegaha ha ka furaysteene, kurayadii baa geelashii ku soo carraabiyey oo, markii ay hal soo duwaanba, kor ugu dheeraystay.

Salaadooy, bal adiga maxaa kuu eg? Uurka ayay ka oydey. Noloshii baa dhadhan u yeelan weydey. 'Yaa ku habaaray?' inta ay isweyddiisey ayay dib ugu noqotay waayihii ay soo martay, bal inay garato halka laga gaarey! Calalis iyo caanoba way ka degi waayeen. Maalintii ay moorada Mataan soo gashay ayay maalmaha ugu necbaatay.

Maxaase, rag Allow, waxaas oo walaac iyo murugo ah ugu wacnaa? Waxay islahayd: Adiga iyo Mataan guur uma hagaagin, una hagaagi maayee, noloshaadu, rag Allow, sidee bay noqon?. Gabaygaas ba'an oo cid taqaani ay ifka ku dhaqan tahay, sidee buu inan-rag kuu soo jalleeci doonaa oo guurkaaga ugu fekeri karaa?'.

Waa runteed oo wahankeedu waa wax mudan in laga garaabo. Yaa guurkeeda ku degdegaaya gabadha, dhirta Eebbe badane, geel-waaqista lagu tilmaamay?. Naagta, ugaari kala jaade, garannuugta aan hilib-

keeda la hunguriyeyn lagu sheegay?. Naagta gaaraabidhaan, golcas iyo roob-la-dhaca aan guduudka mooyee qiimaha kale lahayn loogu halqabtay?. Dumarka hidde-raac iyo isir-wanaag baa loogu xilan jiraye, yaa u soo hanqal-taagaya, gardarroba ha ahaatee, naagta hooyadeed uu geel-jiruhu ceebaha lagu sheegay ku maansoonaayo?.

Waxay haaraantay nimankii ay walaalaha iyo ilmo-adeerrada ahaayeen ee inta Mataan yiqiin gacantiisa ku aamminey. Saantii ragga ayay ka irdhowdey, giddigoodna bayr bay ka yeelatay. Dhuxulo dab ah oo indhaheeda kor saaranna waxaa ku noqotay daymada dumarradii ku wiirsanaayey.

Aqalkii ay oorida ka ahayd intay si dhuumasho ah uga baxday ayay habeen madow waddada cagta saartay. Reerkoodii oo aan ka fogeyn xeryihii dayrta laga soo aroosay ayay beegsatay; iyada oo, marashidii ay qabtey mooyee, aan ku hanbaasin shey kale oo Mataan ku isman. Intii ay laba-laxaadsanaysey oo 'dugaaggaa ka baxso' ay islahaydna, way ilmaynaysey. Oo maxay u ilmayn weydey, sow muraayaddii qabkeeda inkaar-qabe kuma tuman oo bagac kama siin?

Habeenkaas iyo maalintii xigtey haddii ay soconaysey ayay fiidkii dambe goor caweysin ah qoyskoodii iyo ardaagii hooyadeed ku soo ag-dhacday. Waxay ku tashanayd, 'warran oo, adiga oo barooranaaya, waxa lagugu falay ka xareedi', hase ahaatee waabberigiiba waxay ogaatey sheekadeedu inay ka soo horraysey!

Illeen rag baa habeen hore reerka ahaa oo wixii Mataan falay iyo wax ay ku dareenba soo tebiyey. Illeen baadi geel oo ay ku raad-joogeen baa beesha loogu sheegay oo iyagaa sheekadiiba mariyey. Illeen maroweyntii Salaado jifada u ahayd waa war qabaan oo keeda baahi weyni uma hayso. Illeen gabaygii baa sida too, tanna looga qaybsan yahay oo Faarax Afey, Cali-Dhan iyo Nuur-Jiir oogadooda meeshii laga saro dhiig loogama fadhiyo, umal bayna la gam'i la' yihiin!

Gardarrada Salaado lagula kacay waxay ugu muuqatey tu' iyaga loola jeedey. Caradii hayseyna waxay sii korodhay markii ay arkeen gabadhii oo dhalan-rog ku dhacay. Inay iyadii tahayba, waa laga shakiyey. Awel



way casayde, way madoobaatey oo sidii qof duumo ka soo daahay u suuqantay. Baroorteeda uurka ayaa foolkeeda ka muuqata. Hooyadeedna waxay raggii u tebisey Salaado tii ay tiqiinba inaysan ahayn. Way kaftan badnayde, waxa ka soo haray weji diifaysan iyo bushimo hadalkii loo ideyː Habaaska oo ay ka feejignaato iyo oogadeeda oo ay ku hawshooto ayaa lagu ogaaye, waxaa la arkay iyada oo mar walba barida dhulka ku haysa, sidii guumeys inan-rag ka quusatay!

Barbaartii ay xigtada ahaayeen ayaa midba colaad uu Mataan u hayo dhinaciisa ka guddoonsadey. Isaga iyo ninkaasi inaanay dunida guudkeeda ku wada noolaan ayaa waxaa dhaar ku maray seef-la-boodkii Salaado hoosta uga yaraa. Labaatan-jir ina-adeerkeed ah oo baraaraha nabadda mooyee aan halaagga colaadda weli u soo joogin ayaa afar-iyo-tobanka-iyo-boqolka xaf ku siiyey Mataan iyo xidid kale inaan eed dambe kala gaarin! Dulucdu waa inuu nafta weysiin doono, dabadeedna laga raysan doono.

Odayadii beeshu waxay dhallinyaradii cartamaysey ugu caqli-celiyeen: 'nin da` yari intuu geed ka boodo ayuu talo ka boodaa', dadkuna waa tol oo xidid keliya lama ahee, dhalyona waa la wadaagaa. Xasan-Mataan sidaas foosha xun haddii uu ku kacay bal yaan lagu dayan, godob soo keeyena laguma degdegee, jifada uu yahay ha loo ergeeyo'.

Guurti soo guddoomisa falalka Mataan wixii lagaga xafiif-qaadan lahaa ayaa la soocay. Habeenno haddii ay tashigii ku guuleen oo qaarkood, caro awgeed, uu geedkii ka dareeray, dhallinyarona ay go'aankooda sugi la'dahay ayay, ugu dambaystii, talo ku heshiiyeen. Waxaa toodii la raacay nimankii ku taliyey xaal iyo xumayn inaan Mataan iyo jifadiisa midna la weyddiisan, looguse ergeeyo inuu Salaado madaxeeda u sii daayo. In kastuu ahaa guddoon aan caro ka maqnayn, haddana uma uu cuntamin da'yartii warmaha looshanaysey ee, ugu yaraan doonaysey, furriin waa halkiisee, arrintaas tab uun in looga gilgisho.

Si kastaba ha ahaato, heer kastana ha soo martee, hebel iyo hebel baa la magac-dhebey. Mataan-Ciideed ninnaba garnaqsi ugu tegi mayne, raggii jifada u ahaa ayaa meel-marinta guddoonkaas loogu guryo-tegey. 'Hawraarsan' ayay ergadii kala kulantay odayadii ay u gogol-faristeen.

Mataanna, wax la baryo oo garka iyo gondaha la hayoba, ugu dambaystii ayuu yiri: 'Yeelay, waase haddii la ii soo celiyo yaradkii aan hortii bixiyey.' Shardigaas isaga ah ergadii hadal kama ay soo celin, waxayna muujiyeen wax walba oo ay Salaado madaxeeda ku heli karaan inay u darban yihiin.

Sidaas ayaa maalintaas lagu kala dareeray, iyada oo lagu ballansan yahay debnaha Mataan in laga maqlo saddexdii dalqadood ee uu Salaado ku qabey; kolkii loo soo naqo xoolihii yaradka ahaa ee xagga reerkooda kaga maqnaa. Malahayga, waxay ahayd markii ugu horraysey oo ay Mataan iyo rag kale, wax kastaba ha ahaatee, ay wuxuun ku heshiiyaan! Maxaase ka dambayn?

Ergadii Reer-Xandulle kolkii ay noqotayba, waxay bilawday geelii iyo fardihii yaradka ahaa ee Xasan-Mataan inay meel isugu keenaan. Hashii qolo maal loo siiyey waa la doonay. Geelii la xerriyey tuluddii lagu ogaa cid baa loo diray. Faraskii iyo geenyadii la banjoogeeyeyna jaraha ayaa lagu soo qabtay.

Goor barqo ah ayaa xoolahaas oo la wado Mataan loo keenay oo la guddoonsiiyey. 'Salaado waan furay' ayuu dadkii maqashiiyey. Eebbeweyne ayay odayadii iyo abwaannadii mahad u naqeen, mar haddii dhiig iyo colaad la'aantood Salaado iyo Mataan sidaas lagu kala madxiyey!

Ha yeeshee, way male habaabeene, ninku nin ay wax ka go'aan ma ahayn. Jid iyo jaho loo raaco nin aan lahayn buu ahaa.

Muddo ka dibba, socoto xagga Mataan ay saantoodu ka soo jeeddey ayaa waxa ay u warramaysaa Faarax Afey iyo Nuur-Jiir oo salaado jifada u ahaa. Waxay ku leeyihiin: 'Mataan baannu soo marnay, wuxuuna noo sheegay inaan Salaado ka furnayn oo ay weli isaga afo u tahay. Sababtana wuxuu cuskiyey xoolo weli dhankiinna kaga maqan oo ay ka mid yihiin faraskiisii Feyd la oran jirey iyo laba halaad oo markii uu bixinaayey isku sidkanaa'!

Waa run oo afartaas neefi in aysan weli u soo xeroon waa wax jira. Hase ahaatee, markaas ka hor sow tii laga heshiiyey oo in loo soo kaxayn



doono loogu ballan-qaaday, isna uu Rabbi iyo rag hortiisba uu gabadha ku furay? Rag Allow, ninku jid xumaa, sow waana axdi kama xirmo?! Sidee buu damac uga hayaa gabadhii uu sidii la ogaa u galay ee uu magaceeda bi'iyey? Mase damacba kama hayee, waxaa kibirkiisa maan la'aaneed ka dhaadhiciyey inaan Salaado ka dhalan reer ka xafiif-qaadan kara, ragna aanu ka dambayn?.

Cali-Dhan iyo Nuur-Jiir baa cadanyooday. Wuxuu ballaar lahaa, dhulkii baa ku yaraaday. Faarax Afey ayaaba roonaa oo labadooda dejinaayey. Isaga ayaa ku taliyey: 'War kol hadday arrintu afartaas neef joogto, ilmo-adeerrayaalow, dhiig sokeeye guul ma noqdee, ha loo geeyo, wixii dambe ee ka yimaadona aan dhawrno'. Waa laga yeelay, waxaase geedaha laba-dible loogu xiray, quraanyona lagu jafay dhallinyaradii uu dhiigga Mataan u hillaacaayey!

Iyada oo laga talinaayo halihii isku sidkanaa iyo faraskii Feyd ahaa ciddii Mataan u kaxayn lahayd ayaa goor casar gaaban ah waxaa reerihii la soo joogsadey afar nin oo uu Buraale Ugaas Muxumad ku jiro (Ogaadeen, Reer Ugaas). Cidda ma aysan dhaafsiisnayn. Sidaas daraaddeed sheedda aqallada ayaa gogol loogu fidiyey oo wan subag madoobe ah inta loo loogey caano geel laga durduuray.

Isla habeenkiiba dantii socodkooda ayay u sheegteen Faarax Afey iyo odayadii beesha guurtida u ahaa. Buraale oo ogaadey in Salaado la furay, gabadhana naag-door ku maqlay ayaa soo doonay. Sidaas ayuuna reeraha ugu soo dadab-galay. Nin la yaqaan oo asluub-leh, abtirisna aan kaga fogeyn buu ahaaye, Faarax Afey, Cali-Dhan iyo Nuur-Jiirba 'hawraarsan' bay yiraahdeen.

Buraale oo Salaado la siiyey iyo raggii ula soo dadab-galay waabberigii ayay degmadoodii u kallaheen, iyada oo lagu ballamay guga dhow iyo xilli roobaad in xilaha iyo xarraagada la isweydaarsado. Weriyeyaasha qaarkood waxayba sheegeen Buraale markuu Reer-Xandulle ka geddoomey inay Salaado ku mehersanayd oo, sharci ahaan, ay afadiisa ahayd. Rag Allow, Mataan-Ciideed markuu arrintaas cusub maqlo muxuu ka yeeli doonaa? Bal wax dhawra.

Goor harsimadii ah, Mataan oo geed hareeri ah harkiisa rag kale kula shaxaaya oo midigtana saalada ku xabbad-qaadaaya, bidixdana labadiisii waran ku haysta, gaashaankuna uu dhinac yaal ayaa niman socoto ahi 'salaamu-calaykum' kaga naxsadeen. Waa nin dhiillaysan oo uun door ah godobtooda hayee, intuu boodey oo warmihii iyo gaashaankii hagaag u qabsaday ayuu nimankii degdeg u haybsaday.

Markii ay isu sheegeen oo uu gartay inaysan colaad ugu socon ayaa la iswaraystay. Waxay habeen hore ku hoydeen aqalladii Reer-Xandulle iyo rugihii Faarax Afey iyo Nuur-Jiir ay ka talinayeen ee ay Salaadona joogtey. Waxay goobtii ka sheegeen, wararkii ay Mataan siiyeenna ugu darraa Buraale Ugaas Muxumad inuu Salaado soo doonay, dabadeedna inta la siiyey loo meheriyey!

Nimankii buu hadalkii ku celiyey oo mar labaad ka hubsaday, mar saddexaadna ka saxsaday. Sidii nin cirku ku soo dumey ayuu socotadii iyo raggii uu geedka kula shaxayeyba ugu muuqday. Warmihii buu dhawray oo sidii nin maantadan loo tumay gaashaankii u milicsaday. 'Sidee buu, adiga oo jooga, uu nin kale Salaado u haweysan karaa?'. Su'aashaas buu, hoos ahaan, naftiisa u weyddiiyey. Isla markiibana, go'aan buu, si degdeg ah, halkii kaga dhawaaqay. Wuxuu yiri: "Intiinna geedkan joogtaay, dhegeysta. Dadka Ciideedow u dhug lahaada oo waxa aan idiin sheegayaa yay fudayd idinku dhaafin. Kii joogow, kan maqan gaarsii: Salaado, aniga oo ifka ku nool, nin kale ma geyo! Naagta mar uu magacaygu ku yeeray, sidee bay aqal nin kale uga soo toostaa?! Naagta aan boqoradda geyiga Ciideed uga dhigay ee anigu aan Salaado-Ciideed ula baxay, dadow yaan loo hanqal-taagin oo ninowna inay carruur kuu xanbaarto shaarubbada ha u duugin"!

Nin dhiirranaa oo geedka wax ka fadhiyey ayaa yiri: "Oo Mataanow, sow tii jiilaalkii dhoweyd la lahaa Salaado wuu furay?'. Wuxuu ugu jawaabey: 'Shalay ma furin, maantana furi maayo, haddiise xataa aan furo halkee buu ku nool yahay ninka guursan karaa oo naag kol meher iigu dhacay iiga dambayn karaa!".



Rag allow, gardarro iyo kibir ka qaab daran ma loo soo joogey?! Abwaankii jifada u ahaa, Axmad Muxumad Xirsi, ayaa go'aankii iyo warkii Mataanba loo sheegay, kolkaas buu yiri: "Xasan-Mataan, wixii Eebbe ku abuuray weli ma dhicin!'.

Warkii baa geyiga Ciideed daaf walba u qaaday. Wixii waxgarad ahaa oo dhammi waxay yiraahdeen: 'Sayga iyo ooridiisu intay kala tagaan, sow tii uu midba reer labaad yeelan jirey? Sow tii aan, furriin dabadi, xasaradi dhici jirin? Maxaa Salaado ku goonni ah oo ay kaga duwan tahay dumarka uu nin furo, dabadeedna uu mid kale guursado?'.

Ninkii su'aashaas ka jawaabey wuxuu yiri: 'Salaado goonni ma ahee, Mataan baa goonni ah. Waa nin maskaxda gashaday geyiga Ciideed iyo inta ku noolba inuu Eebbe-weyne isaga ku xuddumay! Hadduuba ahaa, xumaan mooyee, nin aan dubaaqiisa samo ku soo hoyan, maxaa u diidaaya inuu maalin noolba wax lala yaabo la gole-yimaado? Yaa arkay oo maqlay nin haweeney furay oo yiri, 'dabaday lama guursan karo'!

Raggii jifada u ahaa ee go'aankiisu uu la qalloocnaa ayaa waano isku deyey, ha yeeshee waano abuur baa ka horraysey. Waalid buusan maqlin, guurti baan wax u sheegi karin, waano culimmo ayuu dhegaha ka furaystay!

Qoyskii Salaado ka dhalatay oo taladiisu tahay in afartii neef Xasan-Mataan loo kaxeeyo ayuu warkaasi gaarey. Rag iyo dumar, wixii maqlayba, caro ayaa dig siisay. 'Tol beelaye, Xasan-Mataan miyaan rag loo lahayn?' ayay dumarradii ku geesaaseen.

Awel hore raggii nabadda ka talin jirey way badnaayeene, hadda way soo tiro yaraadeen tan iyo maalintii la maqlay hadalka Mataan ka soo yeeray. Waxaa loo batay garadarro wixii kala soo gudboonaadey inaysan tanna ku dari karin, uguna dul-qaadan karin.
Faarax Afey mooyee wax waanwaan nabadeed rajo ka qaba ayaa beeshii laga waayey. Guuldarrada colaadda ayuu war u hayey. Wuxuu ahaa waayo`arag tabaalaha dirirta dhab u yaqaan. Wuxuu isku hawlay dhiig daadan doona inuu baajiyo.

Markaas buu ku taliyey: 'Bahdayeey, Mataan-Ciideed hadal baa ka soo yeeray oo la inooga keenaye, aynu run ku sugno. War jiraaba Cakaara ayuun buu imane, yaynaan innagu colaadda bilaabin, sidaasna eedda ku yeelan. Warka soo yeeray haddii uu dhab yahay isaga ayuun bay laan-deyri la duuliye, aan koranno oo nin fududi waa fadaqe, markii ay habboonaato wixii uu Mataan inagu falay aynu ka dhiidhinno, kana gar'allayno'.

Waxay ahayd waano waayeelkii soshay, hase ahaatee aan dhallinyaradii qaboojin. Dantii uu Faarax ka lahaana waxay ahayd laba wiil oo jifadiisa ahi intay israacaan inaysan Mataan raadsan oo bartamaha reerkooda ku dilin. Dhiig sokeeye 'baaji' ayuu islahaa. Adduun la ismaqli jirey oo garcaddaayada laga dambeeyey ayuu ahaaye, Faarax iyo odayadii talada ku raacay taas way ku guuleysteen oo da'yartii cartamaysey way u caqli-celiyeen.

Ha yeeshee, addin baa laga ballamaye, af lagama ballamin. Barbaar ay Salaado ilmo-adeer ahaayeen oo inay Mataan kala sed-qaadaan ugu horrayntiiba ku tashoonaa, asii odayadu ay tashigiisii ku baajiyeen ayaa tiriyey gabay digasho iyo dhaarba isugu jira. Digashadu waxay daarran tahay afartii neef oo Feyd ku jirey inuu ka hayo, Salaadona ay ka furan tahay, dibna xilo iyo xoolo toona aanu xaggooda uga sugeyn. Dhaartuna waa inuu dili doono marka ugu horraysa oo uu indhaha saaro. Wuxuu yiri:

*Sidigtii Falleedh iyo haddii Feydba lagu dhaafshey*
*Inantiina kaa furan tahay wallee feydo kuma raacin*
*Inaanse kaa 'fash' siin baa sidii faral Ilaahay ah!*

Gabaygaas oo aan shaki iiga jirin intaas inuu ka dheeraa ayaa Mataan loo keenay. Qosolkii islaweynida ayuu ku dhuftay. Wuxuu ka yaabay inanka gabyey dhiirranaantiisa. 'War show Ciid rag baa weli ku nool' ayuu isyiri. Haddana wuxuu isweyddiiyey: 'Tolow, ina-ayuu ahaa wiilka kuu dhaaran karaa? 'Inaan kaa 'fash' siin baa sidii faral Ilaahay ah' wiilka gabayga ku darsaday ma doqon baa? Ma dal dheer buu ka yimid? Ma wuusan aqoon kuu lahayn? Ma naftiisa ayuu nacay? Ma tol iyo cid ceshata, lana la talisa ayaanu lahayn oo waa waxaan xigto loo ogeyn?".



Maalintii uu tixda maqlay maalintii ku laba ahayd ayuu geedkii shirka yimid, isaga oo fardihiisii midkood ku jooga. Raggii fadhiyey kolkii ay arkeen sibraarka uu caanaha geela ka buuxsadey iyo qalabka sengaha u saaran ayay garteen in sodcaal ku jiro, waxna uu maaggan yahay.

'Mataanow, maanta halkee baad boqoole u tahay' markii la weyddiiyeyna wuxuu ku jawaabey inuu u socdo reerihii ay Salaado ka dhalatay, ayna joogtey. Wuxuu ku daray: 'Waa la ii dhaartaye, in la i dili karo iyo in kale ayaan soo hubsanayaa!'.

Amankaag iyo af-kala-qaad baa lala kala jeestey. Yaab baa raggii oo idil hadal kala soo bixi waayey. Nin laga quustay buu ahaaye, waayeelladii wax waano ah uma ay soo jeedin.

Hase ahaatee, faraskii kolkii uu jeediyey oo nadigiina u baaciyey ayaa kuray da' yar oo goobta wax ka fadhiyey ku yiri: 'Mataanow, maxaad Reer-Xandulle ka dooni?'. Wuxuu ku jawaabey: 'Mindhaa melaggay baa ku galay!'.

Barqadii dambe kolkii ay ahayd ayuu reerihii ku soo baxay. Meel kale kuma uu leexane, aqalkii Salaado ku jirtey oo uu soo tilmaansaday ayuu beegsaday. Geed ku yaal aqallada duleedkooda ayay qaafadii Reer-Xandullena shiran ku tahay. Wuu arkay, kumase uu leexan. Wuu garab-maray.

Isna waa la milicsaday. Ninka meesha marayana waa la toydey. Wuu hagoogan yahay oo afka ayuu taagayaa. Labadii waran ee xaasowda lahaa, kal horena Bullaxaar laga soo gaday ayuu isku garaacayaa oo 'dhalow...dhalow' kaga siinayaa! Cali-Dhan, Nuur-Jiir, Faarax Afey iyo raggii kaleba durba way garteen ninka garab-maray ee aqallada ku socdaa inuu Mataan-Ciideed yahay.

Faarax Afey mooyee, in Alle intii geedka fadhidey ayaa warmihii boobtay. Indhaha ayaa lala sii raacay. Aqalkii Salaado ku jirtey oo uu soo tilmaansaday ayay saantiisu u jeeddaa. Qoor iyo xero waa kaas 'dalaq' yiri oo sidii nin ay naagi u joogto kalsooni ku galay!

Taasi hadday dhacday, kolka ma weesaa dhawran? Niman mar afar lagu sheegay, marna shan lagu sheegay oo Cali-Dhan ku jiro ayaa iskummar kacay oo qalabkoodii qaatay. Mid walba hubkiisa waxaa ka mid ah hooto dhegaley ah.

Sidii lagu yiqiin, Faarax Afey ayaa isku deyey maantaasna inuu baajiyo dhiig sokeeye oo lamahuraan loo wada arkay. Raggii gedoodey ayuu damcay inuu qaboojiyo oo umalkooda uu biyo ku dul-daadsho. Wuxuu ku yiri: 'Ilmo-adeerrayaalow, wiilkaasi dhiil buu luliye, yaan lagu dayan oo habi la'aantiisa loo raacin'.

Mooggaanse taladiisii lagama yeeline, waa laga diidey. Shantii nin oo hootooyinkii ka horreeyaan ayaa aqalkii Salaado ku jirtey soo hor-joogsadey. Ma gelin oo aqallada gabdhaha in la galaa ceeb bay ahayde, ardaaga ayay ku hakadeen.

Salaado oo hubsatay in la kor-joogo oo uusan Mataan maanta baxsanayn ayay naxdini ku dhammaatay! Ma waxay nacaysey in aqalkeeda dhiig ku daato? Ma waxay diidaysey in daraaddeed la isku dilo? Ma Mataan bay rajo dambe ka qabtey? Sababta ma naqaan, ha yeeshee waxay ku dedaashey inay bedbaadiso!

Waxaa la weriyey markay ogaatey in la dul-joogo inay isagii ku tiri: 'Mataanow, labadayda lugood dhexdooda meel aan ahayn oo aad maanta ku baxsan karaysaa ma jirto!'.

Wuu ku qoslay oo 'waad i caayaysaa' ku yiri. Qalabkii uu sitey ayuu haabhaabtay, iyana intay daahyadii aqalka isku qabatay ayay shantii ardaageeda taagneyd ka bariday inaysan aqalkeeda soo gelin.

Waxaad moodda inay ka yeeleen, Mataan bayse 'halkaaga ku jir' ka la'dahay. Intuu gabadhii dib u dalfiyey oo raarta aqalka ku tuuray, daahyadiina dhulka soo dhigay ayuu yiri: 'Salaadooy, ma aniga iyo wiil Ciid joogaa la kala qariyaa?!'.

'Bax'dii uu yiriba, hooto xiiri baa naaska kaga dhacday. Tii labaad baa garabka dhexdiisa kaga dhegtey. Mid saddexaadina xiidmaha ayay



dhex-xushay. Waa lagu boobay oo halkii uu ku dhacay iyo aqalka kaadkiisa lagu kidfay!

Markii ay ka sii baxaysey waxay shantii ka soo sheegeen inuu lahaa: "Haddaan hooyaa"! oo uu ula jeedey, 'in la i dili karaaba hadda uun bay ii caddaatay!'.

Hadalkii kale ee laga maqlay, uguna dambeeyey isna wuxuu ahaa: 'Ilmo-adeerrayaalow, kolley i dishe e, timaha ciidda iiga celiya, yaan gabdhaha Ciideed tuurkayga oo carro leh i soo dul-marine!'. Codsi laga yeelay ayuu noqday!

Abwaankii jifada u ahaa, Axmed Muxumad Xirsi, ayaa loo warramay. Waxaa lagu yiri: "Mataan-Ciideed nimankii uu la xididay ee ay Salaado ku colloobeen ayaa diley oo cadba mar gooyey. Kaatunkii uu qabey lagama bixine, intay fartii gooyeen ayay xaggii birtu halakaysay dib uga siibeen!'. Axmed Muxumad markuu cabbaar aamusnaa ayuu yiri: 'Wixii aan idiin sheegi jirey ee Xasan-Mataan Eebbe ku abuuray waa waxa maanta dhacay!'.

Dharaartaas baa la gartay weedhiisii ahayd, 'Xasan-Mataan wixii Eebbe ku abuuray weli ma dhicin' ee uu ku celcelin jirey markii falal silloon looga soo tebiyaba. Wuxuu ahaa aayaha kibirka nin yaqaan; oday ay waayuhu bareen islaweynida iyo uunka oo lagu tunto inaan wanaag laga filan karin, looguna irkan karin.

### 8. Mag laba boqol ah!

Waa yaabe, ninkaas dayrada ah ee habaarka aadanuhu ku ururay, nimankii uu ka dhashay dhiiggiisii ayay sheegteen. Faarax Afey iyo Cali-Dhan oo ahaa jilibkii diley mag boqol halaad ah ayay ka oggolaadeen, ha yeeshee raggii Mataan ka dhashay taas way diideen. Saddex nin magtood oo saddex boqol oo halaad ah in laga siiyo ayay ku adkaysteen!

Waxay qabeen Mataan inuu nin ka weynaa, laba ka weynaa oo saddex nin u dhigmey! Guurti tolweynaha ka tirsan ayaa labadii qolo dhex-

dhexaadisey. Ugu dambaystii, waxay garsoorkooda cuskiyeen garan maynee, waxay xukumeen Reer-Xandulle inay Mataan ka bixiyaan laba boqol oo halaad!

Sidaas markay goynayeen waxaa cad inay isku raaceen laba nin inuu u dhigmaye, ma dhab baa inay odayadu sidaas rumaysnaayeen? Mase dhiig dambe oo daata ayay ku baajinayeen? Mase geela ayaa beelaha ku badnaa oo laba boqol oo halaad baan xilligaas wax weyn loo arkeyn?. Si kastaba ha ahaatee, reerihii Faarax Afey iyo Nuur-Jiir ay maqaddimiinta u ahaayeeni geelaas way bixiyeen, in kastoo raggii Mataan xigtada u ahaa qaarkood, aarsi mooyee, aanay wax kale ku qanacsanayn.

Iyada oo sidaas lagu kala joogo ayaa nin gabyaa ah oo markaas dalka dibedda ka joogey wuxuu maqlay Mataan-Ciideedkii geyiga qabsaday in dhegta dhiigga loo daray, nimankuu ka dhashayna, halkay uga aari lahaayeen, ay mag ka oggolaadeen!

Ninkaas oo ay dantiisu ahayd labada lafood inuu foodda isu geliyo, wuxuu ku sugnaa Cadan, waxaana la oran jirey Aadan Axmed Dubbe, wuxuuna ku magac-dheeraa 'Gabay-xoog' (Isaaq, sacad Yoonis). Tix diraddire ah ayuu magaaladaas ka soo dhiibey; taas oo ay meerisyadan koobani naga soo gaareen. Wuxuu yiri:

*Gooshaashka dhow bay safruhu gelin-baxaayaane*
*Galduur nimanka tegayow farriin gaaban iga geeya:*

*Niman baa Mataan gawracaan geed-xadhaadh bixin dheh!*
*Geyi lagu dhaxaa buu ahaa geed ay jebiyeen dheh!*
*Gadhka dhiigga waxa loogu daray talo ay gooyeen dheh!*
*Ma gaadine gadiid maalineey gabax ka siiyeen dheh!*
*Goblanyaay! Xuseen-Xoday muxuu gool u qalan waayey?*
*Gelliin lagama roonee muxuu gaas u bixin waayey?*

'Xuseen-Xoday'ga uu tixda ku magac-dhebey waa Mataan ina-adeerkiis run ah. Isaga ahaayaa iyo mid kale ahaayaaba, nimankii Mataan ka dhintay midkood ayaa dhagar u dhaqaaqay oo geesigii magaciisa



dhammaanshaha la raaciyey, waa Cali-Dhane, gawrac ugu jiidey! Talona maalintaas bay faro ka haaddey.

Warmihii baa la isu soofaystay. Cali-Dhan nimankii diley oo malahayga kolkii horeba gabaygii Ina-Axmed Dubbe kiciyey ayaa meydkii ka dulmaansooday . Waxay ku gabyeen:

*Ninkii Ina-Dubbaa nagu kashfay kooski Cadan-Weyne*
*Hadalkii na soo wada karyoo kuu na yiri yeellay!*

Reer-Xandulle oo laba boqol oo halaad shalay Mataan ka bixiyey waxay iyaguna mooggooda sheegteen in laba boqol Cali-Dhan laga siiyo oo geelii ay bixiyeen uun loo soo celiyo.

Ha yeeshee, Reer Dalal oo ahaa nimankii uu Mataan ka dhashay, arrintaas waa iska soo taageen. Dabadeedna, waxaa la weyddiistey, waxba yaanay laba boqol bixine, inay boqol uun Cali-Dhan ka keenaan. Taana 'maya' macangagnimo ka keentay ayay kaga jawaabeen!

Nin Cabdi Muxumad Xirsi la oran jirey oo isna ay Mataan ilmo-adeer ahaayeen, ayna muuqato inay islaweynida isku meel ka firsadeen ayaa magtii Cali-Dhan markii la weyddiiyey wuxuu yiri: 'Aadkeedaba in aan Ciid rag ku dhaqnayn waxaad ku garataa, iyada oo uu Mataan aragahayga ka maqan yahay haddiiba geel la i weyddiinaayo!'.

Waa yaabe, muxuu Mataan ka samaysnaa? Yaa dhiiggiisa xaaraan ka dhigay, Cali-Dhan iyo dadka kale dhiiggoodana xalaaleeyey? Jawaabtu waa kibirka iyo islaweynida!

Cabdi Muxumad iyo raggii ay xigtada ahaayeen kolkii waanwaan nabadeed wax lagaga waayey ayaa waxaa colaad dhab ah ku tashaday Faarax Afey, Nuur-Jiir iyo dhammaan Reer Xandullihii Cali-Dhan laga qabey. 'Tol beelaye, ma nin aan birtu karin baa jirta?' ayay isku guubaabiyeen.

Gabayo dhiiggu da'ayo oo tirtirsi iyo aardoon wada daarran ayuu Nuur-Jiir oodda ka soo qaaday. Gabayadaas oo waayadii dambe u batay wax

lagu hal-qabsado waxaa ugu caansan faraskiisii Caynab lagu magacaa-bi jirey kii uu kula hadlaayey ee uu ku lahaa:

*Haddaan Caynabow col iyo guluf caato kugu raagin*
*Waxaad coobbo weyn tahay haddii adan caday ka dhuubnaannin*
*Haddaan meydkù cagahaaga iman sida cagaar seexday*
*Cad nin quuta mooyee haddaan caano laga dhaaran*
*Haddii nabadda ceelkaan ku rido cidi ka soo saarto*
*Haddaan cududahoodu isku jabin cuurka Bah-Xawaadle*
*Sida laga calool-qabo haddaan Cali ka weynaannin*
*Canduu aabbahay dhalay haddaan dunidu ciiryoomin!*

Tix kale oo ta'ley ah oo iyana aad caan u noqotay ayuu tiriyey. Waxay talo kaga dhammaatay gacantiisa inuu Cali-Dhan ugu aaro oo uusan cid kale ku hallayn. Wuxuu go'aansaday 'Cabdi'gii ay Mataan ilmo-adeerka ahaayeen, hadalka quursiga huwanna laga keeni jirey in uu dhiiggiisa ku dhaashado!

Ta'leydii uu naftiisa ku guubaabinaayey ayaa waxaa naga soo gaarey meerisydan uu ku yiri:

*Tolla'ayeey! toddoba jeer miyaan xalayto soo toosay?!*
*Turbigiyo xiddigihii miyaan tiriyey oon eegay?!*
*Tiiraanyo iyo ciil miyaan taws la ledi waayey?*
*Sidii adhi tigaad cunay miyaan taaha ku caweeyey?!*
*Ma tunkaa i buuxsamey sidii toban-jir awrgaala?!*
*Ma tallaabadaydaan haldhaa anan wax tuugaynin?!*
*Sida laanka tawlka ah miyaan tahan u dheeraaday?!*
*Laba saanac ii tumay miyaa tiirsan dhinacayga?!*
*Ma takoorinkii baa magliga tabacyo ii yeeshay?!*
*Miyay tabaraday laba qabiil taws dhex-dhigi weydey?!*
*Belaayadan 'i taabo' leh miyaan toosin kari waayey?!*

Maalintaas, isaga oo aan biyo-dhac u yeelin, ayuu tixdii halkaas ku jooji-yey. Raggu kala il-dheere, nimanka loo dhaaranayo nin ku jirey oo ay Mataan isxigeen ayaa dareen galay. Wuxuu raggiisii ku yiri: 'Bi'i waaya



e, halka uu gabayga ku ekeeyey Nuur-Jiir kas buu u yeelay. Gabaygu ma dhammee, dhexda ayuu joogaa. Kolkii wax dhacaan oo nin kabaal-keennu ku jabo uu dilo ayuu dhammayn doonaaye, war hoy haddeer ha laga gaashaanto. Eray aan sannado inaga harin ayuu gabaygaas ku soo dari doonaaye, Nuur-Jiir haddeerba ha la dilo. Ma haddaad diiddaan baa? Ha loo dul-yeesho wixii ka yimaada!'.

Taladaas dheg looma dhigin, Nuur-Jiirna in loo diro gaade soo dila lagama shirin oo la isuguma iman. Ninba waa mare, isagana galabtii dambe ayay u soo martay. Cabdi Muxumad Xirsi oo, sidaan soo sheeg-nay, ay Mataan ilmo-adeer ahaayeen ayuu haylaha ka caseeyey! Gab-aygii kala dhimmanaa ee uu ku joojin jirey:

*'Miyay tabaraday laba qabiil taws dhex-dhigi weydey?!'*

… ayuu galabtaas dhammeeyey oo wuxuu ku daray, kuna ebyey:

*Ma Cabdaa turaabta isku rogey waa tabtaan wadaye?!*
*Goortaan ku taagsaday miyuu teleley oo reemay?!*
*Ma tummaatidii baan wadnaha tahan wax weydaarshey?!*
*Libaaxuba dhurwaa toban kunuu tulud ka qaadaaye*
*Ninkii faro yaraan igu tuhmaa talo ka hoostaaye*
*Wallee aniga waa lay tixgelin tiirrinnimadayda!*

Sidaan soo aragnay, Mataan oo jifadiisu ay nin weyn u tiqiin waa tii la diley. Cali-Dhan oo ka darraa isna waa tii la diley, dabadeedna waa tii loogu aaray Cabdi Muxumad Xirsi. Mago dhawr ah ayay labada qolo kala qaateen, ha yeeshee, nabad laguma helin, waana la kala irdhoo-bey.

Hooggii dhacayse laguma taamilo-qaadan. Dagaallo hor leh ayaa foodda la isdaray. Dhallinyaro timo-cagaar ah ayaa haadda loo waray. Waayeel aan laga maarmi karin ayaa warmaha laga asladay. Qolo waa laand-heere oo tiro ayay 'wax ku muquuni' isleedahay, qolada kalena mintid-nimo ayay isku hallaynaysaa, sida ka muuqta gabaygii u dambeeyey ee uu Nuur-Jiir tiriyey.

Runtii, labada qoloba goobihii ba'naa ee ay ku kulmeen waa ku hoobteen. Ha yeeshee, sida ay caadada Soomaalidu tahay, tu' waliba iyada ayaa ku andacootey guul u soo hoyatey iyo jab ay dhinaca kale ku martay!

★ ★ ★



# 3



# AADAN GALAYDH

**"Markaan tabar hayeyna talo ma hayn,**
**maanta oo aan talo hayona tabar ma hay!**
**Adduun i khatel!"**

(Aadan Galaydh)

Tanina waa sheeko isla waayadaas geyigeenna ka dhacday oo ay Soomaali badani weli xusuusato; sheeko maahmaaho iyo halkudhegyoba reebtay; sheeko-baas murugo miiran ah oo in door ah oo taariikhda degaankeenna ka mid ah xanbaarsan. Waa sheeko laga cawdu-billaysto oo soo-noqodkeeda Eebbe laga magan-galo, werinteeduse ay, malaha, wax-ku-qaadasho leedahay.

Qiyaasta waxay ku aaddan tahay bartamaha qarnigii sagaal iyo tobnaad ama 1800 iyo kontonnadii. Waa agagaarka Buuhoodle iyo tuuraha, markii ay roobban yihiin, quruxda badan. Waa hawdka dhaqashada geela aad mooddo inuu Eebbe ugu talo-galay markii uu dhulkiisa meelba si ugu talo-gelaayey.

Niman isbiday oo xoog iyo xooloba dad u sheegtay ayaa deggan. Hantida lagu dhaataa waa geel iyo faras colka looga ilaaliyo. Dhaca iyo dilku waxay ahaayeen xeer aan qornayn. Kolkii ay ribbato oo ay arrini geesna u bixi weydo, ma jirin awood dhexe iyo dawlad loola cararaa, aan ahayn odayadii beesha ee inta badan taladooda la diidi jirey, mararka qaarkoodna iyaga laftoodu ay dab oogan sii oogi jireen.

Gaalo dhulka ma soo gelin oo qori iyo rasaasi weli gacanta reer-miyiga ma soo gelin. Laba waran, hooto dhegaley ah, gaashaan iyo faras baxdooy ah qoladii meel ka buuxsata ayaa geyiga ugu xoog roonayd.

Wax la cunaa waxa ay ahaayeen cad iyo caano iyo miraha ay dhirtu bixiso oo xilligaas lagu gaajo-beeli jirey. In kastoo markii debin la joogoba ay safruhu timir ka keeni jireen, haddana soor magaalo waa lagu diimi jirey, inay wax kala maqan tahayna, Soomalidii waayadaas lama ahayn.

Muddo kolkii la joogo ayaa loo safri jirey beladdada xeebaha ku yaal oo laga soo gadan jirey laba go' oo bafto ah oo raggu qaadan jirey iyo hadba wixii marashi ah oo dumarka looga soo helo.



Waxay qabeen noloshaas fudud ee ay ku jireeni inay 'nololaha' ugu sarrayso oo qolo qadan iyo haybad ku haysataa aysan ifka ku dhaqnayn! Nin walba qummanihiisa ayaa qoorta ugu jirey oo isaga ayaa boqor isu ahaa, Ilaah mooyee, cid kalena wax uma ogeyn!

## 1. Qabaalkii la dalooliyey, lase eeday!

Haddba, maalin maalmaha ka mid ah, amminta oo jiilaal ah, agagaarka Buuhoodle ceel ku yiil xoolihii ha loo soo aroorsado. Dhawaaqii heesta geela ayaa isu baxday oo barbaarba barbaarka uu ka qaylo dheer yahay ama uu ka cod wanaagsan yahay ayaa loo dheg-taagayaa.

Ceelka rag keliyihi ma joogaane, waxaa iyana jooga hablo quruxdooda lagu sheekaysto oo ama aryo soo aroorshey ama, markii mawga loo buuxiyo, dhaamanka la carraabi doona. Kuwaas ayay barbaartu isha iyo laabtaba ku hayaan, marka ay jawaabta geela ku dheeraysanayaan ee ay codkooda intii ay gaarsiin karaan gaarsiinayaan.

Hawsha shubaasha waxaa ku dhex qarsoon tartan hoose oo loogu jiro u-bogidda dheddigoodka bilicda san. 'Hebel dhawaaqiisa ma maqlaysey? Codkiisu ma ku jiitey? Muuqiisa ma la yaabtay? Kolkii uu wadaanta baacinaayey muruqiisa ma u fiirsanaysey?' ayay ahayd sheekada habluhu kolka ceelka laga fulo ee la guryo-tago iyo, weliba, dhammaan maalmaha labada kal u dhexeeya.

Ha ahaatee, nin-karmeed oo idili wuxuu ku dedaalayaa dhaqso intuu shubto inuu casar-dheere dhabbaha cagta u saaro geel iyo fardo wixii uu soo aroorsaday, fiid-horaadkana uu xeryahoodii soo joojiyo. Taasise waa caadada nin-doorka maalinta ceel sida wacan ugu darbadaye, waxaa isna jira mid goor dambe ceelka xoolaha keena oo hadhowna uu gabbalku ugu dhaco, waalkiisna uu ku maadsado!

Waxaa isna ka daran midka kala daadsan ee isaga oo aan saabaankii iyo yeeshii aroorka wadan isa soo dhiga. Rag kale yeeshiis ayuu isku hallaynayaa, waqtiguna baryo lagu naco ayuu uga idlaadaa! Wuxuu kororsadaa in la kahdo haddiiba qabaal, dar ama wadaan uu ka helo tol iyo xidid kolba ciddii uu dawda kula kulmo.

Maalintaas iyada ah ayaa waxaa ceelka joogey oo durba xoolihiisii waraabsaday nin-door Axmed Samatar la oran jirey oo 'Burgal' lagu naanaysi jirey. Burgal oo hawlihii shubaasha ka nasanaaya ayaa waxaa u yimid nin kala daadsan oo ay aqoonni ahaayeen, saabaan la'aanna uu geeliisii weli la oomman yahay. Ninkaas oo isna la oran jirey Maxamad Cabdille Liibaan ayaa wuxuu Burgal weyddiistey, geela ha ku shubtee, inuu qabaalkiisa amaahiyo.

Marba haddii aanu u baahnayn, haleeladiisuna ay cokan tahay ayay Burgal ula ekaatay inuu yeelo baryada ninkii kala daadsanaa ee qabaal la'aanta xoolaha soo aroorsaday.

Maxamad Cabdille oo weli qabaalkii haysta, geeliina bar u cabbey ayaa waxaa isaguna ceelkii yimid barbaar qoys ka dhashay oo wixii uu doono 'hoo' mooyee, aan 'maya' lagula dhici karin. Waa Cumar Aadan Galaydh. Waa labaatan-jir ay dhawr-iyo-toban rag ah oo wada gaashaanqaad ah ay walaalo ahaayeen. Waxaa ka daran oo goobaha xasaradda iyo dagaalkaba uga hormara aabbahood Aadan Galaydh oo geesinnimo, kibir, madax-adayg iyo hanti adduunyoba loogu roonaaday, ayna la ahayd in aan intaasba cidina kula tartami karin.

Burgal, waa ninkii qabaalka lahaaye, waxay degmo qur ah ka soo aroreen Cumar Aadan. Aadan Galaydh iyo wiilashiisa oo tabar iyo taagba ku dhaadanaayey ayaa waxaa la degganaa beel dhan oo hooskooda harsanaysey, saha colaaded maalintii ay joogtona gaashaankooda ku gabban jirey. Beelahaas dalladda difaaca Aadan Galaydh iyo jilibkiisa ku hoos-noolaa ayuu Burgal ka mid ahaa, isaga iyo intii la midka ahaydna uma bannaanayn inay ku gacan-sayraan amaba ay diidaan talo kasta oo qoysaskii ay danwadaagta ahaayeeni u soo jeediyaan.

Taas isaga oo ku tashanaaya oo og Burgal iyo yeeshiisiiba inay ceelka uga horreeyaan ayuu Cumarna, qabaal la'aan, geelii soo aroorsaday. Burgal oo weli nasanaaya intuu soo abbaaray ayuu ku yiri: "Kac oo qabaalkaagii ii keen, aan geela ku waraabsadee". Halhaleel ayuu isna u beegsaday dawdii uu Maxamad geela ku waraabsanaayey, si uu Cumar qabaalka ugu keeno. Maxamad wuxuu ku jawaabey: "War geelii weli bar baa iga oommane, ii kaadi aan israaciyee"'.



Burgal baa inta Cumar ku soo noqday intii uu Maxamad ku soo yiri ku yiri. Cumar baase inta Burgal dhab u canaantay kol labaad dib u celiyey, markaasna, qabaal la'aan, ayuu Maxamad kala soo noqday.

Cumar Aadan oo dhawr halaad oo uu geeliisa ugu jeclaa ay ku ololeen ayay caro 'dig' siisay oo inta Burgal haaraan iyo canaan ku asqaysiiyey mar saddexaad dib u celiyey, uguna hanjabey, hadduu mooggaan faromarraan ula soo noqdo daqar dhiig leh inuu iska hoorin doono, ceelkana kala carraabi doono!

Labada nin ee dhexdooda ay Burgal kabuhu kaga dhammaanayaan, waa Maxamad iyo Cumare, waa ilmo-adeer awoowga ay ku kulmaani uu aad u dhow yahay . Mar saddexaad ayuu Burgal ku noqday Maxamad oo aan waraabintii geelu u dhammaan, kuna yiri: "Cumar Aadan baa qabaalka doonayee, Maxamadow biyo dambe oo aad ku shubtaa yay jirin".

Maxamadna, barbaar kibir ka buuxsamey buu ahaaye, intuu yiri 'waan caroonayaa' oo murjis meel dhow ugu mudnaa soo qaatay ayuu qabaalkii bartanka kaga dhuftay oo dalooliyey! Wixii biyo ku jirey ayaa mar qura ciidda ku arooray, halkaas ayuuna ku dhaqan-beelay!

## 2. Dilkii Ina-Cabdille Liibaan

Burgal baa kolkaas si degdeg ah Cumar ugu soo laabtay oo wixii dhacay ugu tebiyey. Cumar oo hadalkaas loo sheegay, ramadkii iyo rimmaydii uu soo aroorsadayna ay weli ka dul-ololayaan, maxaad ka filaysaa? Dhulka ayaa la wareegey. Xiniinyo-taabad ayuu u qaatay. Murjisku inuu qabaalka ku dhacay uma uu qaadane, wuxuu u qaatay in isaga lagu dhuftay!

Wuxuu fali lahaa kama fekarin, mana uu laballabayn. Durba waxaa ku soo dhacday, 'dagaal nin ka tashaday ma galo' maahmaahdii ahayde, warankii uu ceelka la yimid ayuu midigta la helay. Dawdii uu Maxamad geela ku waraabsanaayey ayuu tallaabo fudud ugu dhaqaaqay. Kolkii uu la sinnaana warankii kaalka ahaa ee maanta oo kale uu u tuntay ayuu naaska bidix hoostiisa kaga tummaatiyey. Wadnihii ayuu laba ka dhigay,

markaas baa, afka iyo feeraha sare dhexdoodaba, waxaa ka soo butaacay dhiig kulul oo dacdii ceelka inta dhalan-rogey casaan ka dhigay!

Maxamad iyo qabaalkii oo is-agyaal, la isuguna aaray ayaa la soo kortubtay! Midi waa meyd oo waa Maxamad, midna wuu daloolaa oo waa qabaalka. Rag allow, qof iyo qori, ma la isugu aaraa? Mase degaankeenna oo keliya ayay waagaas ka suurowdey, welina ay ka suurowdaa?!

## 3. Taladii waxgaradka

Durbadiiba, warkii baa faafay. Ceelkii wax ka dhaceen kuma uu sinnaane, intii aan qorraxdii dhicinba, carshintii buu wada saabtay. Waa la oogsadey. Dhiillo xun baa geyigii ku fidday. Colaad baa soo ogogyeelatay. Awel waa la isdhex-degganaaye, waa la kala fogaadey. Waa la isu uur-samaaye, waa la kala ufooday. Waxaa muuqatay, haddii aan halhaleel wax lagu furdaamin, dagaal sokeeye inuu lamahuraan noqon doono.

Talo-xumo meeshii ay joogto talo-fiicnina way joogtaaye, odayo ayaa markiiba isxilqaamay. Cumar oo ah ninkii Maxamad diley waxaa dhalay Aadan Galaydh oo 12 barbaar ay mar qura u hanaqaadday, wegen fardo ahi xeryaha ugu jiro, dhawr bahood midba galab ku carraaba oo geel kun halaad lagu hilaadiyey dembaaba.

Odayadii waxay talo ku gooyeen ninkii dhintay in laga bixiyo mag boqol halaad ah. Boqolkaba in Reer Aadan laga qaado xeerku ma ahayne, waxay ahayd intii ay mag-wadaagta ahaayeeni inay wada bixiso.

Waa la og yahay oo Reer Aadan qayb yar uun baa magtaas kaga soo aadeysa, sidaas darteed ayaa dhibaato halkaas ka imaan karta aan cidina u oddorosin. Weliba, nimankii uu ninku ka dhintay guddoonkaas way oggol yihiin oo markiiba 'hawraarsan' ayay kaga jawaabeen.

Tashigaasi kolkii uu dhacaayey, Aadan Galaydh wuu maqan yahay oo geyiga reeruhu degganaayeen kuma uu sugna. Doollo ayuu aroos ku yahay. 'Waxaas iyo waxaas baa dhacay, talona halkaas bay nala dhaafi weydaye, noo imow' farrin dulucdeedu tahay ayaa ku maqan.



## 4. Summad-leefid!

Markii ay farriintaasi gaadheyna, Ina-Galaydh waxba kama uu soo qaadin. Warkuba ma gilgilin. Dilka iyo qaantu, innaba wax dareen ah ma gelin. Ceesaan gees laga jebiyey, dhiilladuba ugama duwanaan! Ismaba uu shiddayne, aqalkii weynaa ee uu ku aroosay ayuu dangiigsadey. Malaha wuxuu isyiri, 'cid kastaaba gacantiisa ha ku dhimatee, kol haddii aan nafle Cumar wax yeeli karin, dan ha u geline, ilaxirkaaga adkayso! Qoyska Reer Aadan cidda qoriga ku tuuri kartaa, halkee bay ku uuman tahay!'. Waxaadba mooddaa, intii uu ku canaanan lahaa, falkii uu wiilkiisu ku kacay inuu ugu bogaayey, ayna la ahayd wixii uu isba yeeli lahaa inuu yeelay!

Farriintaasi intii ay Aadan iyo Doollo ku maqnayd ayaa lafihii ay magwadaagta ahaayeeni geel 99 halaad lagu sheegay iska ururiyeen. Geelaas oo la hayo, Reer-Aadanna laga sugaayo inay ku soo daraan tuludda boqolka ka dhimman ayuu Aadan soo dhigtay.

Odayaashii jifada u ahaa kolkii ay isu soo fariisteen waxay ku yiraahdeen: "Aadanow, Ilaahna saamahaaga soo qaad, annaguna waaba ku sugayney". Wuxuu ku jawaabey: "Oo billaa baanan ka rayn!".

Jawaabtaas halista ah lama dhuuxine, kaftan baa loo qaatay. Geelii magta loo soo soocay iyo tuludda Reer- Aadan laga sugaayo ayaa haddana loo sheegay. Markaas ayuu qoslay oo qosolkii ku dheeraaday!

Cabbaar haddii hadal laga dhawraayey ayuu yiri, 'Ragow, horta jirtaayoo, geel Ilaah baa xeradayda ku shubay oo iguma yara, qaalin bixinteeduna waxba iguma aha'. Markaas buu aamusay oo madaxa hoos u foorariyey, dhulkana jifeeyey. Cabbaar ka dib ayuu inta cirka dhawray hadalkii ku noqday oo yiri, 'Haa... waa run oo geel iguma yara. Waxaase ceeb iyo foolxumoba igu ah qaalin igu magcaaban oo summadda geelayga lihi geel kale inay ka dhex-muuqato ama dar aan kayga ahayn ay soo gasho!'. Goobtiina wuu ka dhaqaaqay.
Rag aan hadalkaas adag ku quusan ayaa isku deyey inay u caqli-celiyaan, ha yeeshee way ku guuleysan waayeen. Jawaabtii uu qoladaas dambe siiyey waxay noqotay su'aal uu iyagii ku soo celiyey oo ahayd,

'Waynu isxoolo-naqaane, geelayga ma laga helayaa tulud aan summad-daydu ku dhignayn?'. Waxay ku yiraahdeen, 'Maya'. Kolkaas buu kaga yaabsaday: "Haddaba, sidee baan ku bixiyaa, summadda miyaan hasha ka leefayaa?".

Waanwaan kolkii lagala quustay oo waano lagala samray ayaa faraha laga qaaday. Bulaan baa aloosmay. Jilibkii uu Ina-Cabdille Liibaan ka dhintay, ciil iyo carao ayaa ku gaamuray. Waa la isduudsiyaaye, kibirka iyo cayaayirka ayaa uga darraaday!

## 5. Wiilka ifka laguma ciiline...

Cumar oo ahaa ninkii uu Maxamad gacantiisa ku baxay ayaa waxaa lagu naanaysi jireen 'Cumar-Aji'; waase wanaaggii iyo ragannimadii uu bulshadiisa dhexdaada kaga caan-baxay. Halka uu odaygu arrinta ka istaagey ayaa la foolxumaatay. Waddo aad u qalloocan inuu aabbihiis ku dhabbaynaayo ayaa u muuqatay. Markaas buu inuu la hadlo ayuu ku tashday; inuu ka dhaadhiciyo waxa laga doonayaa inay aad uga yar yihiin waxa lagu daboolaayo. Wuxuu go'aansaday inuu ugu masaleeyo: nabad tulud keliya lagu helayaa inay cidla'-ka-qaadasho tahay.

Wuu u soo gole-fariistay. Wuxuu ku yiri: "Aabbow, hashaas bixi oo sad-dex sababood dartood ku bix"'. Aadan baa inta xaggii inanka dhawray oo indho quursi buuxiyey inta ku eegay ku yiri: "Bal wad, saddexda aad sheegaysaa waa maxay?".

Markaas buu yiri: "Waa marka koowaade, aniga ayaa ninka diley oo ma dafirsaniye, hasha sidaas ku bixi. Waa marka labaade, aniga oo laba-iyo-toban-jir ah ayaan talada tolkay galaye, aniga oo maanta labaatan-jir ah ha iga saarin oo, haddii la i dilo, dib dambeeto u geli maayee, taana ku bixi. Waa marka saddexaade, ninka dhintay waa sokeeye, godob so-keeyana lama hayn karee, taana tuludda ku bixi".

Aadan Galaydh wuxuu hadalkii inankiisa u qaatay hadal nacas. Mar qura ayuu doqon ula ekaaday! Sidii isaga oo shir weyn iyo geed lagu dhan yahay ka dabeebanaya ayuu inta istaagey cod caro ka buuxdo ugu



jawaabey, kuna yiri: 'War wiilka ifka laguma ciiline, ma uurka hooyadiis baa lagu ciilay?!'. Weedhaas oo maantaas ka dib ay bulshada Soomaa-lidu badiba u qaybtay, ba' iyo hoog mooyee, hadal kama dambeyn!

## 6. Dilkii Cumar-Aji

Xigtadii magta soo ururisay iyo raggii inta isxilqaamay iska soo soocay ayaa talo isugu noqday. Waxa ay isweyddiiyeen: arrinta 'Aadan'kii jifada u ahaa uu sidatan ka yeelaayo, sababta ay iyaga u cuslaynayso! Wax-aa la garawsan waayey halkii uu Aadan xaajada iska taagey. Taasina waxay sababtay go'aan aan qaadashadiisa waqti badan la isaga lumin oo ahaa: nin waliba tuluddii uu hortii geeliisa ka soo eryey inuu xeradiisa ku ceshado! Tulud dheeraad ah nin ku yabooha oo tii Aadan laga rabey halkii ay ka maqnayd soo joojiya la iska waa, colaadina sidaas bay isha baalkeeda u soo jirsatey!

Maxaa dhici doona? Aafadu halkee bay kolka hore 'tas' oran doontaa? Guryahee bay ku dambayn doontaa? Markaas lama ogeyn, ninkiise waxgarad ahaa wuu garanaayey daruuro colaadeed inay geyiga dul-hobsheynayaan!

Waa la isdareensaday. Dhiilladii ayaa dhabowdey. Daa'imo carruureed mooyee, qaangaar waliba qacda dhici doonta wuu u dheg-taagayey. Aadan Galaydh mooyee, nin aan dareen gelini beelaha kuma jirin.

Waxa dhacay, wixii uu falay iyo waxa soo aaddan sidii nin moog ayuu Ina-Galaydh, goor waabberi ah, Cumar-Aji u yeeray. Wuxuu ku yiri: "Orod oo geela horweynka ah u kaxee Doollo iyo reerihii aan dayrtii hore arooska cusub ka aoosay.'. Cumarna 'Hawraarsan aabbe' ayuu yiri.

Nimankii uu ninkooda qabey, aabbihiisna uu magtoodii duudsiyey oo duullaan ah iyo waxaa is-helay Cumar oo geelii Doollo u wada. Balli dhawr kiilomitir Buuhoodle waqooyiga ka xiga ayuu Eebbe isaga hor-keenay. Ballaysimo wacan intay u qaateen ayay halhaleel warmihii ugu boobeen, dabadeedna, isaga oo gal dhiig ah ku dhex-jira ayay isaga tageen oo fardahoodii ka jeedladeen!

Ilaa maantadan la joogo waxaa balligaas loo yaqaan 'Cumar-Aji'; sidaas darteedna kol walba oo la ag-maraaayo ayaa waxa la isxusuusiyaa sheekadaas naxdinta leh iyo talo-xumadii dilka barbaarkaas sababta u ahayd. Waxse laguma qaato!

## 7. Wallee saa ma illaawo!

Kolka, haddii Cumar haadda lagu cashaysiiyey, ma wax baa haray?! Dhallinyaradii ay xigtada dhow ahaayeen iyo, gaar ahaan, barbaartii ay walaalaha ahaayeen ayaa gedoodey. Waxaase ugu darraa geesi ay kala bah ahaayeen oo inta samri kari waayey halkii la isugu yimaadoba ka marin jirey gabayo iyo geeraarro baroor ah oo dhiiggu da'aayo.

Bilawgiiba, tix farriin ah ayuu walaalkiis ugu diray xabaashii dhowaanta la geliyey; isaga oo ugu ballan-qaadaya inuu u aari doono oo rag badan oo awgiis loo diley uu, si degdeg ah, aakhiro ugu arki doono! Wuxuu yiri:

*Wixii hagar ah aakhiraba waad ka hadli doontaaye*
*Haddeer iyo haddeeda han haddaad habaqle meyd weydo*
*Ifka igu habaar Cumar haddaan hibashadaa raagin!*

Farriin gabay ah ayuu maalin kalena godka iilka ugu diray; isaga oo u sheegaaya raga aawadiis loo gebawri doono iyo, guud ahaan, coladda ba'an ee dilkiisu uu geyiga Ciideed u soo jiidi doono. Wuxuu yiri:

*Cirka da'aya Cumarow rag baan calaf u laabnayne*
*Aan caafimaad iyo sugeyn caano-darareede*
*Ciiddaba malaha waa la rogi caawa dabadeede*
*Oo cududahoodaysku jabi nimanka Ciideede!*

Kol saddexaadna waxa uu tiriyey geeraar calool-xumo iyo tiiraanyo miirani ay ka muuqdaan; kaas oo uu ku xusaayo sababaha uusan marnaba Cumar-Aji dilkiisii ku illoobi karayn. Markaas buu yiri:

*Saajicii Cumar Aadan*
*Silicay u dileen iyo*



*Baarqabkii Ina-Seenyo*
*Suudigay ku qasheen iyo*
*Saddex-jeer-noqodkii:*
*Wallee saa ma illaawo!*

Geed dheer oo aan la laaci karin dushiisa ayay nabaddii isku shareertay.

## 8. Nin waalan iyo nin wedkiis galay

Odayadii hortiiba xaajada ka taliyey, asii Aadan Galaydh soo loodin kari waayey ayaa tashi kale dhulka u xarriiqay. Waxay istuseen dhiig dambe oo daata in aan cidina ku bulaalayn. Inay baajiyaan ayay talo ku goosteen.

Waxay gooyeen: Nimankii Cumar diley markii koodii la duudsiyey, waa Reer-Suubaane, in rag loo diro oo waxa ay maaggan yihiin ee xiga laga soo ogaado. Waxaa ergadaas hor-maray nin la oran jirey Cali Baargooye oo ahaa dagaalyahan, haddana ergoyahan ku tilmaannaa.

Dhawr cisho ka dib ayuu Cali ku soo noqday halkii laga diray, isla markiibana shir buu wacay. Aadan Galaydh wuu fadhiyaa. Waxaa isna goobjoog ah Qoorwaa Jaamac oo ay ilmo-adeer yihiin. Waa nin geedaha la isugu yimaado ka taliya, hase ahaatee u-xuslinta waanwaanta nabadeed looga fiican yahay. Nin hebel la yiraahdaa ma maqna.

Cali Baargooye oo madaxa ergada ahaa ayaa afkiisa la dhawrayaa. Waa la dherarey oo la sugi waayey. Isna wuxuu doonayaa in geedka lagu soo dhammaado oo nin kol dambe iman doonaa aanu, saan iyo salaan, hadalka uga kala goyn. Shanqartii kolkii ay dhammaatay ayuu raggii iska dhex-taagey, warkiina ku bilaabay: "Ragow, waxa aannu maanta wadno, nin waalan iyo nin uu wedkiis galay ayuun baa diida!". Wiil-hooggii makaadsadaha ahaa ee geedka wax ka fadhiyey, Cumarna ay isxigeen ayaa inta soo boodey yiri, "Waar ararta naga daayoo, noo sheeg waxa aad nimanka kala soo noqotay!".

Cali Baargooye wuxuu ku jawaabey: "Saddex arrimood ayaan nimanka ka wadaa. Waa marka koowaade, ninkoodii oo ay duudsiyaan, magtii-

siina ay ka haraan. Waa marka labaade, Cumar Aadan oo ay boqol iyo labaatan halaad ka bixiyaan. Waa marka saddexaade, tolka oo wixii dhacay ka heshiiya!'.

Wiil-hooggii ma-kaadsadaha ahaa ee geedka wax ka fadhiyey, Cumarna ay isxigeen ayaa inta kol labaad soo boodey wuxuu Cali ku yiri: 'Maxaad adigu kaga talin lahayd?' Cali Baargooye wuxuu ku celiyey weedhii uu hadalkaba ku bilaabay ee ahayd: 'Waxa aannu wadno, nin waalan iyo nin uu wedkiis galay ayuun baa diida!'.

Qoorwaa Jaamac oo kaalkiisii inkaarraa gilgilaya ayaa su'aal qalloocan goobtii ka soo jeediyey oo yiri: "Cumar Aadan oo nool ma la helayaa?". Cali Baargooye wuxuu ku jawaabey: "Maya". Qoorwaana wuxuu yiri: "Haddaba, nabadna la heli maayo!".

Aadan Galaydh baa isna kacay oo inta hadalkii boobay yiri: "Ma waxaan Qoorwaa iri, mase waxaan ninkaas nacabka ah ee farriinta keenay iri: Qooraawaa waxaan iri: Ina-adeerow, hadalka tiriye, ha igala noqon oo, raggu ways geddiyaaye, weedha aad maanta tiri, berri iyo weligaaba, ku adkayso!. Ninkaas nacabka ah ee farriinta sidey waxaan iri: Talo iyo tabar toona kaagama baahniye, wixii aad i tari lahayd, adigu istar!".

Laguma raagine, degdeg baa geedkii looga dareeray, iyada oo waxa soo aaddan aan la hubin, lase malayn karaayo!

## 9. Maantuu Boos-Illaawe bedbaadey

Cali Baargooye, ergoyahankii taladii uu keenay lagu diidey, ciil buu la carraabay. Sidii nin waxa dhici doona la ogeysiiyey ayuu caynka hoosta ka geliyey oo geyigii jilibkiisu degganaa oo idil toban geeddi ka durkay.

Dabadeedna, fardo iyo qalab dagaal wixii la heli karey ayaa la isu urursaday. Jilibkii Cumar diley kolkii koodii la duudsiyey way qaxeen oo fogaadeen. Kol haddii ay nabaddii ceel dheer ku shalwatay, jawaabtii Aadan Galaydh iyo Qoorwaana loo soo tebiyey, maxaa dhigaya ruumanka warmaha lagala soo gaari karo? Waa waxba.



Subaxdii dambe ayaa waxaa duuley amaba dooxateeyey Aadan Galaydh, toddoba barbaar oo uu dhalay iyo weliba rag uu Qoorwaa ku jiro oo dhagar ku tashan. Waxay heleen afar nin oo walaalo lagu sheegay, kana tirsan qoladii uu Cumar Aadan gacantooda ku baxay.

Sheeko-yaqaannadu waxay weriyeen oo yaab leh, afartoodu walaalaha ay ahaayeen ka sokow, Aadan iyo iyagu inay habrowadaag ama ilmo-habreed ahaayeen oo afartooda iyo isaga hooyooyin uur wada jiifey ay kala dhaleen! Haddii ay run tahay, maxaa, tolow, isla doontay? 'Ma dareenka dadka ayaa lagu shirrabaayey?' ayaan isweyddiiyaa.

Runta aan duugoobini wax kastaba ha uga jeeddee, Aadan Galaydh sidii dugaag gaajo dubatey oo tulud baxsad ah ku soo baxay ayay farxadi u dhammaysay! Kaalkii uu sitey ayuu si wacan u qaabsaday. Intii aanu xasuuqa ku bilaabin ayuu Qoorwaa ku yiri: 'War islaantii kuu habaryarta ahayd mid u dhaamiya, magacaa jirye, u reeb oo, Cabdi baa afartooda u ragannimo roone, isaga birta ka baaji!'. Aadan Galaydh wuxuu yiri: 'Qoorwaayow, maanta ka hor, intaas waad ila dhaantey! War bi'i waaye, haddaan Cabdi-Timo-dhaqe daayo, Boos-illaawe maxaan ka dilayaa?'. Qoorwaana taladiisii kuma uu adkaysane, Aadan iyo afartii ayuu faraha isaga qaaday.

Halkii buu saddex Cabdi ku jiro dhegta dhiigga ugu daray, kuna ruuxtogey, Boosna uu ku sii daayey!

Qoorwaa oo oraahda 'hoy day' halhays u lahaa ayaa Boos oo sii socda farta ku fiiqay, kolkaasna Aadan ku yiri: "Hooy day, wallee kaas uun baa ku dili doona!".

## 10. Sengihii 'Roor-Godan' la baxay

Maalintaas ka dib, dagaallo badan, asii yaryar oo aan loo magac-bixin ayaa dhacay. Gaadmo iyo bareer, duullaan weyn iyo dooxataynba, ayaamo aan yarayn baa foodda la isdaray. Guryo door ah ayaa haawadey. Dumar badan baa asay xirtay. Carruuro aabbeyaal lahaan jirey baa agoontoobey. Labaatan-jir miiran baa gego cidla' la dhigay, iyada oo aan cidina aasin. Gablan iyo guryo ba'ay baa labadii dhinacba la soo gudbonaadey.

Dagaalladaas yaryar, asii isdabo-joogga ahaa ayaa waxaa ku soo shaac-baxay Boos-illaawe oo ahaa ninkii uu Aadan Galaydh liidi jirey ee, maalintii uu hortiisa walaalihiis ku laayey, isaga dilka ka baajin jirey. Wuxuu muujiyey, loona aqoonsaday inuu yahay nin geesinnimo iyo mintidnimoba isku darsaday.

Dabadeed, Boos-illaawe, isaga oo isu diyaarinaaya goobo waaweyn oo soo fool leh ayuu u sodcaalay Nugaal oo ugu horraysey fardaha la isku hallayn karo meelaha laga doonan jirey. Fardo wanaagsan nin lagu yiqiin ayuu u tegey, si uu uga soo iibsado baxdooy ciilkii la baday uu kaga baxo! Wuxuu xerada fardaha jeedaaliyoba, maalmo dhawr ah ka dib ayuu ilaalaystay faras baroor ah; kaas oo ay naftiisu ku xasishay, uuna go'aansaday inuu noqdo midka uu Ciid kula noqon doono.

Waxay gorgortamaanba, ninkii baroorka lahaa wuxuu oggolaaday qaalmo ugub oo sagaal ah inuu Boos ka siisto. Goortii faraskii iyo geelii la kala meersaday ayaa waxaa qaalmihii ka dabo-booddey qaalin marcurad ah oo igar ah. Ninkii faraska laga iibsadeyna intuu qaalintii u bogey ayuu Boos ku yiri: "Saddexda naagoodba waxay iiga furan yihiin inaadan faras meesha kala tegeyn, haddii aanad qaalintaas geela ku soo tobnayn!". Isna faraska iyo qaalintii intuu faraskii doortay ayuu maqaarkeediina ninkii u tuuray.

Maalintaasna wuxuu Nugaal kala laabtay Roor-Godan faraska la baxay ee Ciid iyo Hawd oo idil ka soo shaac-baxay.

## 11. Goobtii 'Daboolan'

Arrintaasi markii ay dhacday ayaa jilibkii uu Aadan Galaydh ahaa rag ka tirsani, waa Reer-Gorode, waxay isweyddiiyeen: "War kolley dagaal waa lamahuree, Boos-Illaawe ayaynu ku beegnaa?".

Dagaalyahannada beesha markii midba mar magaciisa la soo qaaday ayaa, ugu dambaystii, waxaa la isku raacay, Cali Baargooye mooyee, Boos cid u babac-dhigi kartaa inaysan jirin. Waxaase la isxusuusiyey ninkaasi inuu iyaga ka toloobey oo geyi kooda ka fog uu u guurey, ka dib kolkii laga talo-diidey.



Rugihii uu degganaa ayaa rag loo diray. Hase ahaatee, waa lagu soo guuleysan waayey in reerka lagu soo celiyo. Waa laga soo quustay in dagaallada la soo geliyo. Isaga oo weli hibanaaya sidii loo galay ayuu ku soo jawaabey: "Nin i ciilay igu ciil-bixi maayo!".

Huq iyo niyad jaban baa lagala soo laabtay. Nimankii Boos-illaawe hormuudka u ahaa duullaan bareer ah ayay soo qaadeen. Maalintaasna waxaa dhacday goobta weyn ee lagu hoobtay; goobtii taariikhda ku gashay magaca ah 'Daboolan'. In kastoo labada dhinacba uu meydku tirobeelay, haddana nimankii Aadan Galaydh iyo Qoorwaa lahaa ayaa la bajiyey oo halkaas lagu daadduumiyey.

## 12. Qadow-Laaye & goobtii 'Rawax-Gegan'

Dharaartaas buu Aadan Galaydh isna Nugaal u socdaalay oo faras ceebta ka mayra u doontay. Isla ninkii fardo-wanaagga lagu bartay ee Roor-Godan uu Boos ka soo gadan jirey ayuu abbaaray. Markii ay kulmeenna wuxuu ninkii Aadan ku yiri: "Aadanow, faraska aan kaa gadaayo wixii aan ku iraahdo haddii aad iga siinayso, aniguna ballan baan kula gelayaa". Aadan Wuxuu yiri: "Hawraarsan iyo guddoon". Ninkii faraska lahaa ayaa markaas waxa uu yiri: "Wixii uu eryadaa haddii ay ka baxsadaan, wixii isaga eryadaana ay gaaraan, xoolahaagu waa kuu celis!". 12 qaalmood intuu guddoonsiiyey ninkii faraska lahaa ayuu Aadan Nugaal kala soo laabtay faras isna Ciid iyo Hawdba caan ka noqday oo 'Qadow-Laaye' la baxay.

Aadan iyo raggiisii shir bay isugu yimaadeen. Su'aashii ahayd, 'Boos-illaawe' ayaynu ku beegnaa?' ayaa mar kale la isla soo qaaday. Aadan Galaydh wuxuu yiri: "Aniga iyo Boos isu kaaya daaya oo saddex arrimood dartood iigu beega: waa midda koowaade, faraskayga Qadow-laaye wuxuu eryadaa kama baxsadaan, wixii eryadaana ma gaaraan. Waa midda labaade, Boos waa il keliya, anigase labaduba waa ii dhan yihiin. Waa midda saddexaade, midigta oo qura ayuu Boos wax ka tuuraa, anigase midigta iyo bidixduba waa isugu kay mid oo waxaan ahay laba-midigle". Hadal kama dambeyne, sidaas baa lagu faataxaystay.

Goobtii la sugaayey ayaa dhacday. Fardo la hubsaday iyo dhallinyaro ku joogta ayaa la isula soo baxay. Waa barqo dheer. Hootooyinkii iyo warmihii buu barbaar waliba loolinayaa. Foodda ayaa la isdaray. Maxaa nin-door dhulka yaal! Maxaa garmadoobe xiidmihii laga soo daadshey gegida jiifa! Maxaa keligiis goobta saqlaynaya baxdooy ninkii lahaa laga tuuray!

Goobuhu kala magac lehe, tani waa Rawax-gegan'. Dhinac waliba intii laga diley wax kuma qiyaasan jirine, kolba kii la bajiyo ayay ceebta iyo magac-xumadu raaci jireen! Waa ayaanba ayaane, maantana waxaa la bajiyey oo goobtii laga helay Boos-illaawe nimankii uu ammaanduulaha u ahaa. Waa la baqe-eryey. Koodii la soo gaarona, warmihii iyo eebooyinkii baa lagu boobay.

Ninbase nin buu eeganayaaye, Aadan Galaydh ayaa wuxuu meel yare durugsan ka arkay Boos-Illaawe oo ku jooga farskiisii Roor-Godan la baxay. Isna Qadaw-Laaye intuu nadigii laba-saddex jeer ku dhuftay ayuu iska dabo-jaray. Haddii uu la siman yahay oo uu maaggan yahay inuu hootada meel halis ah kaga dhufto ayuu Qadow-Laaye horay u boodey; isagoo u qaatay gacantii uu Aadan kor u qaaday in nabar jeedal ku soo socdo. Faraskii markuu sidaas horay ugu boodey ayuu Boos-Illaawena Aadan hooto halgaad ah ka gaarsiiyey oo jeeniga midig inta kaga dhuftay dhinaca kale ka dusiyey, iskana dhaqaaqay! Aadan kolkuu arkay inuu dilan yahay ayuu il-qooreedda ka eegay Boos oo dhaafaya, isla markiibana faraskii ayuu ka dhacay.

Raggiisii oo bidhaanta Qadow-Laaye oo aan lagu joogini ay soo kicisay ayaa soo dul-joogsadey. Caynaankii faraska ayuu weli ku dheggan yahay, naf qummanise kuma jirto. Waxay ku yiraahdeen: "War Aadan bal warran, sidee bay wax kuu gaareen?". Isaga oo dhab u taahaya ayuu yiri: "Markaan tabar hayeyna talo ma hayn, hadda oo aan talo hayona tabar ma hayo... Adduun i khatel".

Waxay noqotay maahmaah wax-ku-qaadasho mudan iyo oraah lagu taamilo-qaato oo aayaha islaweynida in badan inaga baraysa.



Maalintaas ka dib, maansoyahanno badan oo Soomaaliyeed ayaa sheekadaas gabayadooda ku xusay; iyaga oo bulshooyinkii iyo beelihii ay ku dhex-noolaayeen wax ku tusaalaynaya. Waxaa ugu caansan Ismaaciil Mire oo gabaygiisii 'Ragow kibirka waa lagu kufaa' arrintaas inta murtiyeeyey si qurux badan ugu soo daray. Mar wuxuu yiri:

*'Lixda koose Reer Cali-Geree 'kaw' isaga siiyey*
*Kasi waaye wuxu waa qabaal waana kabannaaye*
*Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado!*

Meel kale oo isla tixdaas ka mid ahna waxa uu si gaar ah ugu xusay Aadan Galaydh iyo gardarradiisii uu eeday. Waa kii lahaa:

*Kalaankuu lahaa Ina-Galaydh kahay gadaalkiiye*
*Kaarkuba ma joogeen hadduu keeno tuluddiiye*
*Baallacad kelyaha kuma jareen kii uu quudhsadaye*
*Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado!*

Maansoyahankii caanka ahaa ee Reer Mudug; Ayax Maxamad Dhawre ayaa sida Ismaaciil yeelay oo gabaygiisii murtida badnaa ee 'Quursidiid' la magac-baxay wuxuu qayb ka mid ah si kooban ugu xusay qabaalkii la jebiyey iyo colaaddii ka dambaysey ee Reer Cali-Geri ay ku hoobteen, Aadan Galaydhna uu ku baxay. Wuxuu yiri:

.........................................

*Qodob kalena waa duniyaddeer qab aan ka faalleeyey:*
*Majeerteen qaraabiyo tol iyo qiimi kala waaye*
*Cali-Gerina xooliyo qab iyo waaye quruxdiiye*
*Qaashkii ku dhacay Aadan buu qaaxadii jaraye*
*Qabaalkii furee bay lahayd waa yar qawraraye!*

Gabayaa kale oo la oran jirey Sugulle Xirsi Godgod oo Reer-Gedood iyo Reer-Kismaayoodba ahaa ayaa isna gabay dheer oo 1900 iyo soddonnadii qarnigii tegey uu tiriyey sheekadaas ku soo qaaday. Ugaaskii qoladooda (Ugaas Xirsi Ugaas Maxamad) oo, malaha, uu ilduuf badan iyo kibir ku dareemay isaga oo la hadlaya ayuu gabaygii wuxuu ku daray:


. ..............................

*Diriqse waxaan dhammayn baa kharribay Dir iyo Daaroode*
*Talo-xumada doogteeda waa lagu dufoobaaye*
*Digadaas ka badan reer intuu lumiyey deelqaafe*
*Qabaalkii daloolaba rag buu diley naftiisiiye*
*Dun hadday geshaan kama kaceen degalladoodiiye*
*Cali-Gerigu doorkuu ahaa gabalki daadduunye*
*Suubaan wuxuu diricyo dhalay mawdka loo dadebye*
*Rawaxii Daboolan buu ku go'ay duulki Reer-Gorode*
*Dugaag kama dhergeen kibir haddaan loogu dawgeline!'*

★ ★ ★



# 4



# SHIRE JAAMAC-GAAR

**"Waxaad, Shirow, tahay nin aan waran meel ka waayin oo waraabe hilib ka waayin oo weerar xoolo ka waayine, doobiga caanood ee kuu qotoma ha iska daadin!"**

(Ashkir Aadan Qaate)

Waxay sheekadani ka bilaabatay bartamaha Soomaaliya, waxayna ku dhammaan doontaa koonfur-galbeed degaan ka mid ah oo isla dhulka Soomaalida ah. Waxay ka bilaabatay meelo ka mid ah Galguduud gobolka aynu haatan u naqaan iyo Doh iyo Ceelgaab degaammada lagu magacaabo ee haatan ay Itoobiya ka taliso, Soomaaliduse ay ku dhaqato.

Waxay ka mid tahay sheekooyinka maahmaahda reebay ee abwaannada xoolo-raacatadu ay soo qaataan marka ay tusaalaynayaan ladnaantu sida ay kibirka u dhiirri-geliso iyo, marka dambe, sida islaweynidu ay qofkeeda haadaan uga shalwiso!

## 1. Degaanka sheekada

Waa bilawga qaybtii hore ee qarnigii labaatanaad. Tolka ay sheekadu dhexdiisa ka dhacday (Marreexaan) waxba kagama duwana tolalkii kale ee Soomaaliyeed. Dhaqan bay la wadaageen oo sidooda ayay xoolo-raacato ahaayeen. Noloshooda dhaqaale waxay ku dhisnayd geela iyo meesiyada kale ee Soomaalida reer-guuraaga ahi ay shafeecsadaan. Dagaalku waa u joogto oo daaqa, biyaha iyo dhawrista magaca tolka ayay ku dagaallamaan oo tolalka kale kula diriraan.

Colaadda tolalka kale markii ay hakato, dhexdooda ayay ka willan jirtey. Jilib-jiilib ayay isu layn jireen, marmarka qaarkoodna waxa birta iska aslan jirey lafo, haddii loo abtiriyo, aad isugu dhow oo odayga saddexaad ku kulma! Dagaalka kolkii lagu hoobto oo la isku daalo ayaa waanwaan nabadeed la doondooni jirey. Mag la kala qaadayaa iyo gabdho la isa siiyaaba, si uun inta lagu heshiiyo ayaa intii muddo ah la kala nasan jirey.



Muddada waanwaanta inta lagu jiro, lama jeclayn ninka fadaqa ah ee tolkii ama jilibkii lala heshiiyey rag ka dila amaba xoolo ka dhaca; taas oo dib u aloosi karta colaaddii, inta hortii faraha lagaga gubtey, laga heshiiyey, lagana raystay.

Fadaq ha ahaado ama fariid ha ahaadee, nin waliba falka uu geysto keligiis mas'uul kama ahayn. Dhammaan xubnaha tolka uu ka dhashay ayaa u qoollaa! Beelo idil oo nabad-weyn u fadhiya ayaa nin ka dhashayi habeen madow dusi jirey oo reero aan filayn weerar gelin jirey. Badanaa, ninkaasi waa geel-doon, inta uu dhiciisa ku hawllan yahayna raggii iska lahaa ayuu wax ka layn jirey, dabadeedna qoladii uu ahaa iyo kuwii geela lahaa ayaa foodda isdari jirey.

Inta aan dagaalka kululi bilaaban ayaa la kala guuri jirey oo maatada la kala fogeysan jirey, xoolahana lagala durki jirey goobaha ay colalku saqaafayaan.

Nimankii ciilka qabey ayaa markaas duullaan humi jirey oo waxay weerar ku qaadi jireen ninkii ragga ka diley ama geela ka dhacay reerihii uu u dhashay. Rag kale ayaa kolkaasna la layn jirey. Xoolo kale ayaa la kala dhici jirey. Agoomo hor leh ayaa soo kordhi jirey, dumar asay xiranina qoys walba ayay ka muuqan jireen!

## 2. Colaad dabo-dheeraatay

Laba jilib oo colaaddoodu aad u dheeraaday, kana mid ahaa tolweynaha Marreexaan ee ay sheekadani ka dhex-dhacday ayaa goor aan fogeyn la dhex-dhigay waanwaan nabadeed. Mago ay kala qabeen ayay kala qaateen, xoolo ay kala hayeenna, qayb ahaan, waa isu celiyeen.

Ha yeeshee, mar walba oo ay laba qolo heshiis nabadeed gaadho, waxaa jira ragga qaar aan si fudud guddoonka caynkaas ah u oggolaan. Ciilkii dagaalladii hore kaga haray ayay ka biskoon waayaan. Markaas bay dhegaha ka furaystaan, bah iyo Boqor, wixii inta laga wada hadlay laga heshiiyey. Waxay sugaan maalin ay u soo marto oo gacalkii awel hore laga diley ay u aaraan!

Nin la oran jirey Shire Jaamac-Gaar (Marreexaan, Reer-Axmed) oo ka mid ahaa madaxdii labadaas jilib midkood ayaa ugu cadcaddaa waanwaantii la gaarey raggii diiddanaa. Si bareer ah ayuu ugu gacan-sayray. Wuxuuba jeclaa inaan dagaalku joogsan, waxaana ka go'nayd inta aan si buuxda la isku aamminin inuu mahadho geysto; inuu u aaro niman reerkooda horay looga laayey oo, malaha, uu tiiraanyadooda la seexan kari la'aa.

## 3. Dil iyo dhalasho

Haddaba, maalin maalmaha ka mid ah, isaga oo hor-socda qoyskiisii oo geeddi ah ayuu, si lamafilaan ah, waxa uu Shire uga soo kor-dhacay nin buka oo geed harkiis inta la soo dhigay laga tegey. Wuxuu ahaa nin aad u saxariirsan oo jirro ay geesaha u dhigtay, hadalkana aan soo celin karin.

Meesha uu maalintaas ku xanuunsanaa ayuu qudhiisu dhowaan soo degey, isaga oo wata qoys cayr ah oo ari aan soddon neef ka badnayni uu xoolo u yahay. Waxaa la oran jirey Sharma'arke Xasan. Cudurka uurweynaadka loo yaqaan ayuu la il-darraa, waxaana ka soo haray indho guray iyo calool haan biyeysan la moodo!

Isma ay haybsan, maxaa yeelay way isyiqiinneen. Indhahoodu kolkii ay isku dhaceenba, way isgarteen. In cabbaar ah ayaa la isdhawraayey oo aan midina mid la hadlin. Maxaa yeelay, durbadiiba dareen baa kala galay.

Sharma'arke oo ah ninka bukaayi wuxuu u dhashay jilibkii ay midka Shire colaadda dheeri ka dhexayn jirtey ee dhowaanta la heshiisiiyey (Marreexaan, reer-Diini). Markaan oo kale waxaa la filaayey labadaasi inta ay isbariidiyaan oo iswaraystaan inay nabadgelyo isku weydaartaan.

Ha yeeshee, raggii yiqiini sidii ay ku warrameen haddii aynu rumayno, taasi Shire kama ay suuroobi karin. Laabta ayaa gubaneysa. Xubnihiisa oo idil caro iyo ciil ayay la gariirayaan. Gacmaha ayaa ruxanaaya. Dhiig baa u hillaacaya.



Ninkii bukaanka ahaana walaac dheeraad ah ayaa ku soo kordhay. Dareenka geerida ayaa wejigiisii daboolay. Waxaa u caddaatay inaanu maanta baxsan doonin! Dabadeedna, Shire oo gartay waxa maskaxdiisa ku wareegaaya ayuu ku yiri: "Sharma'arkow, wax yar ka dib noolaan mayside, ashahaadada qabso oo dardaaran!".

Isaga oo oo isku deyaaya go'aanka uu maqlay inuu wax ka beddalo, sidaasna uu Shire kaga nabad-galo ayaa Sharma'arke wuxuu ku jawaabey: 'Shirow, maanta i bedbaadi oo saddex arrimood dartood igu bedbaadi, hana ii dilin:

Waa marka koowaade, jilibka aad tahay iyo kaayaga colaad cusubi ma dhex-taal. Waad og tahay oo waynnagii dhowaanta heshiinney, magahiina kala qaadannay. Labadeenna reeri nabad bay maanta u fadhiyaan. Sidaas daraaddeed, ma habboona inaad i disho, dabadeedna dirir hor lihi ay labadeenna jilib ka dhex-qaraxdo. Wuxuu bi'iyo mooyee, dilkaygu waxba hagaajin maayee, bal horta sidaas igu daa.

Waa marka labaade, xidid baynu nahay oo carruurtaada qaar ka mid ah ayaan abti u ahay. Carruurtiisa abtigood ninkii diley ha noqonnine, taasna igu daa.

Waa marka saddexaade, afadayda Roora` la yiraahdo oo uu aqalkeedu halkaas kaaga muuqdo, ariga soddonka ahina uu xeraysan yahay aniga ayay ii dhaxdaa, uur bayna leedahay. Waxaa laga yaabaa uurkaas inay wiil ku dhasho, inuu rag noqdo, inuu, berri-ka-maalin, ii aaro oo godobtiisa kugu maqan uu kaa raadsadee, taasna igu daa!'.

Haddii aan anigu Sharma'arke ahaan lahaa waxaan Shire ugu dari lahaa sabab afaraad oo waxaan oran lahaa: 'Waxaan ahay nin uu xanuun diloodey. Tabar aan isaga kaa rabo ma lihi. Qalab aan kugula dagaallamaana ima ag-yaal. Kulama gudbooni, nin sidayda oo kale ah ninkii dilaana, geesi ma ahee, waa fulaye, iyadana igu daa'.

Wixii talo iyo tusaale uu maqlayse, Shire tororog buu u qaatay, Eebbena wax ugama dhigin. Wuu iska dhego-tiray. Ninkii bukey oo uu suxulku dhulka ugu mudan yahay ayuu warankii wadnaha kaga joojiyey oo inta

ka gooyey mar labaadna caloosha kaga tummaatiyey oo mar saddex-aadna ku celiyey! Intuu kala soo baxay oo dhiiggii ku yiil ciid-guduuddii kaga tirtirtay ayuu iska dhaqaaqay. Wuu iska laafyooday, isaga oo aad mooddo, inuusan ruux aadane ah nafta weysiine, ceesaan uu lahaa in-tuu gawracay uu ku Alle-baryey!

Bilo dhawr ah ka dib, Roora` oo ahayd haweeneydii uu Shire ninkeeda diley wiil bay ummushay. Hase ahaatee, wuxuu noqday wiil aan aab-bihiis loogu abtirin jirine, inta hooyadiis loogu abtiriyo loogu yeeri jirey Guuleed-Roorood!

### 4. Geeddigii Gedo loogu kacay

Weli waa kalagguurka labadii qarni; kii 19d iyo kii 20d. Weli waa Doh iyo Ceelgaab iyo agagaarka Feerfeer iyo webiga Mustaxiil. Colaadihii geyiga ka aloosnaa waxaa ku soo kordhay abaaro. Waxaa haddana ku soo batay duullaammo joogto ah oo dhooddida Nugaaleed iyo badda Hobyood laga soo bixin jirey.

Sayid Maxamad iyo Daraawiish oo meel ah iyo Reer-Keenadiid oo Hobyo ka talin jirey oo meel ah ayaa ku hardamaaya soo-jiidashada iyo daacadnimada Marreexaankii Ximan degganaa. Dabadeedna, colalkii baa isu dhafandhaafay. Xoolihii baa laga meersaday. Habeen qura ayay nabad ku ledi waayeen. Labada dab ee Hobyo iyo Nugaal ka baxaayey inay dhexdhexaad ka noqdaani way u suuroobi weydey, kolkaas baa qaarba dhinac u jabay oo u go'doomay.

Waxaase jirey qaar saddexaad oo labada dhinacba dareensaday, tashi-giina uu kaga idlaaday dhulka Eebbe ballaarshey meel uun inay ka beeg-sadaan oo digsiga iyo dhardhaarta dhexdooda ay ka baxaan. Jilibbo idil iyo beelo dhan ayaa gu'yaashaasna caynka hoosta ka geliyey oo, wax ay ku doorteenba, intay webiyada taraareen, degaanka Gedood geed-diga u raray.

Beelahaas ku tashaday inay Gedo nolosha cusub ka abuuraan raggii hormuudka u ahaa waxaa ka mid ahaa Ashkir Aadan Qaate (Marreex-aan, Reer-Diini) iyo Shire Jaamac-Gaar oo ahaa ninkii Sharma'arke dili jirey.



### 5. xeer-dhigasho iyo isdhaarsi

Gedo ha soo degeene, beeluhu xoolo qumman ma wataan oo qaar ka mid ah neefna kama dhaco. Waa cayr faro madow. In la xoogsado ayay istuseen, xoogsigiina wuxuu dhaafi kari waayey dadkii ay dhulka ugu tageen xoolihii u xeraysnaa! Wuxuu ahaa xoogsiga keliya ee ay garanayeen, laguna soo ababiyey. Waxay ahayd ababin ku salaysnayd, nin kastaaba ha lahaadee, geel raabsanayaa inta uu jiro nin weyni inuu ka gaajoodo amaba uu ka faro-marraadaa inay tahay liidnimo aan la isugu garaabi karin!

Durba xoogsigii dhaca ku dhisnaa wuxuu beelihii u abuuray colaado ka daran kuwii ay dartood hayaanka dheer u soo galeen. Ha soo guureen oo Gedo ha soo wada degeene, tolow iyaga laftooda yaa kala maadin? Waa kuwii xiirexiiraha ahaan jiraye, sidee bay hadda u nabdi karaan? Godobihii ay geeddiga ka hor kala hayeen, yaa illowsiin? Raggii geed-diga ka hor ay kala qabeen magahooda, yaa kala siin? Waxay ahaayeen su'aalo taagnaa oo in la furdaamiyo u baahnaa.

Meel waliba rag ka taliya ayay leedahaye, waxgaradkii baa isu yimid. Waxay dani isu keentay niman isyiqiinney, asii aan weligood u malayn inay geed hoostiis soo wada fariisan doonaan. 'War waxa ina haysta waynu aragnaaye, sidee baynu yeelnaa?. Col dhexdeenna ah iyo mid shisheeye ma wada qaadi karaynee, maxaynu yeelnaa?'.

Su'aalahaas baa la isweyddiiyey. Ninba meel buu ku dhuftay. Nin yiraah-da: mag ha la kala qaato. Mid yiraahda: culuq ha la isu celiyo. Iyo mid yiraahda: gabdho ha la isa siiyo. Intuba way ka yeedhay goobtii la isugu yimid.

Ninkii ugu talada fiicnaa ee raggii hadlay ugu dambeeyey wuxuu yiri: "Ragow, mid lagu dawoobo aniga iga dhegeysta. Waxaa iga talo ah, dhiig wixii la kala qabey, xoolo wixii la kala dhacay; godob oo dhan wixii ay doonto ha ahaatee, aynu 'maaf' ka dhigno. Wixii Gedo ka horreeyey aynu xalay-dhaley ka dhigno oo, maanta ka dib, cid cid wax u sheegataa yay jirin'.

In kastoo raggii meesha fadhiyey uu qaarkiis mashiiqsaday, haddana waxay noqotay talo ay intii badnayd madaxa u ruxday, gadaalkiina la wada qaatay. Guddoonka la isagama harine, waa la isdhaarsaday oo nin waliba afar-iyo-tobanka iyo boqolka intuu maray ayuu, isaga oo bal-lan Eebbe iyo ballan tolba xanbaarsan, geedkii ka carraabay.

## 6. Guuleed iyo sodcaalkii Gedood

Waa tahay. Waynu ku soo noqone, Gedo aan idinka celiyo oo aan idin-kula noqdo agagaarka Feerfeer iyo webiga Mustaxiil. Waxaa halkaas ku noolaa qoys aynaan sheekadan uga maarmi karayn oo ay qasab tahay inaynu ku noqonno. Waa qoys ay ahayd dadkii Gedo u guurey inay ula guuraan, ha yeeshee waayuhu ay waaqla'da ku reebeen. Ciidan la'aan iyo rag la'aani qoys ay tubtay meesha laga tegey, sida ay waxaro-jirtu ku heesto.

Malaha garataye, waa Roora`; haweeneydii uu Shire Jaamac-Gaar nin-keedii ku dhugtamey iyo wiilkii uurkeeda ku agoontoobey ee, markii uu dhashay, ay Guuleed ula baxday. Sidii aan meel hore ku soo xusnay, aabbihiis looguma abtrin jirine, hooyadiis ayaa loogu abtirin jirey. Laba-dooda oo qura sidii la isugu arkaayey ee ay keligeed marna dhabarka ugu siddey, marna gacanta u haysey ayaa Guuleed-Roorood magac ugu baxay. Wuxuu ahaa magac aan ka harin maalintii uu dalandalka ahaa ilaa maalintii uu geeriyoodey.

Roora` oo aan magaceedii kale na soo gaarini si wacan bay wiilka u korisey. Cad iyo caano keliya uguma dedaali jirine, waxay ku anqarisay aabbihiis sidii loo diley. Waxay bartay ninkii diley magaciisa. Maalintii uu gu' u kordhoba, way ku muusannowday oo godobta ka maqan, waagii beryaba, xusuustiisa ku cusboonaysiisay!

Guuleed Sharma'arke ama Guuleed-Roorood, barbaar buu noqday. La-baatankii markuu u buuxsamey ayuu tashaday. Dadkii uu ka dhashay halkii uu u batay iyo Gedo inuu u doolo ayay talo kaga ibo-beeshay. Waddada ayuu cagta saaray. Sahay n.a wato oo faras ma wato oo geel ma wato. Hanti adduun wuxuu ka sitaa waran af daran oo, sida cayda, rag kugu dira, ragse aan kaa celin!



Kolkii uu dadka waraystay ee uu hubsaday sodcaal qura inuusan Gedo ku tegi karin ayuu meel dhexe ku hakaday. Nin geel badan lahaa, wi-ilalse aan u lahayn ayuu u noqday qawsaar iyo midiidin daacad ah.

Hal sano kolkii ay wada joogeen oo 'aabbe' iyo 'maandhe' ay isugu yeer-aan, la isna aamminey ayaa ninkii wuxuu Guuleed ku wareejiyey qorigii iyo shakaddii rasaasta ee loogu talo-galay kadimmada geela ah in co-lalka looga ilaaliyo. Guuleed dan buu leeyahaye, sannad dambe kolkii uu qawsaar ahaa ayuu – awelba waa kii u socdaye – maalintii dambe Gedo afka saaray, isaga oo qorigii iyo shakaddiiba ku maran!

## 7. 'Gabar i sii' iyo diidmo!

Wuxuu habeenba meel ku sii hoydoba, ugu dambaystii, isaga oo nabad-qaba ayuu ku guuleystey inuu salka dhigo dhulkii uu, tegiddiisa, dhawr-iyo-tobanka sano ku hammiyaayey. Meel kalena ma uu qabane, Shire Jaamac-Gaar reerkiisii ayuu soo haybsaday. Ha yeeshee, intii aanu gaarin ayuu cido kale ku sii hakaday oo waxa geyiga looga dhaqan ya-hay u kuur-galay. Wuxuu ogaadey heshiiskii dhex-maray jilibkii uu isagu ahaa, kii uu Shire ka dhashay iyo dhammaan tolweynihii Marreexaan ee abtiriska wadaagey, Gedona u soo doolay.

Goor casar ah oo dhulku barwaaqo yahay, roobkiina inta uu si wacan ugu da'ay ay geed-sare iyo geed-hooseba hamashoobeen ayuu Reer-Shire salaamu-calaykum ku yiri. Sida la weriyeyna, nin hodon ah oo meesiyada xoolaha midba si weyn xero uga buuxsadey ayuu Shire ahaa. Maxaa yeelay, wuxuu ku jirey raggii sida degdegga ah Gedo uga tabcaday, isla markiibana ku liibaaney.

Guuleed baa soo dul-joogsadey ardaa si wanaagsan loo kashkaas-hay oo uu odaygu fadhiyo. Markaas buu ku yiri: "Shirow, waxaan ahay Sharma'arke Xasan wiil uu dhalay. Waad og tahay oo, aniga oo aan weli dhalan, adiga ayaa aabbahay diley, ha yeeshee in aan u aaro maanta uma socdo. Qori iyo rasaasba waan haystaa, waxaase i xiraaya ballantii la dhigtay ee wixii hore oo idil maafka lagaga dhigay. Aabbahay u aari maayo, magtiisiina kaa dooni mayne, waxaan kaa rabaa inaad i siiso gabar godobtir la yiraahdo oo aan ku dego; gabdhahaaga g... ka mid ah oo aan qoys ku noqdo, daraaddeedna uu tolkay igu xoolee.yeyo'.

Shire, oo halkii uu fadhiyey aan wax yarna ka nuuxnuuxsan, kana durkin, ayaa wiilkii kor u dhawray oo si kibir badani ka muuqdo inta indhaha ugu gubey ugu jawaabey: "Wiilyahow, gabar iyo xoolo midna iga dheelmi mayside, ardaaga iiga dhaqaaq!".

## 8. Aargudasho

Guuleed-Roorood wuu iska carraabay, isaga oo aan hadalkii adkaa ee Shire jawaab ka celin. Ciilkii iyo caradii uu ardaaga kala tegey dartood, wuxuu ku dhaar-maray oo naftiisa ugu ballan-qaaday, haddii aan Shire dawgiisa marin, inuu ka aar-gudan doono.

Tashigaasna Shire waa loo soo tebiyey oo si aad u qeexan baa loo soo gaarsiiyey. Kolkaas ayuu qalqaaliyey shir labaad oo odayada tolweynuhu ay isugu yimaadaan. Geedkii haraca ahaa ee harada biyeysan ku ag-yiil markii lagu soo wada dhammaaday ayuu hadalkii ku hor-maray. Wuxuu yiri: "Guurtiyahay, ballan dhaar lagu adkeedyey waa kii inoo xirnaa, haatanna waxaa la sheegayaa wiil ka yimid Doh iyo Ceelgaab iyo dhulkii aynu ka soo guurney; wiilkaas oo rubaddayda u mindiyo-lisanaya!".

Guuleed oo qudhiisu geedka wax ka fadhiyey ayaa isna hadlay. Dabadeedna kolkii la dhegeystey waxa uu Shire geystey iyo waxa laga doonayo oo ah gabar godobtir ah ayaa rag badani Guuleed u garabay.

Guurtidii geedka fadhidey ayaa waxaa ka mid ahaa nin la oran jirey Ashkir Aadan Qaate oo gartii goobta tiil markuu dhuuxay ay u muuqatay inuu Shire gardaran yahay! Intuu kacay oo hadalkii qaatay ayuu yiri: "Shirow, iyada oo aan godob la kala qabinba gabdhaha waa la isa siiyaa, Guuleedna hablahaaga wuu guursan karaa oo waa u geyaan. Xoolo la'aanta ha ku nicine, wixii uu ku weyddiistey inaad u yeesho ayaa ila qumman". Rag kale oo geedka fadhiyey, iyagana sidaas bay la noqotay.
Hase ahaatee, wax aan 'maya' ahayn ayaa Shire laga waayey, in badanna wuxuu ku noqnoqday ballantii iyo axdigii horay loo dhigtay in la c`usboonaysiiyo; ballantii ahayd: Gedo ka hor wixii la kala qabey oo dhiig iyo dhaqan ah in aan la isu sheegan karin.



Mar labaad ayuu Ashkir Aadan Qaate wax-tusaalayn u guntadey. Wuxuu mooggaan tilmaamay barwaaqadii uu maalintaas Shire ku naalloonaayey. Markaas buu, isaga oo u caqli-celinaaya waxa uu ku yiri: "Shirow, waxaad tahay nin aan waran meel ka waayin oo waraabe hilib ka waayin oo weerar xoolo ka waayine, doobiga caanood ee kuu qotoma ha iska daadin! Wiilkaas dalowga ah; wiilkaas dhallinyarada ah; wiilkaas waxa ka soo socda aan la malayn karin, bi'i waaye, naga aamusi oo iska aamusi!'.

Shire 'maya'diisii ayuu ku adkaystay. Nin waliba inuu u caqli-celiyo ayuu isku deyey, ha yeeshee wax walba oo loo sheegay waa lagu soo loodin waayey.

Ashkir Aadan baa mar saddexaad hadlay. Wuxuu ku bilaabay: "Shirow, gobi waa aawil, gumina waa indhaheeda"; taas oo waayadii dambe maahmaah noqotay. Weedhaas waxa uu uga jeedo intuu faahfaahiyey ayuu yiri: "Ninka waxgaradka ah ee gobannimadu ku jirtaa waa kii fekera, isna weyddiiya: 'shalay maxaa jirey? Maanta maxaa jira? Berri maxaa dhici kara?. Indhahaaga hortooda waxa ka muuqda ha ku tashan oo yaysan xeryaha kuu buuxaa ku hodin!".

Wax 'maya' ka duwan ayaa mar saddexaadna Shire laga waayey. Talada keliya ee uu soo jeediyeyna waxay ahayd in mar kale la cusbooneeyo dhaartii iyo kitaabkii horay la isugu maray. Ashkir Aadan, sansaan colaadeed ayaa u muuqatay. Wuxuu dareemay dhiig daadan doona. Geedkii intuu ka hilhishay oo barida boorkii ka jafjaftay ayuu yiri: "Anigu, galabta, kitaab been ah Dhadhaable ka qaadi maayo!".

Dhawr cisho ka dibba, Guuleed dhiig buu galay. Naf buu gooyey. Waa wixii uu Ashkir dareensanaaye, Shirena halkaas buu ku ahaaday!
Habeenkii uu labada xabbadood isu raaciyey maalintii xigtey ayuu Guuleed geedkii lagu shiri jirey ku soo hor-maray. Barqo hore ayay ahayde, qorigiisii intuu isdhinac-dhigay ayuu hooskii qaboobaa 'dug' yiri! Baraad li'i. Cabbaar ka dib ayaa isna waxaa geedkii soo gaarey Ashkir Aadan. Markaas buu raggii meesha fadhiyey waxa uu weyddiiyey ninka meesha jiifaa kuu yahay. Waxaa lagu yiri: "Waa Ina-Roorood oo xalay Shire diley!'.

Ashkir intuu dhiirranaanta wiilka ka yaabay ayuu Shire oo mootan u naqsaday oo halkii uu uga ducayn lahaa habaar u sii guntey! Waxaa la maqlay isagoo leh: "Shirow, Rabbi kuuma naxariisto!". Nin ag-fadhiyey oo hadalkiisa maqlaayey ayaa kolkaas ku yiri: "Oo Ashkirow, waa ku sidee, maxaad meydka u habaari?". Markaas buu ugu jawaabey: "Wiilka inta diley haddana sidaas yeeli kara ninka gabadha u diidey, naxariis iyo duco toona igama mudna, Ilaahayse uguma tegin!'.


Geeridii Shire ayay dhacdadaasi ku dhammaatay, waxayse noqotay, mar walba oo aano iyo godob la isla soo qaado, sheeko ay Reer-Gedoodku dib u xusuustaan. Gabyaagii weynaa ee la oran jirey Guuleed Jucfe Samatar (dhintay 1980) ayaa waagaas ka dib wuxuu tiriyey tix uu ku diiwaan-geliyey arrimo gobolkaas ka dhacay oo, iyada oo kibir iyo talo-xumo loo aanaynayo, qaar ka mid ah hoog iyo ba' laga dhaxlay. Isaga oo raggii arrimahaas geystey, kolkii dambena eeday wada magacdhebaya, Shire Jaamac-Gaarna ugu dambaysiinaya ayuu yiri:

*Caku oon; ishii Bari nin tegey ways arkahayaane!*
*Caku arad xun; waxay kugu dishaa uurgubyiyo ciile!*
*Caku iridda Luuq iyo kufriga uraya oo jooga!*
*Caku Ubaxle; Boon baa alkumay inamihiisiiye!*
*Caku amar xun; waa tii Cismaan loo ag-joogsadaye!*
*Caku aabi; saa Aadan-Maax iilka ma hurdeene!*
*Caku aano; aarkii **Shiraa** loo unuun-jaraye!*

★ ★ ★



# 5



# TUURGADAAL

**Tuurgadaal: "War fallaarta igu taalli ma Dheglaa?".**
**Cali: "Haa aabbe, waa iyadii!"**
**Tuurgadaal: "War duf-ku-baxe, kolka marada igu celi!"**

(Tuurgadaal iyo wiilkiisii Cali)

Dalweynaha xiriirsan ee Soomaalida waxaa qayb ka ah degaan ballaaran oo xoolo-daaqeen ah, bartamahana ku yaal. Waa degaanka Buuro loo yaqaan ee soohdimaha la wadaaga Doollo iyo Ciid, Doh iyo Ceelgaab iyo, weliba, gobolka Galguduudeed. Buuro iyo carriga u dhowiba way barwaaqaysan yihiin. Seben hagaagey iyo seermaweydo ayay ku naalloonayaan.

## 1. Dawldawl iyo Reer-Tuurgadaal

Waa ammin ay roobabkii gugu badi u da'een, cirkase aad mooddo inuu weli hor leeyahay. Daadadka ceelkaggeeyaha ayaa xagga iyo xaggaba waxay u dhaafayaan Reer Tuurgadaal (Marreexaan, Hawraarsame) oo xerada ay hadda ku jiraan iyo dhulka u ogogga leh, ay u badan tahay, inay afarta xilliba degmaystaan.

Meeshu waa Dawldawl; waa laas yar oo degaanka Buurood caan ka ah, waddo isaga ka baxdaana ay Wardheer ku dhammaato.

Reer Tuurgadaal waa qoys Soomaaliyeed oo reer-miyi ah, ha yeeshee si weyn uga duwan kuwa kale ee degaan-wadaagta iyo deriskaba ay yihiin. Xoolo laguma oga. Geel, lo' iyo ari toonihi, sida cidaha kale, fiidadkii uma soo xeroodaan.

Sidaas darteed, waxay ku nool yihiin ugaarsiga ciddoodka oo, dugaagga mooyee, aan aadane ku haysan, lana wadaagin. Waa gabraarato hantida ay ku tashadaani tahay duurjoogta xalaasha ah; inta ay sagaaradu ugu yar tahay, haldhaaga iyo saryankuna ay u weyn yihiin.



Waa qoys hannaanka noloshooda qaayibey, kuna raalli ah. In kastoo geeljiraha badraanka ahi inay 'dabato' yihiin ay ku caayaan, haddana inay cidi ka sed-roon tahay iyaga lama aha!

Caano yeelkoode, hilibka iyagaaba laga martiyaa. Maantii dabinnada wax ugu dhacaan amaba ugaarta waaweyn ay qaar ka soo dishaan, agahooda ayaa la isa soo tubaa, iyada oo weelal maran la wada sito!

Sidoo kale, iyaga oo qura ayaa magan loogu yahay, welibana xoolo laga siistaa suun-biciidka ay reer-miyigu aqallada ku dhistaan, maalinta geeddigana ay rarka gaadiidka u adeegsadaan.

Maxayse, tolow, Reer Tuurgadaal ay Dawldawl meelaha kale uga jecel yihiin? Xilliyada intooda badan agagaarka laaskaas maxaa qoyskooda loogu arkaa?

Marka hore, waa dhul carrosan ah oo ciid wanaagsan leh. Marka labaad, waa meel biyo macaan oo laasaheeda jiilaallada lagu soo barbixi karo. Marka saddexaadna, yaryar iyo waaweynba, waa meel 'shan qabo oo shan sii daa' ay ugaartu ku tahay.

Dhankii laga eegoba, waa meel ay ku ladan yihiin, in kastoo ay ku qabaan laba col oo naftooda halis ku noqon kara; laba col oo aan midkoodna dad ahayne, dabeecadda degaankuna ay la timid.

Colka hore waa kaneeco oo, badanaa, duumada ay sababto aan laga kicin, wax lagula tacaalana aan loo haysan. Colka labaadna waa libaaxa oo indhoweydba agagaarka Dawldawl ku soo badanaayey, aadna ugu tarmaayey.

Labadaas col dartood, aqallada iyo ardaayadooda, reerka habeenkii cidi kama seexato. Iskummar si uu labadaas col uga bedbaado, waxa uu qofkood waliba ka dhistay dargo uu dheeraystay oo caweysinkii hadday noqoto uu dusheeda u baxo, hoy iyo gaashaanna uu ka dhigto.

## 2. Fallaartii Dhegla'

Tuurgadaal iyo saddexda barbaar ee uu dhalayba waxay aqoon dheer-aad ah u leeyihiin hababka kala duwan ee loo ugaarsado. Waxay ku xeel dheer yihiin siyaalaha ciddoodka loo dago iyo tabaha lagu qabto.

Hubkoodu waa dabinno ay dhulka daadiyaan iyo fallaaro kala jaad ah oo marna caddaysimo ah, marna sunaysan oo, dad iyo duunyo, naflihii ay haleelaan aan ruuxa lagu soo gaarin!

Afartooda mid waliba waxa uu leeyahay fallaarihiisa u gaarka ah oo, keli iyo kooxba, maantii gabraar loo sodcaalo uu la soo baxo, kuna xoogsa-do. Afartuba waxay ku kala daran yihiin aqoonta mariidka iyo dhirta kale ee waabaayada laga liso, dabadeedna inta warmaha iyo gamuunnada la mariyo wax lagu laayo!

Fallaaraha uu gabraarta u saantay ka sokow, odayga Tuurgadaal ahi wuxuu kaloo lahaa fallaar aan fallaaro ku jirin. Waxay ahayd fallaar uu si goonni ah u farsameeyey, lagana cawdu-billaysto. Waabaayo halis ah oo uu ka soo lisay dhir ay in koobani taqaan ayuu aad ugu dhoobay. Nafleydii lala helo fallaaraha inta laga gooyo laga noolaado iyadu kuma ay jirin!

Odayga qudhiisu, markeedii horeba, uma uu tuman dad inuu kula diriro iyo inuu ku ugaarsado toona. Wuxuu u tabcaday oo keliya inuu ku laayo libaaxa oo waayadanba Dawldawl lagu soo afuufay, lagana soo xeray-san waayey.

Degaanka fallaaraha lagu haysto, keligeed baa magac ka lahayd. Dhegla' ayaa la yiraahdaa, bulshada ugaarsatada ahina way wada taqa-an. Iyada oo kale qofkii ama neefkii ay ku dhegtaayi naftu kuma raagto. Waxaaba lagu naanaysaa saddex-saamoodley: waa hubaal qof ama neef kuu doono ha ahaadee, saddex tallaabo haddii uu qaado inaanu tu' kale ku dari karin!

Sidoo kale, Dhegla' iyo fallaaraha la midka ah waxaa lagu tilmaamaa 'timo-hool', maxaa yeelay, sida looga bartay, halhaleel ayay timuhu uga



bidaan kolba naflihii lagu wareemo ee sunta lagu dhoobay iyo dhiiggiisu ay isdaaraan.

Dhegla', wax badan dibedda laguma arko. Weligeedba aqalka Reer Tuurgadaal gasadiisa iyo xashinta gudaheeda ayay ku qarsoon tahay. Haddii kale, dhigdhexada iyo dheegsaarka dhexdooda ayay ku ilaashan tahay. Mar walba in la xado ayaa wadnaha farta looga hayaa.

Aarey oo ah afada Tuurgadaal ayaa goor noolba isha ku haysa. Geeddi iyo negaadiba, kobta ay taal iyada ayuun baa u dhuun-daloosha. Dad iyo duunyo aar baabbah ka dhigay markii laga qaylo-keeno ayay u soo saartaa oo Tuurgadaal gacanta ka gelisaa. Maalintaas oo qura ayaa Dhegla' bannaanka lagu arkaa. Maalintaas baa la gartaa dirir ba'an oo odayga iyo libaax dhex-mari doontaa inay isha baalkeeda tahay.

## 3. Tuurgadaal iyo Aarey: Colaad hoose

Nolol ahaan, reerku wuu iska ladan yahay. Hilib iyo subagba, tebba-daha iyo qunbeyaasha ayaa u buuxa. Soor magaalo haddii ay u boholy-oobaanna, Wardheer bay ugu safraan. Haddii kale, reer-miyiga ragga ka dhex-ganacsada ee macashleyaasha ah ayaa meel walba waabab ka dhistay oo sonkor iyo bariidba la fadhiya.

Ha yeeshee, kolkii dhinac kale laga eego, reerku ma dhibaato la'a. Ind-howeydba Aarey iyo Tuurgadaal xiriirkoodu ma wanaagsanayn. Laga soo bilaabo guga haatan da'aaya kii ku laba ahaaba, laabtoodu way sii kala jeeddey.

Muddo dhawr-iyo-toban bilood ah, carruurta ay dhaleen iyo xigtada u dhowdhow oo keliya ayuun baa ogaa. Iyaga oo qura ayaa u war-hayey colaadda soo badanaysa ee odayga iyo habarta ka dhexaysa. Hase ahaatee, tan iyo dayrtii dhoweydba dibedyaal bay ahayd, degaanka Dawdawl oo idilna shaac bay ku noqotay.

'Maxaase labadan qof ee waayeelka ah ku dhex-jira?' ayay bulshadu in badan isweyddiisey. Deris iyo xigaaloba, sababta colaadda ayaa intii

muddo ah lagu wareeray. Qof waliba si buu u maleeyaa, runtase lama ogaado. Inta badan, labadu ma wada hadlaan, haddii ay yeelaanna hadalku wuu ka taagtaagmaa, dabadeedna sawaxankooda ayaa meelo fogfog laga maqlaa. Maamulka reerka marnaba kuma heshiiyaan. Midna midka kale wax kama koobiyo, dhegahana uma raariciyo.

## 4. Sabab la ogaadey

Wax la joogoba, dhawrkii bilood ee u dambeeyey waxa ay arrini ka gaadhey marar badan inay gacmaha isula tagaan, dabadeedna kolba ciddii u dhowi ay kala jiiddo! Maalin walba gartoodu geedka shirka ayay taallaa, lagumse guuleysto. Guurtidii gashaaba way ku daashaa, libinna kama keento!

Waxay sidaas ahaatoba, odayo ay hoos ahaan isu waraysteen ayuu Tuurgadaal warkii uga tibix siiyey. Wuxuu u sheegay sababta runta ah ee muddoba uu qoyskiisu la xasili la' yahay. Oo waa maxay? Xaqa gaarka ah ee uu say waliba afadiisa ku leeyahay ayuu Aarey ka waayey. Wixii loo guursadey wixii ugu darraa ayay ka soo bixi weydey. Show, way isu diiddey! Show laba gu' ayaan odaygu tafba ka rogin!

Wax walba oo uu ku maslaxan karo in kasta oo uu isku deyey, haddana waxba ugama naaso-caddaan. Iyada oo aqalka ku jirta hadduu soo galo, way uga baxdaa. Hadduu isagu ku jirona, uguma gasho. Ardaaga hadduu jiifasado, aqalka ayay seexataa, hadduu isagu aqalka ku gam'ona, ardaaga ayay ku baridaa. Dharaar iyo habeenba, waxay ka dedaashaa inuu ka helo meel ay labadooda oo keliya ku yihiin.

Dabadeed, dadkii sababtaas runta ah loo sheegay ayaa laba u qaybsamay. Qaar odayga u garaabay oo markiiba inuu isagu gar leeyahay carrabka ku dhuftay iyo qaar inta muusooday arrinta ka-hadalkeedaba ka xishooday, isagana aamusay!

Sababtase ha sheegee, Tuurgadaal caradii innaba kama ay debcin. Siduu qabo, wuxuu ku raad-joogaa xaq uu leeyahay oo laga duudsiyaayo. Sidaas darteed, waxaa ka go'aan ah inuu ku mintido, soona dhacsado!



## 5. Aarey oo la hilbeeyey

Maalintii dambe, goor aan la filayn oo duhur ah ayuu reerkii ku soo noqday. Waayeel iyo dhallinyaroba, goor la wada maqan yahay ayuu aqalkii 'dalaq' yiri oo inta gogol yar fidsaday madaxa iyo manjaha duubay.

Haddeer oo kale ma soo noqon jirine, inuu wax maaggan yahay waa hubaal. Aarey oo kolley goor aan dheerayn aqalka u soo harsan doonta ayuu u dhakanayaa. Iyada ayuu meesha isugu nabayaa. Xaqa gaarka ah ee uu say waliba afadiisa ku leeyahay ayuu ku raad-joogaa. Waxaa ka go'aan ah inuu soo dhacsado!

In yar ka dibba, waxaa dhegihiisa ku soo dhacay jaanqaad sabada aqalka ka soo gaaraya. Saanta iyo siday u dhacayso ayuu garanayaa. Siduu maleeyey, waa Aarey qudheedii. Markuu hubsday iyadii inay tahayna, wuu isu diyaariyey. Qun buu u fariistay. Neefsina, Allaha ka dhigee, sharqan oo idil buu iska ilaaliyey. Wuxuu ka baqayaa, intay wax dareento, inay halkeeda ka laabato, sidaasna uu tashigiisu ku burburo!

Iyaduna show aad bay u soo oontay. Waxay tiigsaneysaa aqalka dhexdiisa haanta tiirsan iyo kalaxa dul-saaran. Dareen kaleba maankeeda kuma jiro. Baraad li'i ayay madax-madax gudaha isugu soo tuurtay. Waxay gashay aqalkii oo mugdi ah, daahuna u rogan yahay. Xagga iyo xagga iyada oo aan dhugan ayay isdul-taagtey aagaantii ay xareeddu uga buuxday. Markay u hogbatay inay bujisona waxay ku war-heshay, sidii bahalka libaaxa ah, wax dhinaca bidixe ee aqalka uga soo boodaaya. Way bardaddey! Haddiibase way garatay meesha inuu Tuurgadaal ugu gabboon yahay!.

Dibedda inay u booddo ayay isku dayday. Ha yeeshee, kuma ay guuleysan. Dhexda iyo garraarka intuu ku soo dhegey oo dib aqalka ugu soo dalfiyey ayuu kufiyey oo jilbaha dhulka ugu dhuftay. Dharbaaxo iyo tantoobo aan kala-joogsi lahayn ayuu ku boobay. Iyana, ma baryootamin, mana ba'ayaysannine, si walba ayay isaga rawday. Way haraatiday. Wejiga iyo shafkaba way ka ciddiyaysatay. Xubin ay gacan la gaadheyba, dhiig bay ka keentay. Haddana isha midig bay fardhexada kaga xabaashay. Aad markuu u xanuunsadayna wuu ka fuqay.

Isla markiiba, intay jilbo-joogsatey bay 'dhab' tiri halka uu raggu ugu nugul yahay: labada xiniinyood. Kolkaas buu alaladey. Sidii wax jilbis qaniiney ayuu u cabaaday. Dabadeedna, si uu isaga fujiyo, wuxuu halhaleel u laacay bur weyn oo aqalka kaadkiisa yiil. Kii buu hagaag u qabsaday oo habartii madaxa kaga bashaaqay! Iyana nabarka xooggiisa markay dareentay ayay degdeg u sii deysey oo dhulka isbiliqday! Tuurgadaal qudhiisuna, isaga oo aan xanuunku ku yarayn, ayuu aqalkii dibedda uga kudey. Wuxuu u luuday geed meygaag ah oo badanaa uu qoysku maalintii harsado.

Dhiig baa Aarey soo butaacay; dhiig inta maskantii iyo timihiiba soo dhaafay qadaadka iyo laabta waddooyin ka jeexday! Weli kadinka aqalka ayay galgalanaysaa. Sidii haweeney wiilal iyo walaalo ay jeclayd laga laayey ayay u barooranaysaa. 'Hoogey oo ba'ay' wax aan ahayn ayuu afkeedii kari waayey. Sidii werdigii bay ugu celcelisay. Runtii, ma ay miyir-beelin, waxse ma dhaanto! Jahooyinkii baa isaga darsamay. Aad bay u wareersan tahay. Wadnaha ayaa la jiidayaa. Ilmada ayaa dareeraysa oo iyada oo kulul gosheeda isku urursanaysa!

Dhaawaceeduse ha cuslaadee, waxaa ka go'an haddiiba inay odayga ka aar-gudato. Mindi saawir ah oo haanta gedowgeeda saaran ayay gacanta la heshay. Iyada oo kufaa-kacaysa ayay aqalkii ka baxday. Tuurgadaal ayay kolba dhinac ka jeedaalinaysaa, si qummanse wax uma aragto. Baroortii iyo ilmadii baa araggii kala tegey!

## 6. Cali oo hooyadiis u aaray

Iyada oo birtii midigta ku haysata, welina aan garanayn meel ay odaygii ugu hagaagto ayay gadaasheeda jaanqaad ka dareentay. Isagii oo gaadaya intay u malaysay ayay 'iska celi' istiri oo iskula rogtey. Mase odaygiiba ma ahee, waa Cali; barbaar ka mid ah saddexdii ay Tuurgadaal u dhashay.

Indhaha markay ku dhufatayba, mindidii baa gacanteeda ka dhacday. Jilbaha ayay dhulka ku dhufatay oo baroor hor leh af-labadi yeedhay! Iyada oo hiqhiq leh, hadalkeedana aan dhab loo garan karayn ayay inankii u warrantay. Wixii uu aabbihiis ku falay iyo sidii uu maanta u hilbeeyey ayay u marisay, dabadeedna, dhiiggii badnaa oo ka baxay dartiis, way dhibiibtay.

Markaas buu Calina xagga aqalka u garab-galy. Gogolkii uu odaygu maanta dhigtay oo weli fidsan ayuu ku jiifiyey. Dabadeedna kalax biyo ah ayuu waxna ku qulaamiyey, waxna madaxa kaga shubay, dhiiggiina kaga mayray. Markaas bay dhul-dhacday.

Cali, caro ayaa 'dig' siisay. Wuu ismadax-maray. Baroortii habarta ayaa beer-qaadday. Dabadeedna, cabbaar markuu dul-taagnaa ayuu aqalkii isha la raacay. Dhigdhexada iyo dheegsaarka dhexdooda ayuu kor u jeedaaliyey.

Ha yeeshee, gasada aqalka xashinta gudubka u taal ayay indhihiisu ku xasileen. Suu xaggeedii buu u dhaqaaqay oo inta kala furay gacanta u daruuray. Fallaartii ba'nayd ee Dhegla' ayuu kala soo baxay!

Show haddiiba waxaa ka go'day inuu hooyadiis u aaro! Meygaaggii la harsan jirey ee uu aabbihiis ku malaynaayey ayuu beegsaday; isaga oo, malaha, waxa ay isu yihiin markaas wada halmaansan!

Fallaartii ba'nayd iyo qaansadii baa si wacan isugu saaran. Wuxuu dhuukiyo iyo wuxuu gaatamaba, gadaal buu geedkii kaga yimid oo toban saamood wax ka yar u soo jirsadey. Dabadeedna intuu ula sii dhowaadey ayuu odaygii ku sii daayey Dhegla' oo waabaayo wixii ku dhoobnaan jirey ay ku dhooban tahay!

Bawdada lugta midig ayuu kala helay! Saa durbadiiba suntii baa dhiiggiisa ku barxantay. Waa la saaqay. Haddiiba jidiinkii baa qallalay. Markiiba timihii baa madaxa iyo meel kaleba ka hoolmay. Laxaw baa oogadiisii xubin walba maansheeyey.

Go'ii uu guntanaa oo qaarkiisa dambe ay dabayshu ka qaadday ayuu u hinqaday inuu ku soo celiyo. Ha yeeshee, wuu tahli kari waayey. Show, xoog oo idiliba kuma soo dhowaan!

Dhankii uu u dhacay isaga oo weli u yaal ayuu jalleecay halkii laga soo halgaadey. Mase cid kaleba ma ahee, waa Cali! Waa kii isaga iyo Aarey ay ku curteen!

Markaas buu, waxba kale kuma uu orane, wuxuu weyddiiyey: "War fallaarta igu taalli ma Dheglaa?'. Cali oo aan garanayn, waxa uu ku kacay, inuu ku faraxsan yahay iyo inuu ka naxsan yahay ayaa ku jawaabey: "Haa aabbe, waa iyadii!".

Tuurgadaal oo ay ku dabo-yar tahay, nolol dambena aan rajo ka qabin ayaa inankii ku yiri: "War duf-ku-baxe, kolka marada igu celi!". Goorta goorteediina axankiisii ayaa la isugu yimid oo la cunaayey!

Dilkaas silloon ee Tuurgadaal waxaa ka hadhay sheeko caan noqotay oo lagu halqabsado, talo-xumadana loogu maahmaahdo. Waxaa raggii ku halqabsaday ka mid ahaa nin la oran jirey Cigaal-Barre Maxamad Wacays (Marreexaan, Reer Diini) oo isaga iyo wiilkiisii Caammir ay ooridiisu in badan isku dirtay. Dabadeedna waxa uu Cigaal ka baqay wiilku inta uu warka hooyadiis u nuglaado inuu isaga dilo. Markaas ayuu u tiriyey tix waano ah oo uu Tuurgadaal ku xusay. Wuxuu ku yiri:

*Haddii Caammirow hooyadaa talada loo dhiibo*
*Tabtii Tuurgadaal bay rabtaa tebinki Aareey e*
*Asagaba mariid lagu turqay timihi hoolmeene*
*Ha tixgelinnin hadalkeedu waa tii horoo kale e !*

“Cidina intay dhiirrato dhab uma sheegi karto sheekooyinkan shanta ahi xilliyadii ay dhaceen. Macnaheedu wuxuu yahay: lama hubo sannadihii ay dhaceeni kuwii ay ahaayeen. Sidaas oo ay tahay, haddana waa la maamin karaa, waxaana lagu male weyn yahay inay ku aaddan yihiin labadii qarni ee ka horreeyey midkaan hadda bilawga ah ee 21d.

Saddex ka mid ahi (Mataan-Ciideed, Wiilwaal iyo Aadan Galaydh) waxay ku beegan yihiin qarnigii 19d qaybtiisii hore. Labada kale (Shire Jaamac-Gaar iyo midda Reer-Tuurgadaal) waxay iyaguna ku aaddan yihiin bilawgii iyo bartamihii kii 20d.

Af kasta ha la isugu weriyo, cid kastaa ha weriso, ifka meeshii ay doontona ha ka dhacdee, sheeko waliba duluc loo weriyo ayay leedahay. Kuwanina kama duwana oo tilmaantaas ayay wada leeyihiin. Malahayga, dulucda ay xanbaarsan yihiin ayaa sabab u ah waxa ay u halmaami weydey ee muddada dheer ay Soomaalidu isugu werinaysey. Taana in aan carrabka ku dhufto waxa aan ka door-biday in aanan ku dhufan, si aan akhristaha ugu daayo inuu isagu sheeko walba kala soo dhex-baxo wax-dheefka ay maankiisa u yeelan karto iyo murtida uu ugu irkan karo ee uu tusaalaha ka dhigan karo”.

★ ★ ★

Axmed F. Cali “Idaajaa” waa qoraa ka mid ahaan jirey xubnaha Guddigii Afsoomaliga iyo Akademiyadii Cilmiga & Fanka ee Soomaaliya intii u dhexaysey 1973-1991. Wuxuu qoray, isla markaasna faafiyey buugag iyo maqaalado cilmibaaris ku salaysan oo, hilaadda, ilaa dhawr-iyo-soddon ah. Waxaa ugu magac dheeraa: Ismaaciil Mire (Xamar 1974), Dabkuu shiday Darwiishkii: riwaayad (qoraha iyo Yamyam; Xamar 1975), Robinson Crusoe; soomaaliyayn (Xamar, 1978), Poesia Orale Somala: Storia di Una Nazione (qoraha iyo Prof. F. Antinucci; Roma 1986), Maansadii Deelley: ururin & faallo (qoraha iyo Ibraahin Cawed; Torino 2001), Afsoomaaliga iyo warfidiyeenka cusub (London 2003), Aadan-Carab: 1917-2001 (London 2004), Fedraalnimada Soomaaliya: Maxaa looga gol leeyahay? (London 2004), Murtida Maahmaahda Soomaalida (Qaahira 2005), Caleemo-saarkii Garaadka (Birmingham, England 2006). Waxaa kaloo iyaguna jira buugag uu qoruhu diyaariyey, asii daabacaad sugaya sida: Xulka Maansada Soomaalida, Carays Ciise, Cali Afyare, Cali Xuseen, Aqalkii Caasha (sheeko), Waa inoo Berri (riwaayad) iyo qaar kale.